# Puntland Nabad Ah: Astaynta Horumarka

## Dimuqraadiyadda, Maamul-Baahinta, iyo Sarraynta Sharciga



Barnaamijka Tiirarka Nabadda

Garowe, November 2015

## Mahadnaqa

Qoraalkan waxa isla diyaariyey Xarunta Horumarinta Cilmi-baarista Puntland (PDRC) iyo Xafiis-goboleedka Interpeace ee Bariga iyo Bartamaha Africa.

*Cilmi-baarayaasha*
Xriirinta Cilmi-baarista: Ali Farah Ali
Tiirka Amniga iyo Sarraynta Sharciga: Ahmed Osman Adan
Tiirka Dimuqraadiyadda: Mohamoud Ali Said, Hassan Aden Mohamed
Tiirka Maamul-baahinta: Amina Mohamed Abdulkadir
Kooxda Maqal-Muuqaalka: Muctar Mohamed Hersi

*La-taliyaha Cilmi-baarista*
Abdirahman Osman Raghe

*Tifaf-tirka waxa gacan ka geeystey*
Peter W. Mackenzie, Peter Nordstrom, Jessamy Garver-Affeldt, Jesse Kariuki and Claire Elder

*Naqshadda buugga*
David Müller

*Daabacaadda*
Kul Graphics Ltd

*Sawirka bogga Hore: Dhaarinta Golaha Degaanka Galkayo*
*Sawirka bogga dambe: Hooyo wiilkeedi colaad sokeeye lagu dilay oo nabad ku baaqyesa iyo in aan la aarsan – Kooxda Maqawal-Muuqaalka Guur-guura*

*ISBN:* 978-9966-1665-7-9



*Xuquuqda Daabacaadda:* Xaunta Horumarinta Cilmi-baarist, Puntland Development Research Center (PDRC)



*Waxa la Daabacay:* November 2015



Qoraalkan waxa soo saaray Xarunta Horumarinta Cilmi-baarista Puntland iyada oo la kaashaneysa Interpeace wuxuuna ka tarjumayaa aragtidooda oo qura. Aragtiyaha ku jira ma aha kuwo ay qaateen ama ansixiyeen Deeq-bixiyeyaasha wax ka maalgeliyey loomana qaadan karo aragtida rasmiga ah ee deeq-bixiyeyaasha ama adeegyadooda. Deeq-bixiyeyaashu ma dammaanad qaadayaan dhab ahaanta xogta halkan ku qoran, mas'uulna kama aha xigashadeeda.

# Shaxda bogagga


Ereyo la soo gaabshey 6
Araar 7

**1 Hordhac 8**

1.1 *Xaaladda Mandiqadda* 10
1.2 *Tiirarka Nabadda: Wajiga II* 12

**2 Amniga iyo Sarreynta Sharciga 14**

2.1 *Hordhac* 14
2.2 *Caqabadaha Amniga* 15
2.2.1 Awoodaha Hay'adaha Amniga oo Hooseeysa 15
2.2.2 Hubka oo faraha ka baxay 17
2.2.3 Xiriirka booliiska iyo bulshada 18
2.2.4 Xag-jirnimo 18
2.2.5 Arimaha xuduudaha gudaha iyo dibadda 19
2.2.6 Kalluumaysiga sharci darrada ah iyo saamenyta uu la iman karo 20
2.3 *Caqabadaha Garsoorka iyo Hannaanka Sharciga Puntland* 21
2.3.1 Caqabado hay'adeed oo ba'an 21
2.3.2 Hannaanka garsoorka dawladda iyo kan dhaqanka 22
2.4 *Caqabadaha dib-u-heshiisiinta bulshada* 23
2.4.1 Soo-noqnoqshada colaadaha khayraadka ku salaysan 23
2.4.2 Wadajirka bulshada oo hooseysa 23
2.5 *Sahaminta Fursadaha Jira ee Wax-ka-tari kara Xallinta Caqabadaha Amniga* 24
2.5.1 Aragti iyo dadaalada amniga ee muuqda 25

**3 Tiirka Dimuqaraadiyadeynta 34**

3.1 *Hordhac* 34
3.2 *Caqabadaha Hortaagan Geeddi-Socodka Dimuqraaddiyadda* 35
3.2.1 Ka gudbidda Hannaanka Qabiilka iyo U-gudbidda Dimuqraaddiyadda 35
3.2.2 Ka go'naanshaha iyo Awoodda Waxqabad oo Liidata 39
3.2.3 Baahsanaanta iyo Helitaanka Sahlan ee Hubka 40
3.3 *Caqabadaha Hor-taagan Doorashooyinka* 40
3.3.1 Wacyiga Dadka oo Hooseeya 40
3.3.2 Jiritaan La'aan Maxkamad Dastuur 41
3.3.3 Jiritaan La'aan Xuduudaha Gobollada iyo Degmooyinka 41
3.3.4 Jiritaan La'aan Diiwaanka Cod-bixi yeyaasha iyo Waraaqaha aqoonsiga 41
3.3.5 Ilaha Dhaqaale oo Xaddidan 42

| | | |
|---|---|---|
| | 3.3.6 Axsaabta Siyaasadeed ee Cusub | 42 |
| 3.4 | *Fursadaha Jira ee Faa'idada u Leh Dimuqraaddiyadda Puntland* | 42 |
| | 3.4.1 Taageerada Dadka | 43 |
| | 3.4.2 Ka go'naanshaha Guud ee Dawladda (General government commitment) | 43 |
| | 3.4.3 Faa'idada Dadku ka Filayo Dimuqraaddiyadda | 44 |
| | 3.4.4 Wakhti Ku Filan (Sufficient time) | 44 |
| 3.5 | *Meelaha Laga Xoojin Karo Dimuqraaddiyadda* | 45 |
| | 3.5.1 Dib-u-Xoojinta Midnimada Beelaha | 46 |
| | 3.5.2 Dar-dar Gelinta Barashada Madaniga iyo Cod-bixiyaha | 46 |
| | 3.5.3 Soohdimeynta Degmooyinka Puntland | 47 |
| | 3.5.4 Aqoonsiga iyo Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha | 48 |
| | 3.5.5 Sugidda Amniga | 49 |
| | 3.5.6 Dhismaha Maxkamad Dstuuri ah | 49 |
| **4** | **Tiirka Maamul-Baahinta** | **51** |
| 4.1 | *Hordhac* | 51 |
| 4.2 | *Guulihii Laga Gaaray Maamul-Baahinta* | 52 |
| 4.3 | *Caqabadaha Hor-Taagan Maamul-Baahinta Puntlana* | 54 |
| | 4.3.1 Jiritaan La'aan Awood Hay'adeed (maamul, dhaqaale iyo xoog shaqaale) | 54 |
| | 4.3.2 Ka-qaybgalka Dadka oo Liita (Low citizen participation) | 56 |
| | 4.3.3 Dhaqaale Yari (Limited Financial Resources) | 57 |
| | 4.3.4 Ka Faa'ideysiga Kheyraadka Dabiiciga | 58 |
| | 4.3.5 Awoodda Dakhli Dhalin (Revenue generation capacities) | 58 |
| | 4.3.6 Hufnaan iyo La-xisaabtan (Transparency and accountability) | 59 |
| | 4.3.7 Bixinta Adeegga (Public Service Delivery) | 59 |
| | 4.3.8 Kororka Tirada Degmooyinka: Natiijada Ka Dhalatay | 60 |
| | 4.3.9 Xiriirka u Dhexeeya Dawladda Dhexe iyo Dawladaha Hoose | 60 |
| 4.4 | *Fursadaha Hannaanka Maamul-baahinta Puntland* | 61 |
| 4.5 | *Meelaha Laga Xoojin Karo Dimuqraaddiyadda* | 62 |
| | 4.5.1 Xoojinta Awoodda Waxqabad ee Dawladaha Hoose | 62 |
| | 4.5.2 Xoojinta Ka-qaybgalaka Arrimaha Degaanka | 63 |
| | 4.5.3 Wax ka qabashada Kororka Degmooyinka | 64 |
| | 4.5.4 Xoointa Awoodda Dakhli-Ururin ee Dawladaha Hoose | 64 |
| | 4.5.5 Xoojinta Xiriirka Hay'adaha Dawladda | 65 |
| **5** | **Gunnaanad** | **67** |
| **6** | **Raadraaca** | **69** |

## Ereyo la soo gaabshey

| | |
|---|---|
| ALGAPL | Association of Local Government Authorities of Puntland State |
| CRRC | Conflict Resolution and Ratification Committee |
| CSO | Civil Society Organization |
| DDR | Disarmament, Demobilization and Reintegration |
| DfP | Dialogue for Peace |
| FGD | Focus Group Discussion |
| FGS | Federal Government of Somalia |
| HoR | House of Representatives |
| IDP | Internally Displaced Person |
| KII | Key Informant Interviews |
| MAVU | Mobile Audio-Visual Unit |
| MOCFAD | Ministry of Constitution, Federal Affairs and Democratization |
| MOI | Ministry of Interior |
| MOS | Ministry of Security |
| PAR | Participatory Action Research |
| PDRC | Puntland Development Research Center |
| PMPF | Puntland Marine Police Force |
| PoP | Pillars of Peace |
| PSM | Puntland Stakeholders Meeting |
| SC | Steering Committee |
| SfP | Search for Peace |
| SRoL | Security and Rule of Law |
| SSC | Sool, Sanaag and Cayn |
| SSF | Somalia Stability Fund |
| TPEC | Transitional Puntland Electoral Commission |
| UNSOM | United Nations Office for Somalia |
| WSPI | War-Torn Societies Project International |

## Araar

Qoraalkani waa natiijada cilmibaaris sannad qaadatay oo lagu soo ogaanayey caqabadaha iyo fursadaha ka jira arrimaha la xiriira dimuqraadiyaynta, baahinta maamulka iyo amniga iyo sarraynta sharciga. Waxa lagu fuliyey Barnaamijka Tiirarka Nabadda wajigeeda 2aad, kaas oo ay si wada jir ah isaga kaashadeen hay'daha PDRC iyo Interpeace oo sannado badan ku bahoobey horumarinta nabadda iyo baritaarka dimuqraadiyadda.

Cimibaaristu waxay siyaabo kala duwan ula kulantay dad ka badan ilaa 389 iyada oo si gaar-gaar ah loo waraystay ama ka qaybgalay dood-kooxeedyo, kuwaas oo ku sugnaa 11 degmo oo ka mid ah 9ka gobol ee Puntland ka kooban tahay. Waxa intaas raacey ergooyin tiradoodu dhantahay 140 qof oo ka qaybgalay Shirweynihii Deneeyeyaasha Puntland oo Garowe lagu qabtay 3dii ilaa 5tii February 2015, shirkaas oo ansixiyey natiijadii Cilmibaarista. Xarunta Horumarinta Cilmibaarista iyo Interpeace waxay uga mahadnaqayaan dhammaan dadkii ka qaybqaatay cilmibaarista iyo wax-ku-biirintoodii qiimaha badnayd oo wax-ku-oolka ahayd.

# 1 Hordhac

Xarunta Horumarinta Cilmi-baarista Puntland (XHCP) waa hay'ad aan dawli ahayn oo saldhigeedu yahay Garowe, Galkacayo-na ku leh laan. Xarunta waxa la asaasay bishii November 1999, iyada oo ka xuubsiibatey Hay'addii la oran jirey Mashruuca Bulshooyinka dagaalladu Aafeeyeen ee Caalamiga ah (War-torn Societies Project International – WSPI), haatanna loo yaqaan Interpeace.

> Himilada Xarunta: in ay ka qayb-qaadato, iyada oo ah daneeye iyo danle, nabadda iyo dib-u-dhiska Somalia; ayna gacan ka gaysato abuuridda isku xukunka nidaam dimuqraaddi ah, horumarinta dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada, iyo xurmaynta xuquuqda aadanaha.

Xaruntu waxa ay magac iyo maamuusba ku kasbatay in ay noqotay hay'ad ka shaqaysa nabadda gobollada Waqooyi-bari Somalia haatanna loo yaqaan Puntland oo ka soo kabanaysa aafada Dagaalladu sokeeye (kuwaas oo qarxay sannadkii 1991), iyo weliba colaadihii diimeed iyo fawdadii ka dambaysey.

Lix iyo tobankii sano ee ina soo dhaafay, xaruntu waxa ay ahayd madal dhex-dhexaad ah oo lagu wada tashado, lagu heshiiyo, iyada oo guud ahaan la adeegsanayo barnaamijyo ay iska kaashadeen hay'adda Interpeace.

Waxyaabaha u fududeeya Xarunta in ay ku guulaysato hawleheeda waxa ugu mudan in ay kulmiso wakiillada dhammaan qaybaha bulshada Puntland ka kooban tahay, iyada oo hoos u sii eegeysa qaybaha bulshada ka tirsan ee la hadhiinaysto ama aan ka-qayb-gal ku lahayn habka go'aan qaadashada, sida haweenka, dhallinyarada iyo dadka la hayb-sooco. Si looga qaybgeliyo doodaha muhiimka ah, waxa ay xaruntu xaqiijisaa in hab-socodka hay'adaha muhiimka u ah bulsho awood leh iyo dawladnimo si fiican u shaqayneysa ay si dhab ah uga muuqdaan danaha kala duwan ee reer Puntland.

Siyaabo kala duwan ayey Xaruntu u hirgelisaa in bulshadu wadatashato, iyada oo si gaar-gaar ah ula xirriira ama isugu keenta madal ballaaran iyo shirweyneyaal, sidaa oo kalena u qabata tiro barnaamijyo tababbarro, hawlo wacyi-gelin iyo barashada madaninimada, kuwaas oo ay kala kaashanayso dawladda, daneeyeyaasha maxalliga ah iyo hay'adaha caalamiga ahba. Waxa kale oo ay adeegsataa aaladda maqal-muuqaalka guur-guura oo ku habboon in si baahsan xogta loogu gudbiyo bulshada, doodana lagu dhex dhigo.

XHCP/PDRC waxa ay adeegsataa Habka Cilmi-baarista laga wada Qaybgalay (Paticipatry Action Research – PAR), taas oo ku qotonta mabaadii'da lagu xoojinayo awoodaha, horumarinta u dhammaanshaha, iyo baadi-goobka go'aan-qaadasho loo dhan yahay oo heer kasta

ah. Nuxurka Habka Cilmibaarista laga wadatashaday waa baadi-goobka xal la isku raacsan yahay in loo helo caqbadaha ay isla soo ogaadeen daneeyeyaasha ay khusayso oo dhan. Xalkaasi waxa uu ku saleysan yahay ka qayb-galka dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada (tusaale ahaan in si baahsan looga qaybgeliyo [Gudub - Horizontal] iyo in bulshada qaybaheeda asaasiga ah illaa iyo siyaasiyiinta [Joog - vertical]) laga soo unko. Taasi waxa ay horseedeysaa in lahaanshaheeda ay bulshadu yeelato, ayna ku gaaraan go'aan-qaadashada xagga qorsheynta iyo maamulkaba. Sannaddihii ina soo dhaafay habkaas cilmi-baarista laga wada-qayb-galay waxa uu saldhig adag u noqday nabadaynta ay wadeen hay'adaha Interpeace iyo XHCP/PDRC.

Aragtida "Barnaamijka Wada-tashiga Nabadda" waa in uu bilo oo Dhidibbada u aaso habka nabadaynta iyo dhismaha dawladeed ee Somalia iyada oo la adeegsanayo u-dhammaansho, saldhig cilmibaaris iyo muwaafaqo laga wadatashaday.

XHCP/PDRC waxa ay hirgelisey tiro barnaamijyo ku qotoma habka cilmi-baarista laga wada-tashaday kuwaas oo ay ku iftiimiso arrimaha la xiriira colaadaha soo food-saara bulshada reer Puntland si ay uga hawlgalaan, talooyinna uga dhiibtaan wax ka qabashada ammuurahaas. Barnaamijka wada-tashiga Nabadda [The Dialogue for Peace (DfP)], oo la fuliyey intii u dhexeeysey 2004 iyo 2008, waxa uu geyiga Soomaaliya ee colaaduhu aafayeen ka abuuray madal wada-tashi oo wax-ku-ool ah. Iyada oo daneeyeyaasha lagu kulminayey madal dhex-dhexaad ah ama gogosha wada-hadalka iyo geedka hoostiisa.

Ujeeddada wadahalladaasi waxa ay ahayd in ay uga doodaan arrimaha ka dhexeeya, isla markaana xal ugu helaan colaadaha aloosan, marka ay isla garwaaqsadaan halka ay dhibaatadu salka ku hayso. Shirarkaasi waxa ay abuureen fursado lagu soo celinayo is aaminaad, isku kalsooni iyo sidoo kale in la yagleelo dawladnimo waarta iyo is-xukun. Qoraalladii ka soo baxay cilmibaaristaas waxa ka mid ahaa Maal-gashiga Mustaqbalka (Funding the Future), oo ku saabsanaa sidii dakhliga guud si wanaagsan loogu kharash-garayn lahaa adeegga bulshada, iyo weliba qoraallo laga qoray dhanka siyaasadda sida Heshiiskii Gobolka Mudug ee 1993dii: nabad-ka-dhallinta Is-gooysyada iyo Xididdada Dawlad-Wanaagga oo ka hadlayey habka geeddi-socodka Dimuqraadiyadda (Nidaamka Xisbiyada Badan).

Aragtida Barnaamijka Tiirarka Nabaddu waa in uu ka unkamo khibraddii laga helay dhawr iyo toban sano ee nabad iyo dawlad-dhis iyo taakulayntii hay'adaha dawladnimada si loo horumariyo, isla markaasna dhidibbada loogu aaso baritaarka iyo sii wadidda nabad Soomaaliya oo dhan ka hirgasha iyada oo lagu sar-jarayo hannaan muwaafaqo ku jahaysan oo nabad-dhisid iyo dawla-dhisid ku qotoma.

Barnaamijka Baadigoobka Nabadda [The Search for Peace (SfP)] ayaa ka soo farcamay kii ka Horreeyey ee Wada-Tashiga Nabadda, kaas oo ka koobnaa in diraasad qoto-dheer lagu sameeyo colaadaha iyo sidii looga gun-gaarilahaa xallintooda iyo waayo-aragnimadii laga helay dhex-dhexaadintooda. Dheeftii ama mirihii ka dhashay diraasaddaasi waxa u ahaa Waayo-aragnimadii Puntland: Abbarta gun-ka-unkan ee nabadda iyo dawlad-dhiska (The Puntland Experience: A Bottom Up Approach to Peace and Statebuilding[1]). Barnaamijka Baa-

1 Puntland Development and Research Center (PDRC). "The Puntland Experience: A Bottom-up Approach to Peace and State Building." The Search for Peace: Somalia Program, in collaboration with Interpeace, 26 July 2011.

digoobka Nabaddu kuma ekayn oo keliya cilmibaarista ammuuraha maxalliga ah ee Soomaaliya balse waxa kale oo uu diiradda saaray falanqaynta iyo qiimaynta shirarkii is-daba-joogga ahaa ee lagu baadigoobayey dib-u-heshhisiinata Qaran iyo wixi ka soo baxay.

Barnaamijka Tiirarka Nabaddu waxa uu ku dhisan yahay Khibraddii ay XHCP/PDRC iyo Interpeace ka heleen shan iyo toban sano oo ay iska kaashanayeen nabadaynta iyo dhismaha dawladnimo. XHCP/PDRC iyo Interpeace waxa ay fuliyeen barnaamijyo nabadayn iyo dawlad-dhisba ah, kuna hirgelisey dhaqan wada-hadal, u-dhammaansho, ka-wada-qaybgal iyo wada-tashiga qaybaha kala duwan ee bulshada iyo maamullada. Barnaamijyadaasi waxa ay ku salaysnaayeen muwaafaqo-raadin, is-kaabid, ka mid ahaansho iyo lahaansho maxalli ah.

Wajiga kowaad ee barnaamijka Tiirarka Nabaddu waxa uu bilowday horraantii 2009kii waxa uuna dhammaaday dabayaaqadii 2012. Wajiga labaad ee barnaamijku waxa uu ku bilawday diraasad iyo astayn lagu soo ogaanayey Caqabadaha, Fursadaha iyo dadaallada ka jira Tiirarka Amniga iyo Sarreynta Sharciga, Dimuqraadiyadda iyo Maamul-baahinta. Natiijadii cilmibaaristaas ayaa lagu soo bandhigay Shirweynihii Daneeyeyaasha Puntland Bishii February 2015. Qoraalkani waxa uu xambaarsan yahay natiijadii ka soo baxday astayntii la soo sameeyey iyo weliba macluumaad kale oo la soo ururiyey Shirweynahaas ka dib.

Markii la isku waafaqay aaladaha iyo istratejiyada loo adeegsanayo, kooxda cilmibaaristu waxa ay soo booqdeen illaa 11 degmo oo si taxaddar leh loogu xushay baaxaddooda, halka ay dhacaan, heerkooda dhaqaale, iyo mugga ay siyaasadda ku leeyihiin. Muddadii astayntu socotey kooxdu waxa ay la kulmeen cuqaasha/odayaasha, culimada, ururrada bulshada, wakiillo dadka dan-yarta ah, barakacayaasha, siyaasiyiin, waxgarad iyo shaqaale beesha caalamka ka tirsan. Meelaha ay kooxda cilmibaaristu soo booqdeen kuma ekaan oo keliya waraysiyo iyo dood-kooxeedyo, balse waxa ay soo bandhigayeen aflaam (Films) lagu muujinayo guulihii laga soo hoyey wajigii kowaad ee barnaamijka Tiirarka Nabadda waxa ayna isla markaas faafinayeen farriimo wacyigelinta madaniga ah.

Shirweynihii wadatashi oo ku saabsanaa astayntu waxa uu isla waafaqay mugga ay leeyihiin caqabaduhu, halkaas ayey daneeyeyaashu ku ansixiyeen, mudnaantana u kala siiyeen. Sidaas oo kale, sannadkii 2010, ayaa caqabadahaas loogu ansixiyey Shirweynihii Daneeyeyaasha[2]. Natiijada ka soo baxday waxa lagu daabacay qoraal la magac baxay "Asteynta Saldhigga Nabadda". Ka dib qabsoomidda Shirweynahaas, Xaruntu waxa ay ku tallaabsatay fulinta barnaamij cilmibaaris oo ay ku baadi-goobeyso tallooyin iyo hawlgal.

Wajigii kowaad ee barnaamijka Tiirarka Nabadda, ee kor ku qeexan, waxa uu curiyey wareeg labaad oo cilmibaaris oo uu asaas u yahay qoraalkani.
Tan iyo markii uu bilowday wajiga kowaad ee barnaamijka Tiirarka Nabaddu, xaaladda Puntland waxa ku dhacay is-beddel weyn, gaar ahaa saaxadda siyaasadda.

**2** Xarunta Horumarinta Cilmibaarista Puntlabd "Qpraalka Puntland: Astaynta Caqabada Hortaagan Amniga iyo Sarraynta Sharciga, Geedi-socodka Dimuqraadiyadda iyo Maamul Baahinta." Pillars of Peace: Somalia Program, in collaboration with Interpeace, 27 May 2014.

## 1.1 Xaaladda Mandiqadda

Bishii January 8dii 2014, Puntland waxa ay ka soo samata-baxday qalalaase siyaasadeed,

bulsho, iyo is-mari-waa amni, oo ka dhashay hakintii geeddi-socodkii Dimuqraaddiyadda. Taasi waxa ay dhacday 14kii July 2013, markii Madaxweyne Cabduraxmaan Sheikh Maxamed (Faroole) uu hakiyey doorashadii dawladaha hoose ee Puntland. Arritaasi waxa ay kelliftay in dib loogu noqdo nidaamkii "Isku-dhafka" ahaa ee kala guurka siyasadeed, oo isugu jirey habka dhaqanka iyo kan dimuqraaddiga aha ee ku salaysan xulasho iyo doorasho balse aan dadku wax soo dooranayn. Waa markii afraad oo nidaamkaas isku-dhafka ah la adeegsadey illaa intii la asaasay Puntland 1998dii.

Bishii November 2013, odayaasha dhaqanku waxa ay bilaabeen soo xulidda xildhibaannada Golaha Wakiillada (GW), kaas oo horay loo kala diray bishii October 31dii. Geeddi-socodkii waxa uu cagaha la galay qalalaase ka dhashay siyaasado iska soo horjeeda oo ay kala wateen maamulkii markaas talinayey iyo mucaaradkii sida aadka ah u kala firirsanaa. Madaxweynihii xilligaas hoggaanka hayey ayaa magacaabay Guddiga Ansixinta iyo Xallinta Khilaafaadka (GAXKH) oo u xil-saarnaa xallinta wixii khilaafaad ah ee ka dhasha xulashada Xubnaha Golaha Wakiillada ee cusub. Isla markii Guddiga la magacaabay, siyaasiyiintii tartanka ku jirey waa ka soo horjeesteen iyaga oo dhaliilay habka loo magacaabay iyo sida loo xushay-ba. Waxaase bilawday wada-tashiyo heerar kala duwan oo looga hadlayey siyasadda iyo amniga ayna ka qayb-qaadanayeen hoggaanka dhaqanka iyo culimada, siyaasiyiinta, ururrada bulshada iyo weliba Beesha Caalamka. Ujeeddada wada-tashiyadu waxa ay ahayd in xal loogu helo is-mariwaaga siyaasadeed iyo kan amni oo soo xumaanayey.

Bishii December 31dii, 2013, waxa la daahfuray Golaha Wakiillada Puntland ee afraad. Golaha waxa ka muuqdey tiro badan oo cusub iyo in kale oo kii hore ka tirsanayd. Laba haween ah oo qura ayaa xubno ka ah GW ee cusub. Dhammaan daneeyeyaasha, oo ay ku jiraan siyaasiyiintii tartanka ku jirey, way isla waafaqeen GW-da ee cusb. Bishii January 8dii, 2014, xildhibaannadu waxa ay cod-bixin ku doorteen madaxweynihii shanta sano ee soo socota. In kasta oo loollanka doorashadu ahaa kii ugu adkaa ee Puntland soo mara, haddana geeddi-socodku waxa uu ku dhacay si nabad ah, waxana la caleemasaaray Madaxweyne Cabdiwali Maxamed Cali Gaas, oo cod qura guushu ku raacday. Beesha Caalamka iyo qurbajoogtuba waa soo dhaweeyeen is-beddelka sida nabadda ah ku dhacay.

Muddadii uu hoggaanka cusubi talada hayey, amnigu guud ahaan wuu soo hagaagayey, in kasta oo buuraha Golis iyo Garowe-ba weeraro ka dhaceen. Waxa jira caqabado ka soo ifbaxaya geeddi-socodka habka federaalka iyo muranka xuduudeed ee waqooyiga Mudug. Dhanka kale waxa bilawday mashaariic horumarineed, hase yeeshe bixinta adeegyada wax badani iskama beddelin. Kaabadda Midigar[3] ayaa dhismeheeda la dhammeystiray, waxa socda dhismaha Garoonka Caalamiga ah ee Bosaso waxaana qorshaha ku jira mashaariic kale oo waaweyn. Hase ahaatee, dhallinyaradii weli waxa ay u  tahriibayaan Yurub iyaga oo inta gaartaa, si qar-iska-xoornimo ah uga tallaabayaan waddooyinka khatarta badan ee Gacanka Cadmeed, Saxaraha Sudan iyo Libya, taas oo ay ugu wacan tahay shaqo-la'aanta ba'an ee ka jirta dalka. Maamulka waxa culays ba'ani ka haystaa, dhaqaalahana ciriiri geliyey, dakhliga soo xerooda iyo kharashka oo aan isu dhigmin. In kasta oo dawladdu xoogga saartay isbeddelka dhaqaalaha sida curinta ururinta canshuuraha berriga, haddana waxa dhacda in ay bixin weydo mushahaarooyinka badankood. Waxaabase dhacda in mushaharooyinka dawladdu bixiso aaney buurnayn oo dabooli karin baahida shaqaalaha iyo xaasaskoodaba.

**3** Kaabadda Midigar oo waddada laamiga ah saran, ilaa 45 km woqooyiga Garowe, taas oo ku xirta magaalooinka Qardho iyo Bsaso. Kaabaddu waxa burburiyeye duufaankii 2013. Kaabaddu waxay ku kacda ilaa hal mayan oo Dollar, oo dhammaanteed Iska-Wax-U-qabso lagu ururiyey.

Arrimuhu si kastaba ha ahaadeene, bulshada oo si weyn uga filaneeysey in maamulka cusubi uu geeddi-socodkii dimuqraaddiyadda ee hakaday dib u bilaabo, si dhab ah maamulka hoos loogu daadejiyo iyo in la qabto shirweyne wada-tashi ayey u badan yihiin doodaha bulshadu. Haddaba, iyada oo dawladdu la kaashaneysa Xarunta PDRC, waxa ay durba dib u soo noolaysay golayaal degaan oo hore loo kala diray. Waxa kale oo la dhisay golayaal degaan oo degmooyin dhawaan la magacaabay, kuwaas oo ay ka mid yihiin Xarfo, Uffayn, Ballidhidin iyo Baargaal. XHCP/PDRC waxa ay tababarro siisay markii tiro ka mid ah golayaasha degaanka iyo dawladduba si toos ah uga codsadeen. Guud ahaan golayaasha degaanku, ha ahaadeen kuwa dib loo dhisay ama kuwa dhawaan la magacaabaye, waxa haysta dhibaato dhanka ka muuqashada/iska-arkidda ah. In kasta oo degmooyinka Jarriban, Xarfo, Uffayn iyo Ballidhidin loo dooray guddoomiyeyaal dhallinyaro ah, haddana ka qaybgalka dhallinta, haweenka iyo dadka la hayb-sooco aad ayuu u hooseeyaa.

Bishii March 2014, XHCP/PDRC iyo Interpeace waxa ay fuliyeen ra'yi-ururin ku saabsan fursadaha ka jira geeddi-socodka nidaamka xisbiyada badan. Ujeeddada ugu muhiimsan ee xog-ururintaasi waxa ay ahayd in la ogaado, lana qiyaaso, fikradaha bulshadu ka qabto iyo inta ay le'egtahay taageerada loo hayo in dib loo bilaabo. In badan dadkii jawaabaha bixiyey, ilaa 86%, waxa ay dawladda ka dalbadeen in ay sida ugu dhaqso badan u magacawdo Guddiga Doorashooyinka ee ku meel-gaarka ah si uu dalka ugu diyaargareeyo qabsoomidda doorashooyinka soo socda, si ay caddayn ugu noqoto ka go'naanshaha hoggaanka dalka dib-u-bilaabidda geeddi-socodka nidaamka xisbiyada badan. Ra'yi-ururintu waxa kale oo ay daaha ka qaadday fikradaha dadweynu ka qabo iyo ammuuraha hortaagan iyaga oo ku ra'yi dhiibaneyey tiro ahaan iyo tayo ahaanba isu furidda ra'yiga dadweynaha iyo cidda go'aan-qaadashada leh, iyo sidoo kale wacyi-gelin guud.

## 1.2 Tiirarka Nabadda: Wajiga II

Bilihii May iyo June 2014, XHCP/PDRC waxa ay bilawday astaynta wajiga II ee barnaamijka Tiirarka Nabadda. Astayntu waxa ay isugu jirtey dood-kooxeedyo hordhac ah oo dhexmaray dad khubaro ah si ay u dejiyaan, una tifaftiraan, qaabka xog-ururinta. Bilihii September iyo October waxa bilawday astayntii rasmiga ahayd oo lagu soo kala bixiyey 11 degmo oo ka tirsan 9ka gobol ee Puntland. Xulashada degmooyinkaas waxa lagu saleeyey halka ay dhacaan, gobolka, heerka darajadooda (A, B ama C sida ku qeexan Xeerka lab. 7 ee 2005). Ilaa 389 ayaa astaynta kaga qaybqaatay waraysiyo iyo dood-kooxeedyo.

Ujeeddada ugu muhiimsan ee laga lahaa astayntu waxa ay ahayd in la soo ogaado caqabadaha hortaagan, fursadaha ka jira, iyo suurto-galka wax-ka-qabadka tiirarka dimuqraaddiyadda, maamul-baahinta iyo amniga iyo sarraynta sharciga. Taasi waxa ay u ahayd fursad kale oo XHCP/PDRC u heshay in ay dib ula kulanto bulshooyinkii ay wajigii 1aad ku soo booqatay goobohooda si ay wax uga ogaato waxa isbeddel ah oo ku dhacay aragtidooda iyo in loo faahfaahiyo hawsha ay Xaruntu wakhtigaa fulineysay. Kooxda cilmibaaristu waxa ay la kulmeen qaybaha kala duwan ee bulshada sida odayaasha, culimada, dhallinyarada, haweenka, ururrada bulshada iyo dadka la hayb-sooco iyada oo loo qabanayey waraysiyo, dood-kooxeedyo, iyo dood-wadaagyo mawduucyo gaar ah.

Faahfaahita natiijadii ka soo baxday astaynta waxa lagu bal-ballaarin doona qaybaha soo socda ee qoraalkan. Haddii aan si kooban u soo

bandhigno, natiijadu waxa ay muujisay in uu horumar ka jiro dhanka nabadeynta, balse ay weli ka jiraan caqabado dhanka awoodaha. Caqabadaha ugu daran ee hortaagan geeddi-socodka dimuqraaddiyadda waxa ka mid ah ka gudbid la'aanta nidaamka qabaliga ah iyo u-gudbidda nidaamka xisbiyada badan, ururradii siyaasadda oo awoodohoodu koobnaayeen, fikrado khaldan oo laga faafiyey xisbiyada iyo kaalintooda siyaasadeed, maqnaanshaha dib-u-heshiisiin siyaasadeed iyo mid bulsho-ba. Xagga maamul-baahinta, caqabadihii ugu waaweynaa oo soo wajahay waxa ugu darnaa ka-qayb-galka bulshada oo hooseeyey, taranka tirada degmooyinka iyo xuduudohoodu oo aan qeexnayn, dakhliga dawladaha hoose oo kooban iyo awoodaha oo tabaryari ka jirto. Dhanka Amniga iyo Dib-u-heshiisiinta bulshada caqabadaha weli taagan waxa ugu culus awoodaha wax-qabad ee hay'adaha oo tabar yar (siiba kuwa garsoorka iyo amniga), hubka ku jira gacanta bulshada, xiriirka bulshada iyo booliiska oo liita, xag-jirnimo soo kordheysa iyo colaadaha beelaha dhexmara oo aan dhammaanayn ama soo noq-noqda.

Waxa saddexda tiir ku jira caqabado badan oo isa saamaynaya, sida muranka ka jira xuduudaha demooyinka, xag-jirnimada, dib-u-heshiisiinta bulshooyinka oo aan jirin iyo awoodaha wax-qabad ee hay'adaha dawliga ah oo hoosaya. Hawl-galkii astaynta Tiirarka Nabadda waxa lagu soo gunaanadey Shirweynihii 2aad ee Daneeyeyaasha Puntland oo ay ka soo qayb-galeen dad gaaraya 140 qof oo wakiillo ka ahaa bulshooyinka maxalliga ah, maamullada, iyo wakiillo beesha Caalamka ka socdey ayna uga doodeen natiijadii, ku falanqeeyeen cilmibaarista saamaynteeda, ku ansixiyeen caqabadihii la soo astayey iyaga oo mudnaan kala siiyey, iskuna waafaqay talooyinka lagu hawlgelayo.

Kooxda cilmi-baarista XHCP/PDRC waxa ay shirweynaha ku soo bandhigeen diraasaddii la sameeyey, waxa kale oo ay ku lammaaneeyeen aflaam dokumentari ah oo diraasadda bari-taarayey. Saddex cisho oo laga doodayey caqabadaha iyo fursadaha jira, waxa la isla xushay mawduucyada la abbaarayo iyo yoolalka la hiigsanayo. Shirweynaha Daneeyeyaasha Puntland waxa uu meel-mariyey shuruudaha looga baahan yahay Guddiga Hoggaaminta Tiirarka Nabadda oo dusha ka eegi doona fulinta hawlaha tiir kasta iyada oo XHCP/PDRC ay fududeeye ka tahay, halkaas oo lahaanshaha barnaamijku ku wareegayo gacanta daneeyeyaasha. Guddiyada Hoggaaminta Tiirarku iyaga oo la kaashanaya XHCP/PDRC waxa ay ku heshiin doonaan "Mawduuca Diraasadda - Entry Point" – soo jeedinta waddada loo marayo fulintiisa iyo sida loo xallinayo ama looga jibakeenayo muddada la fulinayo.

Si loo soo bandhigo hab-raaca iyo natiijada, XHCP/PDRC waxa ay hirgelisey qoraalkan ku saabsan tiirarka, kaas oo faahfaahinaya caqabadaha iyo fursada la soo asteeyey, mudnaantana lagu kala siiyey Shirweynihii Daneeyeyaasha Puntland, iyo waddooyinka u furan sidii wax looga qaban lahaa ammuurahaas iyaga oo looga baahan yahay in dawladdu, bulashada  rayidka ahi iyo guud ahaan reer Puntland ay xal u helaan.

# 2 Amniga iyo Sarreynta Sharciga

## 2.1 Hordhac

Lix iyo tobankii sano ee ugu danbeeyay, Puntland waxay ku naalloonaysay nabad iyo xasillooni halka bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya ay ka jireen amni darro iyo jahawareer siyaasadeed. Arrintan ayaa qeyb ahaan loo aanayn karaa wada-dhalashada ka dhaxaysa beelaha deggan Puntland, u-heellanaanta shacabka iyo hoggaanka dhaqanka ee nabadda, iyo dadaallo aan kala go' lahayn ee xukuumadihii is-xigay ee Puntland ay uga hawl galeen adkaynta nabadda iyo amniga dawladda. Inkasta oo ay dadaalladaasi jireen, haddana Puntland waxaa lasoo gudboonaaday xaalado siyaasadeed iyo kuwo amni oo cakiran, kuwaasi oo saameyn ba'an ku yeeshay geeddi-socodka siyaasadda iyo midnimada bulshada. Khataraha amni ee Puntland soo wajahay waxaa ka mid ah burcad-badeednimo, dagaal beeleedyo soo noqnoqday iyo xagjirnimo (Al Shabaab) - dhammaan arrimahaasi waxay halis dhab ah ku ahaayeen ilaa iyo haddana ku yihiin xasilloonida Puntland.

Sida lagu ogaaday daraasaddii labaad ee astaynta, waxaa jira caqabado halis ah oo lid ku ah hannaanka amni ee Puntland sida tayada booliiska oo hooseeysa, sirdoonka iyo danbi-baarista oo liidata, hubka oo bulshada gacanta ugu jira, midnimada bulshada ookala dhantaalan, fulinta sharciga iyo nidaamka garsoorka oo awoodoodu hooseyso. Arrimahani waxay caqabad ku yihiin in la helo amni waafi ah iyo ku-dhaqan sharci taabba gal ah oo Puntland ka tisqaada.

Marka laga soo tago caqabadahaan, Puntland waxay horumar la taaban karo ka gaadhay dagaalka lagula jiro Al Shabaab-ta saldhigeedu yahay buuraha Galgala, iyada oo horumar wayn laga sameeyay ciribtirka burcad-badeednimada - iyada oo lagu wiiqay iskaashi ay sameeyeen bulshada iyo dawladda. Aasaaskii Ciidamada Booliiska Badda ee Puntland (PMPF) iyo soo-saariddii xeerarka la-dagaallanka burcad-badeednimada iyo argagixisada ee xilligii Madaxweyne Faroole waxay ahayeen guulo muhiim ah oo la gaaray. Saldhigyo iyo goobo booliiska ayaa laga dhisay Garoowe, Boosaaso, Eyl iyo Bayla - halka kuwa kalena hindisohoodii uu socdo. Sidoo kale xabsiyo casri ah ayaa laga dhisay Garoowe iyo Qardho.

Xarunta waaxda dambi-baarista ee Garoowe ayaa la dhisay iyada oo barnaamijyo kobcinta awoodaha waxqadab loo qabtay booliiska iyo ciidamada kale ee amniga, iyada oo boqolaal

kalena loo diray Itoobiya iyo Jabuuti si loogu soo tababaro. Dagaal beeleedyo dhawr ah ayaa lasoo afjaray. Si ka duwan madaxdii ka horaysay, xilligii Faroole waxaa dhacay iska-horimaadyo xaddidan oo Somaliland lala galay, inkasta oo muranka gobollada Sool, Sanaag iyo Cayn uu wali taagan yahay.

Marka loo soo noqdo barnaamijka tiirarka nabadda, himilada tiirka amniga iyo sarraynta sharciga waa in si aragti-dheer ku dhisan gacan looga gaysto dhimista colaadaha iyo adkaynta nabadda Puntland. Tiirka amniga ayaa arintaas u mara tageero farsamo iyo mid siyaasadeed oo uu u fidiyo hay'addaha dawladeed ee ay khusayso iyo taakulaynta iyo fududaynta dadaalladda nabadaynta ee ka jira Puntland.

Intii lagu gudo-jiray wajigii kowaad ee barnaamijka tiirarka nabadda (2009-2012) waxaa horumar wax ku ool ah laga gaaray arrimihii uu higsanayay tiirka amnigu iyada oo lala kaashanayay guddigii hoggaaminta iyo deneeyayaal kale, sida Wasaaradda Amniga, Hubka-dhigista iyo Dhaqan-celinta. Waxaa la qabtay la-tashiyo iyo wada-hadalo ka dhacay magaalooyinka waaweyn ee Puntland kuwaasi oo gacan ka gaystay samaynta habraaca siyaadeed ee amniga (Security Sector Policy Guideline).

Tiirka amnigu wuxuu kale oo uu fududeeyay dadaalo nabadeed iyo dib-u-heshiisiineed oo dhacay 2011 iyo 2012, ayna ka mid yihiin, dib-u-heshiisiintii Carmo ee beelaha Cismaan Maxamuud (Majeerteen) iyo Dubays (Warsangeli); dib-u-heshiisiintii Igdhays ee beelaha Cali Saleebaan iyo Cali Jibraahiil (oo labaduba Majeerteen ah); iyo dib-u-heshiisiinta Rako ee Ugaar Saleebaan iyo Cali Saleebaan. Dhawaanna, tiirku isaga oo kaashanaya Waaxda Maqal-muqaalka Guur-guurta (Mobile Audio-visual Unit) ee PDRC uu ku gulaystay in uu fududeeyo xallinta khilaafaad muddo dheer ka dhex jiray beelo walaalo ah oo deggan Xero-jaale - oo 20km galbeedka ka xigta Gaalkacyo. Marka laga reebo khilaafka Rako oo dib usoo cusboonaaday 2014kii, inta badan nabaddii la dhex dhigay beelaha waxa ay noqotay mid waarta.

Iyada oo laga duulayo guulaha kor ku xusan, loona diyaar garoobayo ambaqaadka wajiga labaad ee barnaamijka tiirarka nabadda, qoraalkani waxa uu ka waramayaa caqabadaha amni iyo kuwa nidaamka garsoorka ee ka jira Puntland iyo fursadaha jira ee wax ka tari kara xallintooda. Gabagabadii, wuxuu kale oo uu falanqaynayaa aragtida mustaqbalka iyo su'aalo muhiim ah oo ku aaddan xal u helista caqabadaha degdeg ah ee wax u dhimaya amniga iyo xasilloonida Puntland.

## 2.2 Caqabadaha Amniga

### 2.2.1 Awoodaha Hay'adaha Amniga oo Hooseeysa

*Awood darro gaamurtay oo haysata hay'adaha amniga iyo siyaasad cad oo aan jirin*

Tan iyo aasaaskii Puntland 1998, waxaa jiray caqabado ragaadiyay hay'adaha amniga iyo fulinta sharciga. Ciidamada amniga waa kuwo aan qabin tababar ku filan, haysanna agab iyo mushaar ku filan; qaarkood ma haystaan dhisme ay ku hawl galaan qaar kalena waxa ay deggan yihiin dhismayaal burbursan; ma jirto aragti, himilo iyo barnaamij qeexan oo lagu maamulo amniga.

Inta badan degmooyinkii la booqday xilligii daraasadda ma haysan booliis ku filan ama dhismayaal iyo tas-hiilaad/kaabayaal kale ee muhiimka u ah shaqadooda, waxay ku hawl ga-

layeen dhismayaal burbursan ama waxay marti u ahaayeen hay'ado kale oo dawladeed. Waxaa kale oo arrinta uga sii daray in aanay jirin shuruuc iyo hannaan qeexan oo lagu maamulo guud ahaan amniga.

> *"Ma jiraan siyaasad cad iyo hannaan lagu maamulo amnigeena, waxaan hadba la tacaalnaa xaaladda markaa jirata, waxaa habboon in aan soo afjarno nidaamka jabhadeed ee aan ku socono." - Muuse Cali Jaamac, siyaasi, Gardo, waraysi.*

Marka la eego xogaha dawladda, ku dhawaad 30% miisaaniyadda dawladda waxa ay ku baxdaa amniga. Haddana, waxaa jira male in lacagtaas in yar oo ka mid ay gaadho ciidammada amniga, taas oo keenta in waxtarka ciidaanka iyo la-tacaalidda xaaladaha amniga aanay dhammaystirnayn.

> *"Askari qaata bishii 70 doolar, - marmarna aan helin wax mushaar ah- si buuxda uma sugi karo nabadda iyo amniga." - Gen. Muxiyadiin Axmed Muuse, Taliye Ku-xigeenka Ciidanka Booliiska*

Inta badan saraakiishii amniga ee la waraystay waxa ay sheegeen in marka ay timaado qorista ciidanka in aan la siin hub iyo saanad, askarta cusubna la waydiiyo in ay la yimaadaan hubkooda iyo rasaastooda. Arrimahan iyo tababar la'aanta ciidaanku waxa ay meesha ka saaraan in askartu ay daacad u noqdaan hirgelinta sharciga iyo dawladnimada.

> *"Gobolkayagu waxa uu ka kooban yahay afar degmo iyo in ka badan 60 tuulo - 36 askari oo kali ah ayaa ka hawl gala degaanka baaxaddaas leh. Marmarka qaar xaaladdu way cakirantaa marka ay amni darro meel ka dhacdo aannana haysan shidaal aan ku dhaqaaqno. Katiinadda maxbuuska lagu jeebeeyo jeebkayaga ayaan ka soo iibsannaa, Kumbuyuutarada aan leenahay ayaan wax ku qoranaa Golis ayaanna ka daabacannaa." - Col. Jaamac Maxamed Gabaydhe, Taliyaha Qeybta Gobolka Haylaan*

Qeyb ka mid ah ka-qeybgaleyaashii daraasadda astaynta ayaa dareensan in si xun u maarraynta miisaaniyadda amniga iyo maqnaanshaha hannaan isla-xisaabtan ay majo-xaabinayaan dadaaladda sugista amniga. Arrintan waxaa si cad u qeexay nabaddoon ku sugan Bosaaso oo magaciisa la yiraahdo Mursal Maxamuud Cabdi kaas oo yiri:

> *"Konton wasiir iyo in ka badan 60 xildhibaan oo ay waardiyaynayaan maleeshiyo reerahooda ah halka amaankii guud aysan waxba ka tarayn in ay wax u dhinto mooyaane."*

Arrin aad u xiisa badan, lakiin niyad jabkeeda leh, oo la ogaaday ayaa ah in ciidanku ay dareensan yihiin in ay nugulyihiin ama aysan haysan dammaanad dawladeed iyada oo ay meesha ka maqan tahay kaalintii dawladda ee la-xisaabtanka iyo kor-kala-socoshada ciidanka. Waxaa muuqata in askari walba uu ku tiirsan yahay reerkooda marka ay timaado difaaciisa uuna ka baaqsado in uu tallaabo ka qaado kuwa ku xad-gudbaya sharciga isaga oo ka baqaya in ay ka aarsadaan.

> "Dambiilayaasha tallaabo kama qaadi karno waayo dawladdu masuul kama noqonayso dhibka aan gaysano marka aan hawl-galka ku jirno, mana rabo in aan reerkayaga dhib usoo jiido. Ugu horrayn waxaan u baahanahay damiin." Axmed Cismaan, Taliye Ku-xigeenka Qeybta Gobolka Mudug

Caqabad kale oo daraasadani ay ogaatay ayaa ah in dabacsanaanta taliska iyo qaab-dhismeedka ciidanka iyo sirdoonka ay qeyb wayn ka yihiin waxqabadka hooseeya ee booliiska.

## 2.2.2 Hubka oo faraha ka baxay

*Kala qeybsanaanta bulshada iyo hubka oo si fudud loo helikaro ayaa keena colaado dhiig badan ku daato*

Markii ay dhacday dawladdii Siyaad Barre 1991 isla markaana ay burbureen ciidamadii qaranka Soomaaliyeed waxaa aad sare ugu kacay xad-diga hubka ah ee dadka rayidka ah gacanta uga jira. Hubka ayaa ku baahay Puntland wuxuuna fududeeyey in colaado sokeeye oo beelaha soomaaliyeed ka dhex dhaca iyo sidoo kale falalka burcad-badeednimada iyo argagaxini-mada, burburka hantida, afduubka iyo kufsiga. Hubka oo si fudud loo heli karo qeyb wayn ka qaatay amni xumo baahsan iyo xasillooni la'aan siyaasadeed oo ka dhacda Somaaliya, oo ay ka mid tahay Puntland. Shaxda hoos ku qoran waxa ay tusinaysaa fal danbiyeedyada dhacay 2011 ilaa 2014.

| **Dhacdo** | **2011** | **2012** | **2013** | **2014** |
|---|---:|---:|---:|---:|
| Kufsi | 174 | 32 | 131 | 157 |
| Dil | 257 | 301 | 176 | 124 |
| Daroogo | 58 | 57 | 323 | 347 |
| Dhac iyo Xatooyo | 1745 | 409 | 1052 | 1902 |
| Dagaal-beeleedyada | 163 | 100 | 454 | 643 |
| **Wadar** | **2397** | **899** | **2136** | **3173** |

*Shaxda 1: Fal-dembiyeedyadii dhacay*

Hubka iyo rasaastuba waxay si joogta ah ugu soo qulqulaan Somaaliya/Puntland waxaa lagu iibiyaa suuqyada. Qiyaas hubka gacanta ugu jira shacabka (sharci ha ahaado ama sharci darro) waxaa lagu qiyaasaa inta u dhaxaysa 550,000 ilaa 750,000 iyadoo 14,000 oo kali ah ay dii-waan gashan tahay.

Inkasta oo ay dawladda Puntland mas'uuliyad iska saartay ammaanka iyo ilaalinta muwaadi-niinta, haddana waxa jira kalsooni darro lagu qabo laamaha amniga taasi oo dhiirri-gelisa in dadku ay haystaan hubka si ay isugu difaacaan ama ugu ilaashaan danaha beeshooda.

> *"Dhammaanteen khatar ayaan ku jirnaa, siyaasad ahaan iyo bulsho ahaan haddii aysan inaga go'nayn in hubka-dhigis iyo dh-aqan celin la sameeyo markaa hubka waligi-is halis ayuu inaku haynayaa" - Cabdirashiid Cali Saajin, Ku-xigeenka Duqa Boocame*

Diraasado hore ayaa tibaaxaya in dadka rayidka ah ee hubaysan ee Puntland ay tiro ahaan ka badan yihiin ciidanka dawladda. Bulshooyinka ku dhaqan gobollada xudduudda ah ee Mudug iyo Cayn waxa ay haystaan hub badan si ay uga hortagaan khataraha uga iman kara koonfurta Mudug iyo Somaliland. Jaahwareerkan amni ayaa keena in aan kooxina diyaar u ahayn in hubka-dhigis lagu hirgeliyo inta kooxda kale haysato hubka.

> *"Ma jiro qof xukumi kara bulsho hubaysan; xataa askariga booliiska kuma dhaco in uu ka hortago nin maleeshiyo ah oo hubaysan oo isku halaynaya qabiilkiisa" Axmed Xas-san Jaamac, Taliyaha Saldhiga Boocame*

Inkasta oo dadka rayidka ah ay wali aad ugu

tiirsan yihiin hubka, haddana dadweynuhu waxa uu ka daalay dhibaatada hubka, halka odayaasha dhaqankuna ay kaalin muuqata ka qaataan xakamaynta colaadaha iyo hubka qabaa'ilka oo lagu ilaaliyo goobo u gaar ah inkasta oo ammaanka goobahaasi aanu sugnayn.

### 2.2.3 Xiriirka booliiska iyo bulshada

*Waxa jira kala-fogaansho u dhaxeeya booliiska iyo bulshada*

Adeegga amnigu ma ahan mid ku baahsan dhammaan Puntland, booliiskuna waxay inta badan ku sugan yihiin magaalooyinka waaweyn. Meelaha aan booliisku ka hawl gelin dadku wuxuu ku tiirsan yahay nidaamka qabiilka. Ka-qeybgalayaashii daraasadda ee magaalooyinka waaweyn waxay ka warrameen in waxqabadka booliisku aanu taabba-gal ahayn - tusaale ahaan magaalada Gaalkacyo waxa ay sheegeen in booliisku uu qaato laaluush uuna sii daayo danbiilayaasha.

Arrin kale oo dadka sii fogaynaysa ayaa ah in aanay jirin hannaan lagu ilaaliyo siraha ama xogta ay muwaadiniintu la wadaagaan booliiska taasi oo halis gelin karta nolosha dadka xogta siiya hay'adaha amniga.

PDRC waxa ay ogaatay in iskaashiga iyo kalsoonida ka dhaxaysa dadka iyo laamaha amniga ee dhammaan degmooyinkii la tagay ay hooseyso.

> *"Maalin maalmaha ka mid ah, aniga iyo gabdho kale ayaa qabanay nin aan ka shakinnay waxaanna u dhiibnay booliiska, nimankii booliiska ahaa ee baritaanka samaynayay ayaa ninkii laaluush ka qaatay siina daayay. Maalin danbe ayaa ninkii iga soo hor-baxay, markaas ayuu ii dhawaaqay isaga oo leh xagee iga gali doontaa - arintaa darteed ayaan baastoolad u iibsaday."*
> *- Dhudi Yuusuf, Gudoomiyaha Ururka Haweenka Mudug*

Inta badan saraakiishii amniga ee la waraystay xilligii daraasadda waxa ay sheegeen in wacyiga iyo fahanka dadka ee sharcigu uu hooseeyo ayna dhibaato kala kulmaan marka ay qabanayaan qof danbiile ah. Danbiilayaasha waxa inta badan difaaca waalidkood, qaraabadooda ama oday dhaqameedkooda, kuwaasi oo mararka qaar isticmaala awood si ay usii daayaan.

Sida lagu soo arkay degmooyinkii la tagay xilligii daraasadda, odoyaasha dhaqanka iyo ganacsata ayaa gacan weyn siiya booliiska si ay u dhawraan amniga iyo kala-danbynta. Degmooyinka fogfogna, booliisku wuxuu gabi ahaan ku tiirsan yahay shacabka marka ay timaado fulinta sharciga. Si taa la mid ah, dawladdu waxay inta badan ku tiirsan tahay isimada, culimada iyo ganacsatada marka ay timaado xallinta khilaafaadka bulshada. Inkasta oo ay ehel u yihiin sugista amniga, haddana kaalinta isimada, culimada iyo ganacsatada ma aha mid qeexan ama qeyb ka ah hannaanka sugista amniga iyo nabadaynta dalka. Dadka qaarkood waxa ay qabaan in maamuladii is-xigay ee Puntland soo maray aanay daacad ka ahayn in ay xoojiyaan kaalinta dhaqanka iyaga oo cabsi ka qaba in ay la barataam dawladda.

> *"Kaalintayadu, odoyaal ahaan, waa in aan ilaalinnaa nabadda, sidaa oo ay tahayna waxba kuma helno haddana waxaan u heellanahay in aan gudano shaqo aan dhammaanayn oo innaga dhaxaysa."*
> *- Aadan Warsame Cismaan, Oday-dhaqameed, Galdogob*

### 2.2.4 Xag-jirnimo

*Faqriga, shaqo la'aanta iyo jiritaan la'aan barnaamijyo lagu horumarinayo dhallinta waxay ka mid yihii duruufaha sii fogaynaya dhallinyarada soomaalida*

Khatarta amni ee ugu daran waxa dalka ku haya kooxda Al Shabaab ee gacan saarka la leh Al

Qaacida. Kooxdan oo aaminsan in la qaado-jihaad caalami ah in ay tahay waajib diini ah, waxayna leeyihiin awood ay maskax ahaan ay ku jihayso dhallinyarada soomaaliyeed isla markaan ay ka qeybgeliso falal argagixisinimo ayaa khatar joogta ah ku ah amniga iyo xasilloonida Puntland iyo tan gobolka.

Sida ay ku warrameen ka-qeybgaleyaashii dood-kooxeedyada, fakhriga iyo shaqo la'aanta ayaa ah sababaha ugu waaweyn ee keena amni xumada, iyaga oo sidoo kalena uga dara xaaladda qalafsan ee ay ku sugan yihiin dhallinyarada Puntland. Warbixin uu soo saaray Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Horumarinta (UNDP) sanaddii 2012 ayaa tusinaysa in 82% dadka soomaaliyeed ay yihiin faqri, halka 73% ay ku noolyihiin wax ka yar laba doolar maalintii, shaqo la'aanta dhallinyaraduna ay sare u dhaaftay 67%. Dhallinyaro shaqo la'aan ah isla markaana aan haysan nolol ama raadinaya qaab ay isu-muujiyaan, waxay dan bidaan ku biirista kooxaha xag-jirka ah ama burcadda ah.

Marka laga soo tago ciidamada dawladda ee lagu dilay jiidaha dagaalka, Al Shabaab waxa ay dilal qorsheysan ku fuliyeen wax-garad badan oo ay ka mid yihiin culimo, ganacsato, sharci-yaqaanno, wariyeyaal iyo saraakiil dawladeed oo ay ku dileen magaalooyinka Bosaaso, Garoowe iyo Gaalkacyo. Ciidamada Puntland ayaa dagaalo goos goos ah la galay kooxda Al Shabaab oo ku dhuumanaya dhufaysna ka dhiganaya buuraha Galgala iyaga oo guulo kasoo hoyiyay isla markaan dib u riixay xoogagga Al Shabaab. Waxaa kale oo si joogta baritaano amni looga sameeyay magaalooyinka waaweyn iyada oo lasoo qabqabtay xubno ka tirsan Al Shabaab kuwaasi oo ay xukun ku riday Maxkamadda Ciidanku.

Dilkii ay u gaysteen diyaaradaha Maraykanka ee aan duuliyaha la hayn hogaamiyihii kooxda Al Shabaab Axmed Cabdi Godane taariikhdu markii ay ahayd 1 Sebtember 2014 isaga oo ku sugan degaanka Baraawe iyo Is-dhiibistii horjoogihii kooxda ee buuraha Galgala Maxamed Siciid Atom oo u gacan galay dawladda federalka 7dii Juun 2014 ayaa ka dhigan khasaare wayn oo soo gaartay kooxda.

Sidoo kale dilalkii qorshaysnaa ee kooxdu ay la beegsadeen Dr. Axmed Xaaji Cabdiraxmaan iyo Sheekh Cabdiqaadir Nuur Faarax oo ahaa culimada ugu waaweyn Puntland ayaa wax badan ka beddelay aragtidii dadka iyaga oo nacayb badan u qaaday kooxda Al Shabaab. Arrintaas waxa kale oo ay keentay in dadku ay ku baraarugaan halista Al Shabaab, kacdoonnana kala horyimaadaan. Sidoo kale gulufka dawladdu ku qaatay kooxda ayaa hoos u dhigaysa rajada kooxdu ay ka qabaan in Puntland ay gabbaad ka dhigtaan. Si kasta oo ay ahaataba, kooxda cadaadis ba'an ayaa kaga socda dhanka Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) iyo Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya kuwaasi oo la wareegay fariisamo badan oo ay kooxda Al Shabaab ku leeyihiin koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Arrintan ayaa Al Shabaab ku khasbaysa in ay u soo baxsadaan dhanka waqooyiga, iyaga oo doonaya in ay ku dhuuntaan buuraleyda Galgala eePuntland. In kastoo la wiiqay awoodda Al Shabaab, haddana, khatarta kooxda waa mid aan la dhayalsan karin.

### 2.2.5 Arimaha xuduudaha gudaha iyo dibadda

*Xudduudaha oo aan sugnayn ayaa suurto-geliya in khataro badan u soo tallaabaan Puntland*

Puntland waxay xudduud dheer la leedahay gobollada dhexe ee Soomaaliya, bariga Itoobiya, Somaliland iyo Badweynta Hindiya iyo Badda Cas. Amniga xuduudaha oo dabacsan ayaa keena in hubka iyo argagixisaduba ku soo qulqulaan Puntland, sidoo kalena tahriibiyeyaasha iyo ganacsatada mukhaadiraadku si qarsoodi ah isaga gooshaan xuduudaha. Arrinta xudduudaha furan waxaa si aad ah loogu lafaguray

dood-kooxeedyo ka dhacay Gaalkacyo, Buuhoodle iyo Badhan.

Gaalkacyo oo ah magaalo qeybsan ayaa u nugul colaadaha waxayna caan ku tahay dagaalbeeleedyo iyo amni darro soo noqnoqoda, iyo waliba hoyaadin ama magangelin ay ka heleen kooxaha burcad-badeeku xilliyadii la soo dhaafay. Waqtiyadii dagaalka sokeeye magaalada waxaa ka dhacay isku-dhacyo dhiig badan ku daatay oo ay ku naf waayeen boqolaal qof oo dhex marayay bulshooyinka waqooyiga iyo koonfurta Mudug. Dirartan soo jireenka ahi ee labada bulsho ka dhaxaysa waa mid si fudud mar kasta u bilaaban karta madaama aanay jirin is-kaashi amni oo taabba-gal ah oo ka dhaxeeya Puntland iyo Galmudug iyo sidoo kale dib-u-heshiisiin dhab ah oo la dhex dhigay labada bulsho. Dhismaha maamulka ku-meel-gaarka ah ee Galmudug iyo muranka xudduudaha ee aloosan ayaa dhab ahaan qeyb ka qaadan kara in colaadaha ay mar kale dib u qarxaan.

> *"Si ka duwan gobollada kale ee Puntland, Mudug waxay u baahan tahay xaalad gaar ah in lagu maamulo, waliba dhanka amniga." - Cismaan Barre Khalaf, Ganacsade, Dood-kooxeed, Gaalkacyo.*

Muranka iyo xiisadda u dhaxeeya Puntland iyo Somaliland ee ku aaddan gobollada Sool, Sanaag iyo Cayn ayaa cirka isku sii shareeray tan iyo doorashadii Madaxweyne Cabdiwali, arantaasi oo halis ku ah amniga iyo nabadgelyada gobolka oo aan imankaba cago adag ku taagnayn. Abaabul ciidan iyo dhaqdhaqaaqyo militari oo ay sameeyeen Puntland iyo Somaliland oo ku hardamaya gacan-sarraynta gobolladaas ayaa uga sii daray xiisadda. Bulshooyinka ku nool Buhoodle iyo Badhan ayaa dareensan in gulufka milatari ee Somaliland ay ka danbayso damac dhul-balaarsi. Maamulka Khaatumo oo la aasaasay bishii August 2012 ayaa uga sii daray loolankii ka jiray gobollada Sool, Sanaag iyo Cayn iyada oo saddexda maamul (Puntland, Somaliland iyo Khaatumo) ay ku hardamayaan gacan-ku-haynta gobolladaas.

Arrin kale oo culayskeeda leh ayaa ah in degmooyinka iyo gobollada Puntland aanay lahayn xudduudo kala astaysan. Tirada degmooyinka ayaa si aad ah u kordhay - iyada oo tiradii degmooyinka ee jiray 1991-dii ay ahaayeen 20 degmo haddana ay yihiin 43 degmo oo ku kala yaal 9 gobol. Ka-qeybgalayaashii dood-kooxeedyada ayaa ku dooday in maamulladii is-xigay ee Puntland ay magacaabeen degmooyin badan si ay kalsooni uga helaan beelaha deggan. Waxayse ku guul darraysteen in ay la yimaadaan hannaan iyo habraac qeexan oo loo maro magacaabista degmooyinka iyo kala xadayntooda. Arrintani waxay horseeday in muran dhul uu soo kala dhex galo degmooyinkii horay u jiray iyo kuwa cusub. Tusaale ahaan, degmooyinka Gumbax iyo Baargaal oo ka tirsan gobolka Gardafuu ayaa isku haysta marsada dabiiciga ah ee Binna oo 8km u jirta degmada Baargaal.

> *"Xudduud la'aanta degmooyinka iyo muranka ka dhexeeya degmooyinkii hore iyo kuwa danbe waa dhibaato bulshada la dhex dhigay oo keeni karta dagaal sokeeye , dawladda Puntland ayaa si gaar ah uga mas'uul ah dhibaato walba oo ka dhex dhacda Bargaal iyo Gumbax." - Cumar Siciid Sharmaake, oday-dhaqameed, Baargaal*

### 2.2.6 Kalluumaysiga sharci darrada ah iyo saamenyta uu la iman karo

*Burcad-badeednimo bilowgeed*

Degmooyinka Puntland ee dhaca xeebta ayaa xilligan dhibaato ba'an ay ku hayaan kalluumaysato sharci darro ah. Dadka deggan Boosaaso, Baargaal iyo Eyl ayaa sheegay in shirkado shisheeye - gaar ahaan kuwo Iiraan iyo Koonfurta Kuuriya laga leeyahay- ay xaaluf ba'an ku hayaan kalluunka ku jira xeebaha iyaga oo sidoo kale burbur baahsan u gaysta deegaanka badda isla markaana si gaar ah u bartilmaameedsada

noocyo ka mid ah kalluunka oo halis ugu jira in uu dabar-go'.

> *"Waxay kusoo xad-gudbaan kana kalluumaystaan biyahayaga, waxay hallis geliyaan nolosha kalluumaysatada fara ku tiriska ah ee badda u shaqo taga, way toogtaan waxayna ka burburiyaan doomaha ay ku jillaabanayaan. Waxa kale oo ay burburiyaan deegaanka badda iyo qararka kalluunku ku noolyahay iyaga oo adeegsanaya shabaago ilyar ah oo xoog badan oo adduunka laga mamnuucay iyo qalab dhawaaq dheer oo kalluunka lagu didiyo. Kalluumaysata shisheeye waxay markiiba kalluunka geeyaan suuyada caalamka iyo kuwa gobolka arrintaasina waxay dhabar-jab ku tahay wax-soo-saarka kalluumaysatada maxalliga ah oo hadhoow suuq waaya." - Cabdirisaaq Cismaan Cali, Khabiir Kalluumaysiga ah, Boosaaso*

In badan oo ka mid ah dadkii ka qeyb galay dood-kooxeedyada waxa ay sheegeen in aanay kalsooni ku qabin hawl-galka ku aaddan la dagaalanka burcad-badeedka ee ciidamadda shisheeye ay ka wadaan biyaha Soomaaliya, gaar ahaan xeebaha Puntland. Ra'yigooda ayaa ah in maraakiibtaasi ay marmarsiinyo ka dhigtaan in ay la dagaalamayaan burcad-badeedda, dhanka kalena aanay wax tallaabo ah aanay ka qaadin kalluumaysiga sharci darrada ah, balse ay hoosaasiyaan. Sida ay qabaan bulshooyinka xeebaha ku nool ayaa rumaysan in Soomaali iyo shisheeyaba ay ku lug-leeyihiin xaalufka socda, halka ay sheegeen in maraakiibta jariifka qaar ay ilaalo ka yihiin dullaaliin Soomaali ah.

> *"Ciidaanka Booliiska Badda Puntand (PMPF) halkan [oo Eyl ah] way ku sugan yihiin mana gutaan shaqadooda. Wayna soo kartay dhibaatadda maraakiibta jariifka ah, noloshayada ayay dagaal kula jiraan mana haysanno meel kale oo aan aadno. Haddii dawladda iyo beesha caalamku aanay tallaabo degdeg ah ka qaadin kalluumaysata sharci darrada ah waxaa ku khasbanahay in aan hubka qaadano oo aan iska dhicino." Cabdikhadar Axmed Maxamed, bad-dhac, Eyl*

## 2.3 Caqabadaha Garsoorka iyo Hannaanka Sharciga Puntland

### 2.3.1 Caqabado hay'adeed oo ba'an

*Garsoor taag daran oo shaqaale tiro yar oo aan xirfad badan lahayn, una adeegaya ummadda iyagoon wacyi/aqoon badan u lahayn sarraynta sharciga*

Nidaamka garsoorka Puntland waxaa haysta caqabado aad u ba'an kuwaasi oo hoos u dhigay waxqabadkii iyo kalsoonida ay dadku ku qabeen. Siyaasadaha iyo shuruucda garsoorku maahan kuwo taabba-gal ah; shaqaalahu waa kuwo aan tababar badan la siin isla markaana aan helin mushaar ku filan; ma jiraan dhismeyaal ku filan oo hay'adaha garsoorku ku hawl-galaan; mana jiro hindise dhab ah oo lagu horumarinayo nidaamka garsoorka. 43-da degmo ee Puntland, 23 kaliya ayaa leh maxkamado heerka kowaad, waxaa kale oo jira 8 maxkamadood oo heer gobol /racfaan ah oo ka hawl-gala dhamaan goboladda, marka laga reebo gobolka Gardafu oo aan lahayn maxkamadii racfaanka.

Maxkamadaha degmooyinka oo tiro ahaan 23 ah inta badan malaha dhisme ay ku shaqeeyaan, kaliya 5 maxkamadood ayaa leh xafiisyo ay ku hawl-galaan. Inta kale waxay deggan yihiin guryo kiro ah ama dhismeyaal burburay, garsoorayaasha degmooyinkuna ma helaan mushaar ku filan waxayna ku nool yihiin cabsi joogta ah oo ay ka qabaan aargoosi uga yimaada dadka ay xukunka ku ridaan, ama' raaliga ku ahayn go'aanka.

8 sarkaal oo ka tirsan laamaha garsoorka (5 xeer-ilaaliye iyo 3 garsoore) ayaa la dilay shantii sano ee ugu danbeeyay iyada oo inta badan lagu dilay magaalooyinka Gaalkacyo iyo Boosaaso. Arrintaas oo ay weheliso shaqaalaha garsoorka oo aan rabitaan badan u qaban shaqada ayaa keentay in hawl-wadeenno badan oo lamaha garsoorka ka tirsan ay shaqada ka tagaan.

> *"Caddaalad darrada ayaa keenta amni xumada; waxaan u taagannahay in aan cadaaladda u adeegno haddana ma haysano ilaalo mana helno mushaar nagu filan; ma haysano agab xaafiiseed waxaanna deggananahay hal qol oo kiro ah oo aan lahayn waardiye, arintaasina wax ay na dhaxalsiisay in aan mar walba shaabadda maxkamadda gacanta ku qaadano." - Cabdiqaadir Axmed Ismaaciil, Garsoore, Badhan*

Booliiska oo aan agab badan haysan isla markaana niyad jabsan iyo jiritaan la'aan xabsiyo iyo gadiid ku filan ayaa dhaxalsiisay laamaha garsoorka in aanay si taabba-gal ah u gudan hawlaha loo igmaday. Waxaa jira afar xabsi oo kali ah oo ku kala yaala magaalooyinka Garowe, Gaalkacyo, Qardho iyo Boosaaso. Degmooyinka oo aan wada lahayn xabsiyo ayaa keenta in maxaabiista qaar lagu hayo saldhigyada booliiska iyo goobo ku meel gaar ah oo aan waafaqsanayn nidaamka xabsiyada. Aqoonta danbi-baarista iyo daba-galka ayaa ah mid gabaabsi ah, arintani oo ay uga sii darto saamaynta qabiilka ayaa keena marmar in la marinhabaabiyo dacwadda ama maxkamaduhu ay ridaan xukunno aan caddaladda ahayn. Dadkii la waraystay iyo ka-qeybgalayaashii dood-kooxeedyada ayaa qaba in ay jiraan dhaqamo ay ka mid yihiin musuq maasug, eex iyo caddaaladda oo aan loo sinayn kuwaas oo halis ku ah madaxbanaanida iyo dhexdhexaadnimada hannaanka garsoorka.

### 2.3.2 Hannaanka garsoorka dawladda iyo kan dhaqanka

*Xeer-beegtidu: waa hannaan garsoor oo wax-tar ah si fududna loo heli karo, inkastoo aanu helin aqoonsigii iyo mudnaantii u lahaa*

Caqabadaha garsoorka haysta waxaa ka mid ah in ay jiraan laba nidaam, mid dhaqan iyo mid rasmi ah, oo is-garab-socda, mana jiraan shuruuc iyo habraacyo midaysan oo ay ku hawl-galaan iyo wadashaqayn qeexan oo ka dhaxaysa. Dadka reer miyiga ah ayaa inta badan ku tiirsan nidaamka dhaqanka marka ay timaado xallinta dacwadaha iyo murannada. Inta badan ka-qeybgalayaashii daraasadda oo ay ka mid yihiin saraakiil ka tirsan hay'adaha garsoorka ayaa qaba in nidaamka dhaqanka ama xeer-beegtigu uu buuxiyay kaalintii ay ahayd in ay dawladdu buuxiso, iyada oo garsoorka dawladdu aanu ahayn mid baahsan ama dadku wada ogol yihiin.

> *"Nidaamka shareecada iyo dhaqanku waa kuwo cid walba heli karto, xataa dadka dan yarta ah, si degdeg ah oo kalsooni leh ayayna dadka u kala guraan." - Cabdirashiid Salaad, Sharci-yaqaan, Gaalkacyo*

Dad badan oo ka mid ah ka-qeybgalayaashii dood-kooxeedyada ayaa dareensan in nidaamka garsoorka iyo maxkamadaha dawladdu aanu u shaqaynayn sidii loogu talo-galay, waxayna u arkaan in wali raadkii gumaystaha shisheeye uu kasii muuqdo isla markaana hay'adaha garsoorka dawladdu ay daahiyaan dacwadaha, awoodna aanay u lahayn in ay fuliyaan sharci iyo go'aamada ay ridaan. Dad badan oo ka mid ah ka-qeygalayaashii daraasadda ayaa sheegay in ay door-bidaan nidaamka shareecada iyo dhaqanka. Dadka oo aan aqoon iyo wacyi badanna u lahayn nidaamka garsoorka dawladda iyo sarraynta sharciga ayaan aragti ka haysan sida ugu wanaagsan ee garsoorka iyo caddaaladda loo hirgalin karo.

Qeyb ka tirsan ka-qeybgalayaashii dood-kooxeedyada ayaa sheegay in ay kalsooni ku qabaan nidaamka shareecada oo kaliya iyaga oo maxkamadda u arka nidaam soo-galooti ah oo ku

dhaqma shuruuc talyaanigu qoray. Arrintan ayaa salka ku haysa ra'yiga dadka qaarkii ay qabaan ee ah in xeerka ciqaabta Soomaaliya/ Puntland la meel-mariyay xilligii gumaystaha, inkastoo dib-u-eegis ay ku sameeyeen dawladihii soo maray Soomaaliya, waxayna aaminsan yihiin in aanu ku haboonayn Puntland ama aanu la-jaan-qaadi karin shareecada Islaamka.

*"Dadku waxay maxkamada aadaan oo kaliya haddii xaajadu noqoto gar cadaawo, iyagoo waliba aan kalsooni badan ku qabin maxkamadda." Buraale Mahad Magan, oday-dhaqameed, Buuhoodle*

## 2.4 Caqabadaha dib-u-heshiisiinta bulshada

### 2.4.1 Soo-noqnoqshada colaadaha khayraadka ku salaysan

Khayraad gabaabsi ah, bulshooyin hubaysan iyo la'aan siyaasado cad oo nabadda lagu dhisayo. Dagaal-beeleedyo soo noqnoqda ayaa halis dhab ah ku haya amniga iyo xasilloonida Puntland iyo nabadda oo aan caga adag ku taagnayn. Dhibaatada ka dhalata colaad beeleedyada soo noqnoqda ayaa keenta barakac iyo in dadku kala irdhoobo. Inkasta oo ay dawladda iyo hay'ado kaleba dadaal u galeen in xal waara loo helo colaadaha sookeeye haddana waxaa jira tiro colaado ah oo muddo dheer taagnaa walina aan lasoo af-jarin kuwaasi oo ku salaysan khayraadka dabiiciga ah ama xad-gudubyo la kala tirsanayo, waxaana ka mid ah colaadahaas:

- Colaadda ka taagan degaanka Cadaadda ee waqooyiga Buurtinle, colaadaas oo u dhaxaysa beelo isku haya daaq iyo degaan;
- Colaadda ka taagan degaanada Rako iyo Xumbays taas oo ay ku naf waayeen in ka badan 60 qof, sidaa oy tahay, isku-dayo badan ayaa la sameeyay si loo soo af-jari;
- Colaadda Taleex ee ka dhaxaysa laba lafood oo ka wada tirsan beesha Nuur Axmed ee Dhulbahante taas oo ku salaysan aano/dakano;
- Colaada Xero-jaale oo ku salaysan aano/ dakano waqti dheer soo taaganayd beelaha dirirtu ka dhaxaysana ay awoodi waayeen in ay bixiyaan magaha la isku leeyahay;
- Degmada Isku-shuban ee gobolka Bari waxaa iyana ka taagan isku-dhacyo ka dhaxeeya dhuxulaysato iyo xoolo-dhaqato degaanka ah.

Dadka reer guuraaga ah ayaa inta badan isku qabta sidii ay u wadaagi lahaayeen khayraad gabaabsiga ah sida biyaha iyo daaqa. Xiisadda ayaa inta badan hawada isku sii shareerta xilliga jilaalka markaas oo xoolo raacatu ay tartan ugu jiraan sidii ay xoolahooda daaq iyo biyo ugu heli lahaayeen. Inkasta oo colaad beeleedyada aloosan ay inta badan ku salaysan yihiin khayraadka dabiiciga ah haddana waxa jira kuwo siyaasadaysan ama salka ku haya dano dhaqaale. Degaanada cusub iyo barkadaha laga qodo dhul-daaqsimeedka, murannada dhulka ee magaaloyinka iyo ganacsiga dhuxusha ayaa intabu keena isku-dhacyo dhiig ku daato oo dhex mara bulshada. La'aanta siyaasad cad oo ku saabsan dhulka iyo khayraadka sida loo wadaagayo ama loo maamulayo iyo awoodda laamaha fulinta sharciga oo hooseysa ayaa qeyb ka qaata in colaaduhu ay jiitamaan lana soo af-jari waayo.

### 2.4.2 Wadajirka bulshada oo hooseysa

Maqnaanshaha hindise horumarineed iyo qorshe lagu soo xero-galinayo dhammaan bulshooyinka ayaa sii faquuqa beelaha ku nool xuduudaha fogfog

La'aanta siyaasad taabba-gal ah oo ay dawladdu uga jawaabayso baahiyaha horumarineed ee

bulshooyinka dib-u-dhacsan ama xuduudaha durugsan xiga isla markaana ay ku soo xero-galinayso kuwa tabooshooyinka qaba ayaa qeyb ka qaata kala furfurashada midnimadda ummadda reer Puntland. Dadka ku nool gobolada Sool, Sanaag iyo Cayn waxay siyaasad ahaan kala raacsan yihiin maamulada Puntland, Khaatumo iyo Somaliland. Dagaalka saddex-geesoodka ah ee ka dhaxeeya maamulada waxa uu dhaawacaa wada-noolaanshihii iyo wadajirkii bulshada. Sidoo kale bulshooyinka ku nool gobollada xadka xiga waxa ay tirsanayaan tabashooyin la xiriira in dawladdu ka gaabisay in ay adeegyo bulsho ka hirgaliso degaankooda, taas oo uga dhigan in dawladdu ay cidla uga dhaqaaqday isla markaana dhagaha ka furaysatay cabashadooda.

Arrin kale oo halisteeda leh ayaa ah in kaalintii hoggaanka dhaqanka ay wiiqantay - Isamada ayaa ahaa marjaca ugu wayn ee loo noqdo marka ay jiraan khilaafyo bulsho ama kuwo siyaasadeed oo khatar ah. Inta la ogyahay taariikhda soomaalida, hoggaanka dhaqanku wuxuu kaalin muuqata ka ciyaari jiray adkaynta midnimada iyo wadajirka ummadda, xakamaynta iyo xallinta dagaal-beeleedyada iyo in la helo is-fahan beddela murranada iyo colaadaha hubaysan. Haddaba kaalinta iyo midnimada hoggaanka dhaqanka - oo sannadahan danbe sii xumaanayay - ayaan looga faa'iidaysan sidii la rabay. Sida ay qabaan ka-qeybgalayaasha dood-kooxeedyada, odoyaasha dhaqanka ayaa ah xoogag u heellan nabadda, sidaas oo ay tahayna ma helaan kaalmada iyo gacan-qabashada ay u baahan yihiin marka ay timaado nabadaynta iyo dib-u-heshiisiinta beelaha.

Si ka duwan Somaliland oo leh gole dhaqan/guurti oo awood sharci dajin leh, hoggaanka dhaqanka Puntland ma laha kaalin ama qaab-dhismeed muuqda taas oo keenta in dawladdu ay mararka qaar dhinac marto. Sidaas oo ay tahayna, haddana ka-qeybgalayaasha daraasaddu waxa ay sheegeen in odayaasha dhaqanku ay muhiim u yihiin xallinta dagaal-beeleedyada.

> *"Shakhsiyan wax lacag ah kama qaato dawladda, baahina uma qabno 30ka doolar ee ay Wasaaradda Arrimaha Gudaha siiso odoyaasha, waa wax bah-dil ah. Waxaan dawladda uga baahanahay taageero wax-ku-ool ah." Mursal Maxamuud Cabdi, oday-dhaqameed, Bosaso*

## 2.5 Sahaminta Fursadaha Jira ee Wax-ka-tari kara Xallinta Caqabadaha Amniga

Puntland waxa ay gaadhay horumar badan marka ay timaado dhisamaha-dawladnimo iyo baahinta maamulka. Hase ahaatee Puntland waxa ay wali la daalaa-dhacaysaa culaysyo dhanka amniga oo ay ka mid yihiin xagjirnimo, hubka baahsan oo bulshada gacanta ugu jira, dagaalbeeleedyo soo noqnoqda, wadajirka ummadda oo dabacsan, xiisad kala dhaxaysa Galmudug iyo xiriirka cakiran ee Puntland iyo dawladda federalka ah, iyo kan Puntland iyo Somaliland. Awoodda hay'adaha amniga iyo garsoorka oo hooseysa iyo kaalintii dhaqanka oo hoos u dhacday ayaa Puntland ka dhigtay mid u nugul colaadaha iyo khilaafaadka bulsho iyo kuwa siyaasadeed.

Maamuladii kala danbeeyay ee Puntland soo maray ayaa sameeyay balan-qaadyo badan oo ku aaddan in ay sameeyaan isbeddel iyo dib-u-habayn amni iyo mid siyaasadeed, hase yeeshee wax badan kama soo naasa caddaan balan-qaadyadaas. Si kasta oo ay ahaataaba, waxaa jira fursado badan oo wax-ka-tari kara in amaanka Puntland la sii adkeeyo, waa haddii dawladda talada haysa ay si dhab ah uga faa'iidaysato. Fursadaha jira waxaa ka mid ah dib-u-habayn-

ta amniga iyo garsoorka ee uu ku dhawaaqay Madaxweyne Cabdiwali Maxamed Cali, nacaybka isa-soo-taraya ee ay dadku u qabaan hubka iyo khasaarahiisa, dadka oo qeyb ahaan u bislaaday, doonayana sharci iyo kala-danbayn, dadka oo ku baraarugsan hallista argagixisada iyo burcad-badeeda iyo beesha caalamka oo diyaar u ah in ay gacan ka gaysato dadaalada amniga lagu sugayo iyo guud ahaan hindiseyaasha is-beddel ee ay dawladdu wado.

Odoyaasha dhaqanka iyo culimada ayaa ahaa hanti iyo awoodo qarsoon oo wax badan ka tari kara dagaalka lagula jiro argagixisada iyo burcad-badeedda, waxaa kale oo muhiim ah in la xoojiyo lana soo nooleeyo kaalinta hoggaanka dhaqanka lagana qeybgaliyo adkaynta midnimada iyo nabadgelyadda. Sida ka-qeybgalayaasha daraasaddu ku taliyeen, dawladda oo imanka leh war-baahiye maqal-muqaal ah (TV) waa in ay samaysaa wacyi-gelin baahsan oo ku saabsan adkaynta dawladnimada iyo nabadda.

Shirweynaha Wada-tashiga Puntland ayaa ah fursad lagu saxi karo tabashooyinka bulshooyinka qaar ay qabaan si loo xoojiyo midnimada iyo wadajirka ummadda. Xiriir is-fahan, is-qadarin iyo is-kaashi ku dhisan oo dawladda federalka ay Puntland la yeelato iyo sidoo kale is-kaashi amni oo dhex mara Puntland, Galmudug iyo Somaliland ayaa wax badan ka tari kara dadaalada nabadda iyo xasillinta ee Puntland iyo guud ahaan tan gobolka.

### 2.5.1 Aragti iyo dadaalada amniga ee muuqda

Daraasadda astaynta caqabadaha iyo fursadaha ee uu sameeyay tiirka amniga iyo sarraynta sharciga ee PDRC dabayaaqadii 2014 ayaa ujeeddadeedu ahayd in la ogaado sababaha keena amni xumada sidoo kalena loo suurta-geliyo daneeyayaasha kale duwan in ay ka talo-bixiyaan xalka caqabadaha jira ee dhanka amniga. Bishii Febuary 2015, PDRC waxa ay qabatay shir saddex maalmood socday oo ay ka qeyb galeen 150 qof oo matelayay dhammaan daneeyayaasha nabadda, gaar ahaan dawladda, bulshada rayidka ah, beesha caalamka iyo wax-garad ka tirsan bulshada Puntland. Shirkaas waxaa lagu soo bandhigay natiijadii ka soo baxday daraasaddii labaad ee astaynta caqabadaha amniga, maamul-baahinta iyo dimuqraadiyadaynta iyada oo ay ujeeddadu ahayd in ka-qeybgalayaashu ay si dhab ah u-lafa-guraan isla markaana u ansixiyaan natiijada daraasadda.

Ujeeddada kale ee shirka ayaa ahayd in ka-qeybgalaashu kala mudnaan siiyaan caqabadaha isla markaana ay ka talo-bixiyaan xalka caqabadaha amniga, maamul-baahinta iyo geeddi-socodka dimuqraadiyadaynta. Dood iyo falanqayn dheer ka dib, ka-qeybgalayaasha shirka daneeyayaasha Puntland waxay isku raaceen natiijaddii daraasadda amniga, iyaga oo sida soo socota u kala hormariyay una kala mudnaan siiyay caqadaha amniga ee jira:

- Awoodda hay'adaha amniga iyo garsoorka oo hooseysa
- Xuduud aan ilaalo lahayn iyo kuwo la isku haysto
- Xiriirka bulshada iyo booliiska oo hooseeya
- Argagisinimo (gaar ahaan Al Shabaabta buuraha Galgala)
- Kalluumaysi sharci darro ah
- Dagaal-beeleedyo khayraad ku salaysan

Haddaba liiska kor ku xusan ee kala mudnaansiinta caqabadaha waxa uu ku tusinayaa dhammaan caqabadihii lagu soo ogaaday daraasadda marka laga reebo hal caqabad oo ah hubka bulshada gacanta ugu jira. Arinta hubka ayaa u baahan dadaal badan oo waqti dheer qaadanaya iyo in bulshadu kalsooni ku qabto hay'adaha amniga, waxaa kaloo hay'adaha amniga laga rabaa in ay fududeeyaan dadaal walba oo hub-ka-dhigis lagu samaynayo iyo sidoo kale in la helo xuduud amnigeedu sugan yahay oo aan hubku kasoo tallaabi karin. Haddaba qabashadii shirweynihii labaad ee daneeyayaasha Puntland waxaa

ku xigay sahamin kale oo degdeg ah oo lagu sameeyay aragtida iyo dadaalada socda ee wax lagaga qabanayo caqabadaha amniga ee kasoo baxay daraasadda laguna ansixiyay shirweynaha. Waxaa kale oo looga gol lahaa sahamintaan in la ogaado qorshayaasha dawladda ee ku aaddan xal-u-helidda caqabadaha amniga iyo sidoo kale dadaalada ay wadaan hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah si loo hubiyo in dadaaladaas aysan ahayn kuwo iska-hor-imanaya ama aan gaarsiisnayn halkii loogu talo-galay.

Cilmi-bareyaasha tiirka amniga iyo sarraynta sharciga ee PDRC ayaa xog-waraysiyo la yeeshay saraakiil ka tirsan dawladda iyo hay'adaha ay bah-wadaagta yihiin si loo ogaado dadaalada qorshaysan ee wax looga qabanayo caqabadaha amni ee la isku raacay intii uu socday shirweynaha daneeyayayaasha Puntland. Qeybaha soo socda ee qoraalkan waxaa lagu qaadaa-dhigayaa natiijadii kasoo baxday waraysiyadii lala yeeshay saraakiisha dawladda iyo kuwo hay'adaha ay wada-shaqaynta leeyihiin iyo sidoo kale dadaalada iyo qorsheyaasha wax-qabad ee socda si xal loogu helo caqabadaha amniga. Tiirka amniga iyo sarraynta sharciga PDRC waxa uu isku dayi doonaa xal-u-helidda caqabadaha qeyb ka mid ah, iyada oo la tixgalinayo go'aamaddii kasoo baxay shirweynihii daneeyayaasha Puntland ee dhacay February 2015, iyada oo sidoo kalena la tixgalinayo aragtida guddiga hoggaaminta ee tiirka amniga iyo waayo-aragnimada PDRC iyo awooddeeda.

### *Xoojinta hannaanka amniga iyo garsoorka Puntland*

Puntland waxay hanti badan ku bixisaa hay'adaheeda amniga iyada oo 2013-kii laamaha amniga lagu bixiyay kharash dhan 31% miisaaniyadda dawladda, halka arrimaha bulshadana lagu bixiyay wax ka yar 10%. Sidaas oo ay tahay waxa jira khataro badan oo halis ku ah nabadda iyo xasilloonida Puntland. La'aanta siyaasado iyo hannaan amniga lagu sugo oo taabba-gal ah iyo awoodda hay'adaha amniga oo hooseysa ayaa ah caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagaan xasilinta amniga. Arrin u baahan xal degdeg ah ayaa ah mushaarka ciidanka oo aad u hooseeya soona daaha marar badan.

Si kasta oo ay ahaataba waxa jira dadaalo ay dawladdu hormuud ka tahay ayna gacan siinayaan daneeyayaal caalami ah oo looga gol-leeyahay in lagu xoojiyo awoodda booliiska iyo laamaha amniga. Dawladda uu hoggaaminayo madaxweyne Cabdiwali Maxamed Cali (Gaas) waxa ay daahfurtay dib-u-habayn lagu samaynayo laamaha amniga iyo garsoorka, shaqaalaha rayidka iyo maamulka dhaqaalaha dawladda.

Iyada oo gacan ka helaysa xafiiska Qaramada Midoobay ee UNSOM, Wasaaradda Amniga oo kaashanaysa madaxtooyada waxa ay bilowday hannaan dib-u-eegis loogu samaynayo ciidamada iyada oo la hubinayo ciidamada dibna loo diiwaan gelinayo. Arrintan ayaa looga gol-leeyahay in la hubiyo tirada dhabta ah ee ciidan iyo qofka u qalma in uu noqdo ciidan, iyada oo meesha laga saaraayo tiro badan oo ciidamo aan jirin ah (caagle) kuwaasi oo ay dawladdu kharash ku bixiso. Iyada oo la adeegsanayo nidaam casri ah oo laga hubinayo indhaha qofka, waxaa la hubiyay dibna loo diiwaan-geliyay tiro badan oo ciidanka booliiska ah, tiro badan oo ka tirsan ciidanka daraawiishta iyo ilaalada xabsiyada.

Dawladda waxa kale oo u qorshaysan in ay dib-u-eegis ku samayso mushaarka ciidanka iyo dallacsiintooda isla markaana ay la timaado hannaan lagu daryeelayo ciidanka si niyadooda kor loogu qaado. Saraakiisha amniga ee dawladda waxa ay ku rajo weyn yihiin in wax badan isbeddeli doonaan marka dib-u-habaynta laamaha amniga ay soo idlaato. Waxaase xaqiiq ah in isku-dayga dib-u-habaynta ciidan aanay hadda ugu horrayn, guul laga gaaro arrintana ay ku xirantahay sida dawladda talada haysa ay uga go'antahay in ay kaga dhabayso isla markaana taageerto geeddi-socodka dib-u-habaynta laamaha amniga iyo garsoorka.

Qorsheyaasha 2015 ee Wasaaradda Amniga ayaa muujinaya in sanadkaan gudihiisa la dhisi doono 11 saldhig booliis oo laga hirgelin doono degmooyinka Xarfo, Jarriban, Dangorayo, Isku-shuban, Qandala, Laasqoray, Qardho, Eyl, Gaalkacyo, Bayla iyo Godob. Waxa kale oo qorshaysan in 16 goob-booliis (police post) laga dhiso Garoowe, Gaalkacyo, Bosaaso, Badhan, Eyl iyo Qardho si loo baahiyo adeega amniga. Wasaaradda Amniga oo gacan ka helaysa Barnaamijka Qarama Midoobay ee Horumarinta (UNDP) ayaa gacanta ku haysa 25 dhallinyaro ah oo cilmiga sharciga ka barta Jaamacadda PSU ee Garoowe. Wasaaradda ayaa sido kale u diraysa dalka Jabuuti 50 sarkaal oo lagu soo tababari doono ilaalinta xeebaha. Waxa kale oo ay u diraysaa dalka Itoobiya 85 sarkaal oo lagu soo tababari doono sirdoonimada iyo danbi-baarista.

Iyada oo gacan ka helaysa UNSOM, Wasaaradda Amnigu waxa ay ambaqaaday hannaan lagu meelmarinayo qorshe-hawleedka waqtiga dheer oo yeeshaan laamaha amnigu. UNSOM ayaa sidoo kale gacan ka gaysanaysa samaynta waaxda qorshaynta mudada fog oo ka tirsan wasaaradda. Deeqaha beesha caalamka ayaa iyana laga rajo qabaa in qeyb badan oo ka mid ah loo qoondeeyo kobcinta awoodaha laamaha amniga ee heer federal iyo heer dawlad-goboleedba.

Marka la eego dhanka garsoorka dadaalada qorshaysan waa kuwo aad u yar. Dawladdu waxa ay bilowday hannaan dib-u-habayn loogu samaynayo laamaha garsoorka si loo xoojiyo tayadooda, hase ahaatee dadaalkaasi waa mid gaabis ah. UNDP waxa ay taageero siisaa mashruuc loogu magac daray "maxkamadaha wareega" kaas oo gacan ka siiya Wasaaradda Caddaalada sidii ay u baahin lahaayeen adeegga garsoorka.

Hadaba waxaa jiro su'aalo muhiim ah oo ku aaddan tayaynta hay'adaha amniga iyo garsoorka Puntland kuwaasi u baahan jawaabo waafiya:

- Ma loo baahan yahay siyaasad amni oo ay Puntland yeelato? Haddii jawaabtu tahay "Haa" maxay tahay qaabka ugu habboon ee loo dajin karo siyaasadaas loona hubin karo in ay noqoto mid taabba-gal ah oo la-wada-aqbalo lana fuliyo?
- Qaabkee ugu habboon oo laamaha amniga loogu jihayn karaa in ay yeeshaan aragti iyo qorshe fog oo lagu sugayo amniga?
- Sidee aragti midaysan oo amniga ah oo ay wadaagaan dawladda, laamaha amniga iyo shacabkuba looga hirgelin karaa Puntland? Qaabkeese loo hubin karaa loona daba-geli karaa wax-qabadka laamaha amniga iyo garsoorka? Ma loo baahan yahay in dib-u-eegis lagu sameeyo kharashaadka dawladda ee dhanka amniga? Sideese dakhliga yar ee la haysto si wanaagsan oo la-xisaabtan leh loogu bixin karaa baahiyaha ugu mudan ee dhanka amniga? Sideese bulshadu iyo barlamaanku ay kaalin ugu yeelan karaan kor-joogtaynta wax-qabadka laamaha amniga?

### *Soohdimeynta degmooyika*

Ka-qeybgalayaashii daraasadda amnigu waxay tilmaameen labo arrimood oo xudduudaha Puntland la xiriira: in ay yihiin kuwo aan lahayn ilaalo ku filan halka uu jiro muran xudduudda ah oo kala dhexeeya Somaliland. Waxaa iyana caqabad ah in degmooyinka iyo gobollada Puntland oo tiro ahaan aad u kordhay aysan lahayn xudduudo kala astaysan. Iyada oo awoodda dhaqaale iyo tan ciidanba ay hooseyso, haddana Puntland waxay dadaal badan ugu jirtaa sidii ay u sugi lahayd amniga xudduudaha ay la wadaagto Somaliland iyo Koonfurta Soomaaliya. Arrinta xudduudaha degmooyinka ee aan kala astaysnayn ayaa khatar ku ah guud ahaan amniga, geeddi-socodka maamul-baahinta iyo dimuqraadiyadaynta iyada oo keen karta colaado ka dhex aloosma degmooyinka iyo bulshooyinka dariska ah.

Dastuurka Puntland ma tibaaxayo muhiimadda ay leedahay in xudduudaha degmooyinka la kala asteeyo ama baahida loo qabo in la helo guddi kala soohdimeeya xudduudaha degmooyinka iyo gobollada. Waxa kaliya oo uu sheegayaa in xeer gaar ahi uu xadidi doono tirada, magaca iyo xadduuda degmooyinka. Marka laga soo tago dastuurka, siyaasadda maamul-baahinta Puntland ayaa muujinaysay in la dhiso guddiga soohdimeynta xudduudaha taas oo ku mud-daysnayd 2014, hase yeeshee wali guddigaas lama yagleelin. Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Puntland ayaa ku tala jirta in ay samayso guddigii ugu horreeyay oo noociisa ah oo loo igmado astaynta xudduudaha iyada oo maalin-gelin ka sugaysa Sanduuqa Xasilinta Soomaaliya (SSF).

Haddaba arrinta xudduudaha furan iyo koror-ka degmooyinka ayaa mudan in la iska waydiiyo su'aalahan soo socda:

- Sidee loo hirgelin karaa is-kaashi amni oo xudduudaha ah oo dhex mara Puntland iyo dariskeeda?
- Sidee ayay soohdimeynta xudduuduhu u dhimi karaan ama uga hortagi karaan muran-ka siyaasadaysan ee dhulka ee ka dhaxeeya bulshooyinka iyo degmooyinka kala duwan?

### *Xoojinta is-kaashiga bulshada iyo Booliiska*

Wax-qabadka laamaha amniga oo aan taabba-gal ahayn iyo qaabka adag ee ay ula dhaqmaan bul-shada iyo fahamka dadka ee ku aaddan fulinta sharciga oo hooseeya ayaa inta badan loo aa-neeyaa kalsooni-darrada iyo is-kaashi la'aanta ka dhex taagan bulshada iyo booliiska. Dadaa-lo badan ayaa dawladda oo gacan ka helay-sa hay'ado caalami ah iyo kuwo maxalli ah la sameeyay si la isugu soo dhaweeyo bulshada iyo booliiska inkastoo dadaaladaas aysan miro-dhal u noqon sidii la rabay. Waxaa kale oo iya-na dhibaata ah iyada oo hannaanka loo maray arrintaasi ay ahayd mid aragti iyo higsi cad aan ku dhisnayn iyo inta badan dadaalada oo ahaa kuwo aan isku-xirnayn, meelna u wada jeedin. Waxaa jira isku-dayo ay sameeyeen UNSOM, UNDP and Kooxda Miino-saarka Denmark (DDG), oo laga sameeyay magaalooyinka Ga-roowe, Qardho, Bosaaso iyo Eyl si loo helo hannaan ku dhisan kalsooni oo isku-xira ayana ku wada-shaqeeyaan booliiska iyo dadweynaha ay u adeegayaan.

DDG oo kaashanaysa Wasaarrada Amniga iyo maamulada degmooyinka Garoowe, Eyl iyo Qardho ayaa ku hawllan barnaamij kalsooni iyo wada-shaqayn looga dhex abuurayo bulshada iyo booliiska degmooyinkaas si loo xoojiyo na-badda iyo amniga. Hindisahaan waxa kale oo qeyb ka ahaa in la dhiso guddiyada badbaada-da bulshada oo heer degmo iyo heer tuulo ah, guddiyadaas oo shaqadoodu tahay in ay wa-da-hadal iyo is-fahan dhex dhigaan bulshada iyo booliiska si loo helo is-kaashi labada dhinac ah. Guddiyada badbaadada bulshada ayaa sidoo kale hawshoodu tahay in ay diyaariyaan baahi-yaha iyo qorsheyaasha amniga ee heer degmo. Mashaariicda la fuliyay ee ka mid ahaa qor-sheyaasha degmooyinka waxaa ka mid ah layrar lagu xiray qaar ka mid ah waddooyinka Garowe iyo Qardho iyo goobo booliis oo laga dhisay Eyl iyo Garoowe.

Si kasta oo ay ahaataba, waxa jira su'aalo la iska waydiin karo sida ugu habbaan oo kalsooni iyo is-kaashi looga dhex abuuri karo booliiska iyo bulshada, waxaana ka mid ah su'alahaas:

- Maxay yihiin siyaasadaha, qaab-dhismeedya-da iyo waddooyinka loo baahan yahay in loo maro sidii loo heli laho kalsooni, is-kaashi iyo xog is-dhaafsi dhex mara bulshada iyo laamaha amniga?
- Maxa loo baahan yahay si loo hubiyo in booliisku uu ilaaliyo sirta bulshada isla mar-kaana uu si anshax ku jiro ula dhaqmo mu-waadiniinta?
- Sidee sare loogu qaadi karaa fahanka iyo wacyiga dadka ee ku aaddan sarreynta iyo

fulinta sharciga iyo in ay ka qeyb qataan ilaalinta amniga? Qaabkeese dumarka iyo dhalinyarada looga qeyb galin karaa dhismaha nabadda iyo ilaalinta amniga?

*La-dagaallanka xagjirnimada*

Dhaqdhaqaada Al Shabaab ee ku dhuumaalaysanaya buuraha Galgala ayaa halis dhab ah ku ahaa amniga iyo xasilloonida Puntland siddeedii sano ee ugu danbaysay. Guulo badan ayaa lasoo hoyiyay tan bishii Oktoobar 2014, markaas oo ciidamada Puntland ay guluf wayn ku qaadeen fariisamada Al Shabaab ee buuralyda Golis. Gulufka oo socday tan iyo bilowgii 2015 ayaa laga gaaray guulo badan iyada oo ciidamada dawladdu ay dhul badan xoreeyeen, saldhigyana ka samaysteen rugihii Al Shabaabka. Waxaa kale oo jiray tiro dagaal-yahanno Al Shabaab oo ka soo goostay buuraha. Inkasta oo khasaare ba'an la gaarsiiyay haddana gulufkii militari waa u joogsaday iyada oo aan la ogayn sababta dhabta ee loo joojiyay. Arintan ayaa loo arkaa in ay Al Shabaab fursad siin karto ay dib isugu soo abaabulaan sida looga bartay dhaqdhaqaaqyadooda koonfurta dalka. Hawl-gallo iyo baaritaanno amni oo joogta ayaa laga sameeyaa magaalooyinka waaweyn taas oo tiro badan oo Al Shabaab ah lagu soo qabqabtay.

Dawladda Puntland ayaa sheegtay in dagaalka ay kula jirto argagixisada uu u leeyahay mudnaan sare loona baahan yahay in si guud la isaga kaashado. Wasaaradda Amniga ayaa qorshaynaysa in ay xoojiso dagaalkeeda ka dhanka ah Al Shabaab iyo sidoo kale in ay wacyi-gelin ballaaran samayso si dadka loo dareensiiyo khatarta Al Shabaab. Iyada oo gacan ka helaysa UNSOM, wasaaraddu waxay rajaynaysaa in ay dhisto xarun lagu dhaqan-celiyo cid walba oo ku lug yeelata falal argagixinimo. Puntland iyo dawladda federalka ayaa sidoo kale isku raacay in 3000 oo askari oo ka tirsan Puntland lagu daro dhismaha Ciidanka Xoogga Dalka si loo helo awood midaysan oo iska caabisa Al Shabaab iyo khataraha kale ee amni.

Wasaaradda Amniga ayaa sidoo kale qorshaynaysa in ay Wasaaradda Waxbarashada kala kaashato sidii manhaja waxbarashada loogu dari lahaa barashada nabadda si ubadka loogu barbaariyo nabadda iyo hab-nololeed aan ku dhisnayn xoog iyo shaqaaqo. 2012, cilmi-barayaasha PDRC ayaa isku duba-riday bare-kaabe loogu talo-galay ardayda dugsiyada sare. Buugaas/bare-kaabahaas ayaa ka hadlaya arrimo muhiim u ah barasha madaniga sida amniga iyo sharciga, nabadda iyo dimuqraadiyadaynta. In dhallinyarada laga caawiyo sidii ay si dhab ah uga fakarilahaayeen dhismaha nabadda iyo dawladnimada ayaa ah qaab habboon oo lagu xoojin karo in dhallinyaraddu si dhab ah u fahmaan muwaadinimada isla markaana ay ka feejignaadaan dabinka kooxaha xagjirka ah.

Haddaba waxaa jiro su'aalo xasaasi ah oo ay tahay in la iska waydiiyo sidii Al Shabaab loo wiiqi lahaa isla markaana dhalinta Puntland looga samata-bixin lahaa in ay ku lug yeeshaan falal argagixisinimo. Su'aalahaasna waxaa ka mid ah:

- Maxay loo joojiyay gulufkii militari ee ka socday buuraha Galgala iyada oo jiraan qulqulka dagaal-yahanno Al Shabaab oo ka imanaya koonfurta dalka? Ma jiraan dadaalo si dhab ah bulshadu lagu wacyi-gelinayo laguna dareensiinayo khatar Al Shabaab si y qeyb uga noqdaan dagaalka lagula jiro argagixisada? Kaalinteese bulshadu, gaar ahaan culimada, ka ciyaari karaan dagaalka lagu la jiro Al Shabaab iyo noocyada kale ee xagjirnimada?
- Isku-dhafka ciidamada ka socda Puntland iyo ciidan qaranka ma keeni doonaa is-kaashi iyo xog-wadaagis iyo in amaanka laga hormariyo wax walba iyada oo dhamaan qeybaha hoose ee bulshada laga qeybgelinayo adkaynta amniga?
- Shaqo la'aantu ma tahay sababta dhab ah ee ka danbaysa in dhalintu ku biirto Al Shabaab? Mase jiraan sababo kale oo arrintaa ka danbeeya? Sidii dhalinyarada loo jihayn karaa si

looga baaqsado in ay ku dhacaan dabinka kooxaha argagixisada ah?

*Ka-hor-tagga kalluumaysiga sharci darrada ah*

Inkasta oo ay hoos u dhaceen dhaqdhaqa-aqyadii burcad-badeednimada, haddana waxaa jira kalluumaysi sharci darro ah iyo xaalufin lagu hayo khayraadka badda Puntland taas oo dhaawac ku ah wax-soo-saarka kalluunka ee dalka. Bishii Juun 2014, madaxweynaha Puntland Cabdiwali ayaa ugu baaqay beesha caalamka in ay Puntland gacan ka siiyaan sidii loo soo af-jari lahaa kalluumaysiga sharci darrada ah, isaga oo sidoo kalena ugu baaqay shacabka Puntland in ay u midoobaan sidii looga hor-tagi lahaa fal-danbiyeedkaas. Madaxweynaha dawladda federalka Xassan Sheekh Maxamuud ayaa u diray Guddiga Caalamiga ah ee Xadaynta ee Xuduud-Badeedka (Continental Shelf) warqad ogaysiin ah oo ay Puntland taageertay bishii July 2014, warqaddaasi oo nuxurkeedu ahaa in la caddeeyo xuduudaha badda ee Soomaaliya, gaar ahaan aagga ganacsiga iyo Xuduud-badeedka Soomaaliya. Ujeeddada kale ee laga lahaa warqadda caddaynta ah ayaa ahayd in meesha laga saaro muranka la galiyay biyaha badda Soomaaliya isla markaan dhabaha loogu xaaro sidii dib-u-eegis loogu samayn lahaa Xeerka Badda ee Soomaaliya ee Xeer Lam. 37 soona baxay 10kii September 1972. Puntland ayaa hadda dib-u-eegis ku wadda Xeer Kalluumasiga Puntland oo soo baxay 2006 si loogu biiriyo qodobo iyo halbeegyo adag oo lala beegsano kalluumaysata sharci darrada ah.

Si hadaba loo xoojiyo fulinta shuruucda badaha loona maareeyo ka faa'iidaysiga khayraadka badda, dawladda Puntland waxa ay hawl-galinaysaa Ciidanka Booliiska Badda Puntland (PMPF) kuwaas oo u baahan in ay yeeshaan awoodo ku filan oo ay badda ku ilaalin karaan sida in ay sahamin karaan maraakiibta shiisheeye ee ka-dhex gooshaya badaha Puntland. Sida Wasaaradda Dekadaha iyo Khayraadka Badda ay ku warbixisay culaysyo dhaqaale iyo xayiraadda Qaramada Midoobay ee hubka ee saaran Soomaaliya ayaa qeyb ahaan hortaagan sidii loo qalabayn lahaa ciidanka PMPF. Waxaa kale oo wasaaradda u qorshaysan in ay samayso wacyi-gelin baahsan oo ku aaddan sidii loo dajin lahaa dhallinyarada kacsan ee qarka u saaran in ay hubka qaataan iyo guud ahaan bulshooyinka xeebaha ee ka gadoodsan dhibaatada kalluumaysata sharci darrada ah, waxayna wasaaraddu ku rajo weyntahay in ay dhammaan iska-kaashan doonaan sidii loola dagaalami lahaa kalluumaysata sharci darrada ah iyo muwaadiniinta Puntland u dhashay ee gacan siinaysa.

Haddaba, iyada oo laga duulayo suurta-galnimada ah in kalluumaysiga sharci darrada ah oo hadda socda uu mar kale horseedi karo in burcad-badeednimadu soo noqoto haddii aan tallaabooyin adag la qaadin, ayaa waxaa is-waydiin mudan su'aalaha soo socda:

- Sidee ayaa dib-u-eegis lagu sameeyo Xeerka Kalluumaysiga Puntland uuna wax uga tari karaa xaalufinta khayraadka badda Puntland? Dib-u-eegis kaliya ma ku filan tahay in arrintaan wax laga qabto? Dawladdu ma awoodi doontaa in ay fuliso xeerka kalluumaysiga iyo qodobada dabraya kalluumaysiga sharci darrada ah?
- Waa maxay baaxadda iyo khasaaraha jariifka hadda socda? Maxaa qorshaysan si looga gaashaanto in burcad-badeednimadu dib u soo noqonto? Dawladduse diyaar ma u tahay in ay wax ka qabato cabashada dadka xeebaha deggan ee ka tabanaya dhibaatada baaxadda leh oo ay ku hayaan kalluumaysata sharci darrada ah?
- Kaalintee ayaa maraakiibta shisheeye ee ilaalada ah ee gaaf-wareegaya biyaha Puntland ay ka ciyaaraan la dagaallanka kalluumaysiga sharci darrada ah, is-kaashise ma la leeyihiin laamaha amniga ee dawladda? Suurto-gal ma tahay in doorka maraakiibta dagaalka ee shisheeye ee baddaha Puntland ku sugan lagu soo dabbaalo sidii ay qeyb uga qaadan lahaayeen ilaalinta danaha Puntland, oo ay

ka mid tahay ilaalinta khayraadkeeda badda? Maxayse tahay tallaabooyinka muhiimka ah ee ay tahay in la qaado si loo wacyi-geliyo bulshada loogana qeybgeliyo dagaalka lagula jiro kalluumaysiga sharci darrada ah?

*Wax-ka-qabashada dagaal-beeleedyada*

Sida dad badan ay sheegeen intii ay socotay daraasadda astaynta caqadabaha amniga, colaadaha dhex mara beelaha ayaa halis ku ah amniga iyo xasilloonida Puntland. Waxaa jira tiro dagaal-beeleedyo ah oo aan wali si buuxda loo soo af-jarin - gaar ahaan gobollada Bari iyo Sool. Waxaa kale oo jira dagaallo ka dhaca xuduudaha , sida colaadaha u dhaxeeya bulshada waqooyiga iyo koonfurta Mudug iyo sidoo kale dadka deggan gobolka Cayn iyo Somaliland oo diriri dhex taalo. Wasaaradda Arrimaha Gudaha Puntland oo u xil-saaran dib-u-heshiisiinta beelaha ayaa qorshaynaysa in ay samayso daraasad lagu astaynayo dhammaan khilaafaadka bulsho ee ka jira Puntland, waxa kale oo ay ku han-weyn tahay in hoggaanka dhaqanka kaalin muuqata ay ku yeeshaan dadaalada dib-u-heshiisiinta iyo nabaddaynta. Hindise kale ayaa ah in la sameeyo gole dhaqan oo madax-bannaan oo gacan ka gaysta ka hortagga colaadaha iyo nabaddoonimada.

Daaqa iyo biyaha oo yar iyo la'aanta hannaan lagu wadaago khayraadka gabaabsiga ah ayaa inta badan loo aaneeyaa in ay sababeen colaadaha bulshada, gaar ahaan kuwa dhex mara bulshooyinka xoolo-dhaqatada ah. Sanduuqa Xasilinta Soomaaliya (SSF) ayaa maal-gelinaya ceelal laga qodayo goobo loo arkay in ay u nugul yihiin in ay ka dhacaan shaqaaqooyin ay keenaan biyo yaraantu. Waxaa kale oo SSF u qorshaysan in ay samayso daraasad lagu ogaanayo colaadaha khayraadka ku salaysan iyo in ay mustaqbalka maal-geliso mashaariic horumarin dhaqaale iyo kuwo wax loogu tarayo dadka dan-yarta ah si qeyb ahaan wax looga qabto faqriga iyo shaqo la'aanta baahsan. SSF ayaa sidoo kale diyaar u ah in ay dawladda ka gacan siiso sidii dhismaha nabadda iyo xasilinta dalka horay loogu sii wadi lahaa.

Su'aalaha soo socda waa kuwo mudan in la is-waydiiyo si wax looga qabto colaadaha ka jira Puntland:

- Maxay yihiin shuruucda iyo hannaanka maamul ee loo baahanay si loo maareeyo khayraadka dabiiciga ee Puntland, gaar ahaan dhulka, daaqa iyo biyaha? Maxay yihiin tallaabooyinka ay qaadi karaan dawladda iyo daneeyayaasha caalamiga ah si looga baaqsado colaadaha khayraadka ku salaysan iyo dagaal-beeleedyada soo noqnoqda?
- Sidee loo xoojin karaa, loona fulin karaa heshiisyada nabadda ee ay inta badan beeluhu garaan ee haddana la jabiyo? Sidee kaalinta odayaasha-dhaqanka iyo culimada ee ku aaddan ka-hortagga iyo xallinta dagaal-beeleedyada loo xoojin karaa?
- Sidee bulshada Puntland loogu soo dabbaali karaa dhaqan ku dhisan nabad, wada-noolaansho iyo wada-hadal oo ay ku wada naaloodan, kulana noolaadaan dariskooda? Kaalintee dumarka iyo dhalinyaradu ka qaadan karaan ka-hortagga iyo xallinta khilaafaadka?

*Xakamaynta hubka bulshadu haysato*

Haysashada hubka waa arrin caadi ka ah Puntland, waxaana jira tiro badan oo dadka rayidka ah oo haysta hub. Beelo badan ayaa sidoo kale haysta hub iyo saanad badan oo ay rumaysan yihiin in ay isaga waabinayaan khataraha la soo gudboonaada, inkastoo hubkaasi aanu ahayn mid si adag ama si cilmiyaysan loo ilaaliyo ama loo kaydiyo. Hubka ku baahsan gobolka ayaa guud ahaan soomaalida baday dhibaato lixaad leh, waxaana loo adeegsadaa dagaal-beeleedyada iyo fal-danbiyeedyada kala duwan. Sida ay muujinayso xog laga helay Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ee Puntland, 767 qof ayaa la dilay 2014 kuwaasi oo ku dhintay dagaal-beeleedyo ama

dilal toogasho ah.

Inkasta oo ay bulshadu dareensan tahay dhibaatada hubka iyo waxa uu baday, haddana in hubka-dhigis la sameeyaa ma ahan mid fudud. Tobankii sano ee ugu danbeeyay, Wasaaradda Amniga ayaa waday dadaal ay ku diiwaan-gelinayso hubka fudud, taas oo ka caawinaysa in la sharciyeeyo hubka la diiwaan-gelinayo ayna suurta-gal tahay in dabagal lagu samayn karo. Si kasta oo ay tahay arrintaani aysan ahayn mid si buuxda u hirgashay, waayo dadkaan u bislayn in ay hubkooda diiwaan-geliyaan.

Wasaaradda Amniga oo kaashanaysa Kooxda Miino-saarka Denmark (DDG) ayaa 2014 bilowday dadaal lagu xakamaynayo hubka fudud. Waxaa la dhisay guddi khuburo ah oo ka kooban Wasaarradda Amniga, booliiska iyo bulshada rayidka ah oo loo igmaday in ay ka hagaan kana talo-bixiyaan qaabka loo xakamayn karo hubka fudud. Waxa kale oo la ambaqaaday dib-u-eegis lagu samaynayo Xeerka Kala-daynbaynta Guud ee Xeer Lam. 1 soona baxay 5tii Janaayo 2000 si loo meelmariyo qodobo wax ka tari kara xakamaynta hubka ama mamnuucaya haysashada iyo ka-ganacsiga hubka ee aan sharciga waafaqanayn. Xeerka dib-u-eegista lagu sameeyay ayaa lagu wadaa in la horgeeyo kalfadhiga barlamaanka ee qorshaysan bisha Juun 2015 si loo ansixiyo.

Sidaas oo ay tahay, haddana, waxaa taagan su'aalo muhiim ah oo u baahan jawaab:

- Mar haddii hubka-dhigistu adag tahay maxaa tallaabo kale ah oo la qaadi karaa si loo xakameeyo adeegsiga hubka? Sidee dadka looga dhaadhicin karaa in ay hubka iska dhigaan, dawladduna dammaanad qaado ammaankooda?
- Iyada oo la ogyahay in adeegsiga hubka ee dagaal-beeleedyada uu keeno khasaare ba'an, sidee loo xakamayn karaa hubka ay haystaan beeluhu si aan loogu adeegsan colaadaha?
- Sidee loo xoojin karaa fulinta iyo sarreynta sharciga loogana hortagi karaa dhaqanka lagu magan-gelinayo qof danbiile ah ama in beeluhu difaacaan qofka danbiilaha ah ee ka dhashay?

| **Ka-qeybgaleyaasha** | **Tirada** | % |
|---|---|---|
| Maamullada Gobollada iyo Degmooyinka | 10 | 8.5 |
| Laamaha Amniga | 15 | 12.7 |
| Garsoorka | 12 | 10.2 |
| Odoyaasha-dhaqanka | 16 | 13.6 |
| Ururrada Dhalinyarada | 15 | 12.7 |
| Ururrada Dumarka | 15 | 12.7 |
| Ganacsatada | 6 | 5.1 |
| Dadka La-heyb-sooco | 7 | 5.9 |
| Aqoon-yahanka | 22 | 18.6 |
| **Wadar** | **118** | **100.0** |

*Shaxda 2: Ka-qaybgalayaasha oo Koox-koox ah*

| **Ka-qeybgaleyaasha** | **Tirada** | **%** |
|---|---|---|
| Rag | 86 | 72.9 |
| Dumar | 32 | 27.1 |
| **Wadar** | **118** | **100.0** |

*Shaxda 3: Ka-qaybgalayaasha oo jinsiga ku salaysan*

# 3 Tiirka Dimuqaraadiyadeynta

## 3.1 Hordhac

Tan iyo markii la dhisay Puntland 1998, qorshuhu waxa uu ahaa in laga gudbo qaabka awood qaybsiga ku dhisan qabiilka, loona gudbo habka xisbiyada badan ee dimuqraaddiga ah, iyada oo loo marayo doorashooyin xor iyo xalaal ah. Hase yeeshee, caqabado siyaasadeed iyo kuwo bulsho dartood, waxaa gaabis galay ballan-qaadkii ahaa in loo gudbo hab-siyaasadeed dimuqraaddi ah iyo nidaamka axsaabta badan, taas oo sababtey in dib loogu noqdo awood qaybsigii qabiilka ee horay loogu dhaqmi jiray.
Caqabadahaasi waxa ay ahaayeen kuwo kala duwan xagga dabeecadda iyo nuxurka. Daraasaddii ugu horreysay ee Asteynta Tiirarka Nabadda 2009 ayaa muujineysay in guud ahaan dadku uusan aqoon u lahayn dimuqaraadiyadeynta, sidaa darteedna ayan kalsooni ku qabin. Daraasaddu waxa ay muujisay caqabadaha ugu waawayn ee hortaagan geedi-socodka dimuqraaddiyadda Puntland in ay ka mid yihiin:

- Kala duwanaanshaha aragtida iyo fahanka dadku ka qabo dimuqraaddiyadda
- Siyaasadda oo weli salka ku haysa qabiil
- Siyaasadda cakiran ee ka jirta Soomaaliya guud ahaan
- Caqabadaha la xiriira hay'adaha dawladda ee Puntland

In kasta oo ay jireen caqabadaha kor ku xusan, haddana Puntland waxa ay guul kooban ka gaartey hirgelinta dimuqraaddiyadda sannadihii u dambeeyay. Waxa wacyi-gelin baahsan lagu sameeyey aqoonta madaniga ah. Guddiga Hoggaaminta tiirka Dimuqraadiyadeynta (Steering Committee for the Democratization Pillar), ayaa qaaday olole uu ku abaabuley doodo, aqoon-is-weydaarsi, baahinta farriimaha ku wajahan dimuqaraadiyadeynta iyo filimo ku saabsan geeddi-socodka dimuqraaddiyadda. Dadaalka kale ee kor u qaaday hirgelinta dimuqraaddiyadda iyo fahanka dadku ka qabo waxa uu ahaa golaha shacabka oo ansixiyey sharciga guddiga doorashada, shuruucda xisbiyada siyaasadeed iyo kuwa doorashooyinka, dhismaha Guddiga Ku-meel-gaarka ah ee Doorashooyinka Puntland (TPEC) July 2011, ku-dhaqanka Dastuurka u deggan Dawladda Puntland, iyo soo if-bixii ururro siyaasadeed oo curdan ah dabayaaqadiii 2012.

Dhismihii guddiga ku-meel-gaarka ah ee doorashooyinka Puntland (TPEC) waxa ay ahayd talaabo hore loogu qaaday geeddi-socodka

dimuqaraaddiyadda. Waxa ay billaw u ahayd dhaqan-gelinta geeddi-socodka, ka dib in ku dhow 15 sano. Durba markii la dhisay, TPEC waxa ay ku guuleysatey diiwaan-gelinta ururrada siyaasadeed, muddeynta xilliga doorashooyinka goleyaasha degaanka ee degmooyinka Puntland Luuliyo 2013, waxa ayna qaadday olole ballaran oo wacyi-gelin. PDRC iyo ururro kale oo isugu jira waddani iyo caalami ayaa guddiga hawshan ka taageeray. Hase yeeshee, 14 Luuliyo 2013-kii waxa la joojiyey doorashooyinkii goleyaasha degaanka, ka dib markii falal amni darro ka qarxeen qaar ka mid ah degaannada, taas oo dhabar-jab ku noqotay geeddi-socodka dimuqraaddiyadda Puntland.

Dib-u-soo celinta geeddi-socodka dimuqraaddiyadda waxa uu u baahan yahay u heelanaan dhab ah (commitment), u diyaar garow buuxa oo ay ka wada qayb-qaataan dhammaan daneeyeyaasha, oo ay ku jiraan dawladda, guddiga doorashada, ururrada siyaasadda, bulshada rayidka ah iyo dadweynaha guud ahaan. Wakhtiga hadda ah, hab dawladeedku waxa uu dib ugu laabtey qaabkii wax-qaybsiga ee ku dhisnaa qabiilka ee lagu xulan jirey Xildhibaannada Golaha Shacabka, kuwaas oo iyaguna doorta hoggaanka sare ee dawladda.

8-dii Janaayo 2014, maamulka hadda jira sidaa ayuu ku hantay talada, isaga oo tartan adag la galay, kana guuleystey, maamulkii hore (ee uu madaxda u ahaa Faroole), iyo murashixiin kale. Mid ka mid ah ballan-qaadkii ugu horreeyey ee madaxweyne Cabdiweli Maxamed Cali Gaas ayaa ahaa in uu ka dhabeyn doono rajadii dadweynaha ee ahayd "hal qof iyo hal cod" inta uu xilka hayo. Si uu taa u meel-mariyo, madaxweynuhu waxa uu dhisay Wasaaradda Dastuurka, Arrimaha Federaalka iyo Dimuqraaddiyeynta, taas oo loola jeedo in ay hormuud u noqoto horumarka siyaasadeed ee Puntland.

Ka dib markii dib loo dhigey doorashooyinka goleyaasha degaanka ee Puntland, PDRC iyo hay'adda ay bah-wadaagta yihiin ee Interpeace waxa ay u hawl-galeen dib-u-bilaabidda hannaanka dimuqraaddiyadda ee dib u dhacay. Labada hay'adood waxa ay fuliyeen ra'yi ururin baahsan, halkaas oo ay ku caddaatay in inta badan ummaddu doonayso in dib loo soo cesho geeddi-socodka dimuqraaddiyadda sida ugu dhaqsaha badan. Daraasaddii labaad ee Barnaamijka Tiirarka Nabadda bilihii Agoosto iyo Nofeembar 2014-kii waxa ay muujisey in horumar la sameeyey marka loo eego caqabadihii horey u jiray. Hase yeeshee, weli waxaa jira caqabado u baahan in wax laga qabto si dimuqraaddiyaddu uga hir-gasho Puntland. Qaar ka mid ah caqabadaha daraasaddu daah-furtey ayaa ahaa ka gudbidda hannaanka siyaasadeed ee ku dhisan qabiilka, loona gudbo nidaamka dimuqraaddiyadda, dadaalka dawladda oo yar, koobnaan awoodda waxqabad, iyo caqabado guud oo la xiriira amniga iyo xasilloonida.

## 3.2 Caqabadaha Hortaagan Geeddi-Socodka Dimuqraaddiyadda

### 3.2.1 Ka gudbidda Hannaanka Qabiilka iyo U-gudbidda Dimuqraaddiyadda

Ku-dhaqanka habka qabiilku waa astaan gaar u ah bulshada iyo siyaasadda Soomaalida. Qaddiyadda qabiilku waxa ay ka sarreysaa tan dawladda iyo weliba tan diinta. Udub-dhexaadnimada qabiilku waxa ay ka muuqataa dhammaan heerarka kala duwan ee nolosha iyo siyaasadda, waxa ayna caqabad ku tahay dimuqraaddiyadda Puntland iyo Soomaaliya guud ahaan.

> *"Habka qabiilku waxa uu si buuxda u dhex galay siyaasadda Puntland. Su'aashu waxa ay tahay sidee looga dhex saaraa saameynta uu ku leeyahay geeddi-socod-*



*Madaxweyne Cabdiweli oo tartan kubadda cagta ah oo nabadeed u billaabay dhallinyarada Galdogob*



*Golaha degaanka Jerriiban oo dooranaya guddoomiyaha degmada*



*Taliyaha saldhigga Galdogob oo tilmaamaya baahida ay u qabaan in la taakuleeyo, muddadii ay socotey asteynta caqabadaha*



*Ka-qayb galeyaasha Shirweynihii Daneeyeyaasha Puntland oo daawanaya filim ay soo diyaarisey qaybta maqal-muuqaalka ee PDRC*



*Ardayad dhool-bireysa, Gaalkacyo*



*Inan yar oo walaalkii ku dhintay colaad sokeeye, Xero-Jaalle*



*Xallinta colaadda sokeeye ee Raka oo odayaashu u fadhiyaan*

*ka dimuqraaddiyadda". - Mukhtar Axmed Farax (Buuhoodle)*

Daneeyeyaasha ka qayb-galey daraasadda waxa ay wada-hadal dheer ka yeesheen sarreynta qabiilka iyo saameynta uu ku leeyahay bulshada iyo siyaadda Puntland. Isaga oo ka hadlaya muhimadda qabiilku u leeyahay, mid ka mid ah ka-qeyb-galeyaasha daraasadda ayaa qaba aragtida ah in qabiilku la mid yahay caymiska nolosha qofka, isla markaana ay adag tahay in laga fogaado.

*"Waxaa loo baahan yahay in arrin mucjiso ahi dhacdo si qabiilka looga tir-tiro maskaxda iyo nolosha Soomaalida" - Cali Cabdi Jibril (Baran)*

In badan oo ka mid ah dadka la wareystay ayaa aaminsan in qabyaaladdu sabab u tahay dagaallada sokeeye ee burburiyey dawladdii dhexe ee Soomaaliya, halka qayb kale qabaan "dagaalku in uu oodda ka rogey dhaqanka xun ee qabyaaladda." Hase yeeshee, dadka in badan ayaa u arka loollanka beeluhu ugu jiraan gacan-sarreynta siyaasadda in ay sababtey burburka ka jirey Soomaaliya 24-kii sano ee tagey, iyo weliba caqabadda maanta hor-taagan in dib loo dhiso dalka.

Dadka la wareystay intooda badan waxa ay qabaan in qabyaaladda iyo saameynteeda xun ee siyaasadda khatar joogto ah ku ahaan doonaan geeddi-socodka dimuqraaddiyadda. Waxa ay tilmaameen meelaha qabiilku saameynta khatarta ah ku yeelan karo, sida arrimaha ay ka mid yihiin diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha, soohdimeynta degmooyinka, doorashooyinka, qoondeynta kuraasta degmooyinka, magacaabista xubnaha sare ee axsaabta siyaasadeed iyo qaybinta jagooyinka sare ee laamaha siyaasadeed ee dawladda.

Daneeyayaashu waxa ay sawir cad ka bixiyeen saameynta qotada dheer ee qabiilku ku leeyahay arrimaha caamka ah ee Puntland. Dawladda Puntland waxa ay ku dhisan tahay nidaamka qabiilka. Kuraasta golaha wakiillada, xilalka wasiirrada, jagooyinka hay'adaha qaranka iyo weliba goleyaasha degaanka ee degmooyinka dhammaantood waxaa lagu qaybsadaa hab qabiil.

Qaar ka mid ah ka-qayb-galeyaasha ka socdey dawladda iyo weliba kuwo kale oo shacab ah waxa ay isku waafaqeen in aan habka qabiilka si fudud looga tirtiri karin nolosha bulshada iyo siyaasaddaba, xitaa haddii ay yimaadaan ururro siyaasadeed iyo doorashooyin. Xaaladaha sababay in qabiilka iyo weliba xoogagga uu salka ku hayo ay weli noolyihiin jiraanna, ayaa si xoog leh  u hor-taagan dimuqaraadiyadda soo if-baxaysa iyo in ra'yiga qofku ka sare maro kan qabiilka. Habka qabiilku waxa uu hoos u dhigaa ka-qayb-galka dumarka iyo dhallinyarada arrimaha siyaasadda, arrintaa oo lid ku ah mabaadii'da dimuqraaddiyadda. Intii ay socotey daraasaddu, dumarka, dhallinyarada iyo dadka la-hayb sooco ee la wareystay waxa ay hoosta ka xarriiqeen in aysan ku qanacsaneyn  habka qabiilka.

*"Ma garayno waxa aan ku kasbanay in nala faquuqo. Haddii dimuqraaddiyaddu caddaalad keeneyso, diyaar baan u nahay in aan taagerno." Keyf Ali Ismail, Xildhibaan gole degaan Galdogob (beelaha la hayb sooco)*

In ka mid ah dadka wax la su'aaley waxa ay qabeen sida keliya ee lagu shiiqin karo gacan sarreynta habka qabiilka in ay tahay olole dheer oo waxbarshada madaniga ah iyo horumar dhaqan-dhaqaale. Si looga guuro habka wax-qaybsiga ee ku dhisan qabiilka, looguna guuro hab-dawladeed dimuqraaddi ah oo ku dhisan doorashooyin, waxa lagama maarmaan ah in hoos loo dhigo awoodda qabiilka, gaar ahaan dhanka arrimaha dawladda, isla markaana la dardar gesho xisbiyo siyaasadeed oo saldhig u noqda siyaasadda dalka.

### 3.2.2 Ka go'naanshaha iyo Awoodda Waxqabad oo Liidata

Caqabadaha la xiriira hay'adaha qaranka waa kuwa muuqda, isla markaana fara badan. Qaarkood waxaa laga dhaxlay maamulladii hore, halka kuwa kale ay ka dhasheen duruufaha jira, sida dadaalka xukuumadda oo hooseeya, qorshe xumo iyo khibrad la'aan, iyo siyaasadda oo ku xiran qabiilka. Sida ay ku warbixiyeen dadka la wareystey, caqabadaha laga dhaxlay maamulladii hore waxa ka mid ah horumarin la'aan shaqaalaha dawladda iyo haqabtirka adeegyada aasaasiga oo liita, arrimahaas oo dib-u-dhac ku noqday maamulka iyo fulinta siyaasadaha dawladda.

Caqabadaha qaarkood waxa ay ka dhasheen saaxada siyaasadeed ee Puntland, taas oo ay ka muuqato jiritaan la'aan qaabab cadaadis lagu saaro dawladda, la'aanta hoggaan lagu kalsoon yahay iyo bulshada oo aan qaangaarnimo siyaasadeed lahayn.

> *"Marka si guud loo hadlo, hoggaamiyeyaasha Puntland iyaga ayaa mas'uul ka ah dib-u-dhaca ku yimid hannaanka dimuqraaddiyadda sababahan dartood: waxa ay si ku-daneysi ah uga faa'ideystaan habka qabiilka ama waxay ka maran yihii tayo hoggaamin ay wax uga qabtaan dhibaatada. Qaybo ka mid ah bulshada (dhaqanka, diinta, iwm.) ayaa mas'uuliyaddaa la wadaaga"*
> *- Cilmi Cali Guuleed (Siyaasi, Gaalkacyo)*

Dadkii ka qayb-galey daraasadda ma aysan xaqiijin karin maamulka cusub awoodda uu u leeyahay iyo illaa iyo xadka uu doonayo in uu meel-marsho ballanqaadkii ahaa in uu Puntland ka hir-gesho nidaam dimuqraaddi ah, waxana ka muuqatey in ay leeyihiin "aan ka dhur sugno!"

Hay'adaha dawladda waxa loo igmaday wax ka qabashada caqabadaha hor-taagan dib u bilaabidda geedi-socodka dimuqraaddiyadda, oo ay ka mid yihiin hub-ka-dhigista shacabka, xadeynta xudduudaha, diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha, xogta iyo waxbarista codeeyeyaasha iyo dib-u-heshiisiin siyaasadeed.

Arrinta la xiriirta soohdimaha Puntland iyo derisyadeeda, sida Soomaliland iyo Gal-mudug, ayaa caqabad ku ah maamulka cusub, ayada oo aan laguba darin maamullada cusub ee dhawaan soo if-baxay. Ayada oo ka hadlaysa arrintan, Xawo Maxamed (hoggaamiye Urur haween) oo joogta Gaalkacyo waxa ay tiri "Soohdimaha Puntland oo dhan ma'aha kuwo hoos yimaada xukunka Puntland. Hadaba, sidee doorasho uga dhici kartaa degaannada daafaha xiga ee aysan Puntland xukumin?".

Cali Cigaal oo jooga Gaalkacyo waxa uu ka hadlay kalsoonida dadku ku qabo hoggaanka:

> *"In kasta oo dadku u diyaarsan yahay dimuqraaddiyad, haddana waxa ay shaki ka qabaan hoggaanka dawladdu in aysan ka go'nayn rabitaanka geeddi-socodka dimuqraaddiyadda, sababta oo ah waxa ay cabsi ka qabaan in awooddu ka baxdo gacantooda".*

Yaasiin Cabdisamed, hoggaamiye dhaqameed jooga Gaalkacayo, waxa uu ku dhaleeceeyey dawladda in aysan odayaasha dhaqanka u sameyn haykal dawladeed rasmi ah:

> *"Odey dhaqameed ahaan ma lihi door qeexan oo dastuurku i siinayo, marka waxaan xaq u leeyahay in aan fuliyo xilka uu i saaray qabiilkayga ee ah in aan u xulo xubnaha qabiilkayga u metelaya golaha shacabka".*

Md.Yasin Cabdisamed, asaga oo tilmaamaya in uusan jirin aqalka guurtida ee odayaal dhaqameedka Puntland, sida Somaliland oo kale, waxa uu sheegay aqalka guurtidu in uu hubin lahaa in golaha fulintu (executive) si caddaalad ah qabiillada uga wada qayb-gesho dawladda.

Dadkii ka qayb-galey daraasadda intooda badan waxa ay tilmaameen muhiimadda ay leedahay in wax laga qabto caqabadaha lidka ku ah dib-u-soo celinta geeddi-socodka dimuqraaddiyadda. Waxa ayna ugu baaqeen madaxda hay'adaha qaranka in ay sida ugu dhaqsaha badan xal ugu helaan caqabadahaas.

### 3.2.3 Baahsanaanta iyo Helitaanka Sahlan ee Hubka

Ka qayb-galayaasha daraasaddu waxa ay wel-wel ka muujiyeen beelaha hubaysan, iyo shaqa-aqooyin iyo kacdoonno lid ku ah doorashada in ay dhici karaan marka la gaaro wakhtiga doorashooyinka. Dadkii la waraystey waxa ay rumaysnaayeen mid ka mid ah sababihii ka dambeeyey joojinta doorashooyinkii goleyaasha degaanka ee 2013-kii in ay ahayd cabsi laga qabey in ay rabshado dhacaan taas oo ay ugu wacnayd hubka ku baahsan gacanta shacabka.

> *"Caqabadda ugu wayn ee hor-taagan dimuqraaddiyadda Puntland, gaar ahaan doorasho xor iyo xalaal ah, waa hub-ka-dhigis la'aanta shacabka." - Cabdinaasir Seer-aar, ganacsade (Boosaaso)*

Waxa kale oo ay cabsi ka muujiyeen beelaha eedda tirsanaya, iyo odayaasha dhaqanka iyo siyaasiyiinta aan laga qayb-gelin talada in ay kicin karaan, hubeyn karaanna, taageerayaashooda si ay uga hortagaan doorashada. Hubka oo ay fududahay heliddiisa waxa uga sii dara awood darrada ciidammada amniga ee ay ku caabbin karaan khatarta.

Meesha kale ee khatartu ka iman karto ayaa ah soohdimaha degmooyinka oo aan qeexnayn. Haddii aysan jirin soohdimo, bulshooyinku waxa ay ku dagaallami karaan xudduudaha degaamada iyo goobaha cod-bixinta ayaga oo ilaashanaya awooddooda siyaasadeed.

Cabashooyin ka soo jeeda doorashooyinkii la joojiyey ee 2013-kii ayaa sababi kara in uu soo if-baxo mucaarad cusub oo lid ku ah hannaanka. Dadka la wareystay waxa kale oo ay sheegeen in kooxda Al-shabaab ay khatar weyn ku tahay dimuqraaddiyadda iyo ka-qayb-galka muwaadiniinta ee hannaanka doorashada iyo coddeynta. Si kastaba ha ahaatee, dadkii daraaasadda lagu waraystay waxa ay qabeen in sida keliya ee dawladdu u badbaadin karto hannaanka doorasho ay tahay iyada oo hirgelisa hawl-gal amni-sugid xooggan, iyada oo hubinaysa in hannaanka doorashadu yahay mid lagu kalsoon yahay, dadkuna ka wada qayb-galo.

## 3.3 Caqabadaha Hor-taagan Doorashooyinka

### 3.3.1 Wacyiga Dadka oo Hooseeya

Ka-qayb-galeyaasha daraasadda, markii ay ka doodeen caqabadaha iyo fursadaha lagu horumarin karo hannaanka dimuqraaddiyadda, waxa ay garowsadeen baahida loo qabo olole ballaaran oo wacyigelineed oo dadka lagu barayo mabaadii'da iyo ku-dhaqanka dimuqraaddiyadda, taas oo guud ahaan aanay dadku wada fahansaneyn. Waxaa loo baahan yahay in wax laga qabto fikradaha khaldan ee dadku qabo, iyo colaadda ay kooxo diimeedyada danaha gaarka ah lehi u qabaan dimuqraaddiyadda. Daneeyeyaashu waxa ay garowsan yihiin in ka-guurista habka qabiilka iyo u-gudbidda dimuqraaddiyaddu u baahan tahay in iskaashi laga yeesho sidii loo tir-tiri lahaa saameynta xooggan ee qabiilku ku leeyahay siyaasadda.

Nolosha reer-guuraaga xoola dhaqatada ah ee Puntland ka jirta darteed, waxa badan dadka inta aan wax qorin ama akhrin. Sidaa darteed,

waxa yar fahanka dadku u qabo fikradaha iyo mabaadii'da dimuqraaddiyadda, axsaabta siyaasadeed, doorashooyinka ama maamul wanaagga. Dadkii ka qayb-galay daraasadda aqoon darradan waxa ay ku tilmaameen in ay caqabad ku tahay geeddi-socodka dimuqraaddiyadda.

*"Waan soo dhaweynayaa dimuqraaddiyadda Puntland, laakiin waxan doonayaa in aan si wanaagsan u fahmo [waxa loola jeedo dimuqraaddiyad]." - Kadijo Cabdi Maxamed, Bossaso*

*"Waan garanayaa waxa qabiilku ii qaban karo, balse ma fahansani dimuqraaddiyadda. Sidaa darteed, isma bar-bar dhigi karo labada [hab]." – Siciid Maxamed Xirsi, Dhahar*

In yar oo reer Puntland ah ayaa horey u aragtey doorasho. Dadka intooda badan, gaar ahaan dhallinyarada, waxa ay u baahan yihiin in la baro sida wax loo doorto. Waxa loo baahan yahay qorshe waxbarasho baahsan oo dadka lagu barayo, lana siinayo xog ku saabsan, doorashooyinka:

*"Marka laga reebo dad tiro yar oo waayeel ah, dadka intiisa badan waxba ka garan maayaan doorashooyin." – Nuuro Maxamed Axmed, Xubin u Doodda Dhallinyarada, Galdogob*

### 3.3.2 Jiritaan La'aan Maxkamad Dastuur

Hannaanka doorasho oo aan lahayn maxkamad dastuuri ah waxa ay sababtey Guddigii Ku-Meel Gaarka ahaa ee Doorashooyinka (TPEC) iyo ururradii siyaasadeed ee markaa jirey in murmaan iyo khilaaf ka dhex aloosmo. Haddaba su'aasha mudan in lays weydiiyo ayaa ah kuwee baa xallin kara iyo sidee baase loo xallin kaaraa khilaafyada la xiriira doorashooyinka iyo xaaladaha hab-raaca doorashooyinka oo soo if-bixi kara xilliga doorashooyinka. Hoggaamiyeyaashii ururrada siyaasadeed ee UDAD iyo WADAJIR, Siciid Farax Maxamed iyo Luul Jamac Nuur, waxa ay hoosta ka xarriiqeen muhiimadda ay Maxkamadda Dastuurigu u leedahay qabashada doorasho xor iyo xalal ah:

*"Maxkamad dastuurigi ah waa in ay jirtaa si ay u dhex-dhexaadiso saddexda awoodood ee dawladda marka khilaaf ka dhex dhasho, iyo si ay u xalliso muranada ka dhasha doorashooyinka - Cali Xaji Cabdulle (Siyaasi)*

### 3.3.3 Jiritaan La'aan Xuduudaha Gobollada iyo Degmooyinka

Xadeynta soohdimuhu waxa ay muhiimad ballaaran u leedahay doorashooyinka, sababta oo ah doorashooyinku waxa ay ka dhacaan heer degmo. Haddii degmooyinku xadkoodu uusan caddeyn, sida waafaqsan dastuurka, suurtogal ma aha in la qoondeeyo kuraasta iyo goobaha cod-bixinta ee degmooyinka. Markii Puntland la dhisay 1998-dii, waxaa jirey 20 degmo oo la aqoonsan yahay, lehna xuduuddo qeexan; wakhtiga hadda ah tirada degmooyinku waxa ay mareysaa 43. Sida ay daneeyeyaashu tilmaameen, xuduudaha gobollada iyo degmooyinka oo aan qeexnayn iyo weliba tiro koob la'aanta dadka ayaa ah dhibaatooyin aad u waaweyn oo khilaaf qabiillada ka dhex abuuri kara.

*"Kororka degmooyinka waa arrin jahwareer iyo khatarba leh. Tusaale ahaan, degmada Iskushuban waxa ay u qaybsantay shan degmo." - Cali Xaji Cabdulle (Siyaasi Garowe).*

### 3.3.4 Jiritaan La'aan Diiwaanka Cod-bixiyeyaasha iyo Waraaqaha aqoonsiga

Waa in qiyaas macquul ah lagu sameeyo tirada dadka cod bixin kara (haddii aan tirakoob

la sameyn karin) si looga hortago wax-is-daba marin doorasho, iyo in degmooyinka si caddaalad ah kuraasta loogu qoondeeyo. Aqoonsiga cod-bixiyeyaasha ayaa iyaduna muhiim ah si loo ogaado cidda xaqa u leh in ay codeyso, sida uu dhigayo dastuurku.

*"Doorashooyinka ka hor, waa in la kala saaro muwaadinka, bara-kacayaasha iyo ajaanibta. Sida keliya ee taas lagu heli karo waa aqoonsiga iyo diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha" Saynab Sheekh Cismaan, Xubin Urur Haween, Gaalkacyo*

*"Haddii aysan jirin diiwaangelinta iyo aqoosiga cod-bixiyeyaasha, doorashadu ma waafaqasana dastuurka" - Cabdiweli Cali (KAALO NGO).*

### 3.3.5 Ilaha Dhaqaale oo Xaddidan

Doorasho waa hawl u baahan dhaqaale fara badan, gaar ahaan marka laga bilaabayo meel cidla ah. Hawlaha ay ka mid yihiin soohdimeynta degmooyinka, diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha, daabicidda waraaqaha coddeynta iyo sugidda jawi ammaan ah oo ku habboon geedi-socodka iyo cod-bixiyeyaasha, dhammaan waxa ay u baahan yihiin dhaqaale badan iyo aqoon. Marka la eego Puntland, labuduba waa ku yar yihiin.

*"Labada arrimood ee muhiimka u ah meel-marinta hannaan dimuqraaddi ah waa ka go'naanta dawladda iyo helitaanka dhaqaale" Caasha Geelle Diiriye (Gaalkacyo)*

### 3.3.6 Axsaabta Siyaasadeed ee Cusub

Dadkii ka qayb-galey daraasadda waxa ay garowsanaayeen khatarta ay leedahay in axsaab siyaasadeed laga dhex abuuro bulsho ay hareeysay siyaasadda qabiilku, waxa ayna welwel ka muujiyeen marxaladda siyaasadeed ee hadda jirta. Caasha Cabdikariim Xirsi, oo deggan Eyl, waxa ay tilmaantey in ay dooran lahayd "xisbi siyaasadeed oo loo dhan yahay, isla markaana horumariya nabadda, himiladiisuna tahay sinnaan iyo caddaalad." Axmed Jaamac Cabdulle, oo deggan Gaalkacyo, waxa uu taagersan yahay "xisbi leh qorshe siyaasadeed iyo hoggaamiyeyaal wanaagsan", halka Samiira Jaamac Maxamed, oo ku nool Boosaaso, taageeri lahayd "xisbi la dagaallama qabyaaladda iyo musuq-maasuqa."

Dadka la wareystay astaamo isku mid ah ayey ku tilmaameen axsaabta siyaasadeed ee looga baahan yahay in ay ka jiraan Puntland, waxa ayna aaminsanaayeen in lixdii urur siyaasadeed ee loo diiwaan-gashay in ay ka qayb-galaan tartanka doorashooyinka dawladaha hoose Luulyo 2013-kii uusan midkoodna buuxin shuruudaha kor ku xusan. Waxa ay ku war-bixiyeen in ururrada siyaasadeed aanay xiriir fiican la lahayn degaannada (constituencies).

*"Xisbiyada siyaasadeed laguma saleyn degaan iyo xubinnimo, mana lahayn qorsheyaal cad-cad oo ka dhexeeyey, hoggaamiyeyaashuna waxa ay u muuqdeen kuwo cidla ka soo baxay" - Xirsi Muse Xirsi (Qurbajoog Qardho)*

## 3.4 Fursadaha Jira ee Faa'idada u Leh Dimuqraaddiyadda Puntland

Daraasadda la sameeyey waxa ay asteysay in ay jiraan fursado wax ku biirin kara dib-u-soo celinta iyo ka mira-dhalinta geeddi-socodka dimuqraaddiyadda Puntland.

### 3.4.1 Taageerada Dadka

Dadka ka qayb-galey daraasadda, iyo bulshada guud ahaan, aad ayey u taageersan yihiin dimuqraaddiyadda, ayaga oo aqbalsan fikradaha iyo mabaadii'da dimuqraaddiyadda, haddiiba ay waafaqsan tahay diinta Islaamka iyo dhaqanka Soomaaliyeed ee suubban.

Sannadihii u dambeeyey, wacyiga bulshada dhanka dimuqraaddiyaddu kor ayuu u kacay. Wakhtiga hadda ah, dadku si weyn ayuu u danaynayaa geeddi-socodka dimuqraaddiyadda iyo fikradaha iyo mabaadii'da dimuqraaddiyadda.

> *"Waxa aan xasuustaa wakhti yar ka hor in dimuqraaddiyadda oo laga hadlaa ay ka dhignayd in diinta la caayey. Haddana waa hab siyaasadeedka aan hiigsaneyno." - Cumar Aadan Cabdulle (Xubin golaha degaanka Galdogob)*

Isbeddelka ku dhacay aragtida dadka waxa uu ka dhashay olole ay jileyaal kala duwan ku qaadeen kobcinta wacyiga ummadda xilligii ay soo dhawaadeen doorashooyinkii la isku dayey in la qabto; jileyaashaas oo ay ka mid ahaayeen ururrada bulshada rayidka ah, dawladda, ururrada maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ahba.

Intii ay socotey doorashadii ugu dambeysay, dadka reer Puntland waxa u bidhaantay nidaam dawladeed oo ku dhisan dimuqraaddiyad iyo habka axsaabta badan. Waxa ay wax ka barteen fikradaha dimuqraaddiyadda, ururrada siyaasadeed, iyo doorashooyin kala heerar duwan, aqoontaas oo ku khasbeysa dawladda in aysan iska dhega-tirin rabitaanka dadweynaha.

Xisbiyada siyaasadeed waa saldhigga dimuqraaddiyadda. Xisbiyada siyaasadeed ee dhabta ah waxa ay isku xiraan qaybaha kala duwan ee bulshada ee ka tirsan taageerayaashooda, gaar ahaan kuwa aan laga qayb-gelin arrimaha siyaasadda. Waxa kale oo ay ka qayb-qaataan la-xisaabtanka dawladda, hubiyaanna waxqabadka dawladda si loo gaaro maamul-wanaag, hufnaan iyo isla-xisaabtan dhanka fulinta arrimaha bulshada. Si kastaba ha ahaatee, ma fududa in la dhiso xisbiyo siyaasadeed oo buuxin kara ujeeddooyinkaas, sida ka muuqata waaya-aragnimadii Soomaaliya iyo dhacdooyinkii dhawaan ka dhacay Puntland.

### 3.4.2 Ka go'naanshaha Guud ee Dawladda (General government commitment)

Dadkii lagu waraystay daraasadda waxa ay ku baraarugsanaayeen sida ay u adag tahay in bulsho ku dhisan qabiil laga dhex sameeyo xisbiyo siyaasadeed oo dhab ah oo leh mabaadii' cad-cad.

Dadka waxa la su'aalay, "maxay yihiin fursadaha jira ee dib loogu billaabi karo geeddi-socodka dimuqraaddiyadda?" Guud ahaan, iyada oo maamul cusub talada hayo, ka qayb-galayaashu waxa ay muujiyeen kalsooni in ay ku qabaan dib-u-bilaabidda hannaanka dimuqraaddiyadda:

> *"Maamulka hadda jirta waa in uu saxo khaladkii uu galay maamulkii ka horeeyey iyo in uu ka faa'iidaysto wakhtiga uu haysto" - Xawo Cabdi Jamac (Qurba-joog Gaalkcayo)*

> *"Maamulka cusub waxa uu haystaa casharro muhiim ah oo laga bartay khibraddii hore, wakhti ku filan iyo bulshada oo diyaar u ah dib-u-bilaabidda hannaanka dimuqraaddiyadda" - Axmed Khaliif Cabdulle (Galdogob), waraysi.*

Dadkii ka qayb-galey daraasadda waxa ay dareensanaayeen in maamulka cusub ballan-qaaday in uu dardar-gesho, dhamaystiri doonana, geeddi-socodka dimuqraaddiyadda. Sida ay qiyaasayeen, khibrad dhab ah iyo waaya-aragnimo ayaa laga dhaxlay doorashooyinkii la joojiyey 2013-kii, taas oo saldhig u noqon karta go'aannada dambe ee dawladda.

Sida ay uga go'an tahay dawladdu in ay dib-u-bilawdo geeddi-socodka dimuqraaddiyadda waxa caddeyn u ah in la sameeyey Wasaaradda Dastuurka, Arrimaha Federaalka iyo Dimuqraaddiyeynta. Wasaaraddan oo loo magacaabay wasiir dumar ah, dadku waxa ay u arkaan in ay tahay ballan-qaad dawladeed oo kii hore ka sii badan. Wasaaraddu waxa ay korjoogtayn doontaa, xiriirin doontaana, hay'adaha kale dhanka hawlaha lagu horumarinayo geeddi-socodka dimuqraaddiyadda. Wasaaraddu waxa kale oo ay hormuud u noqon doontaa dhaqaajinta dimuqraaddiyadda Puntland iyada oo ka bilaabeysa dejinta hab-raac rasmi ah (legal framework), wacyigelinta bulshada, hubinta hannaanka dimuqraaddiyadeed, ka qayb-gelinta iyo gacan-siinta ururrada maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah  iyo kor-u-qaadidda kalsoonida dadka.

"Madaxweynaha cusub waa qof aqoon leh, isla markaana lagu yaqaan hoggaan-wanaag. Shaki iigama jiro in uu guulaysan doono."  Maxamed Cabdullahi Faarax (Galkacayo).

Sidoo kale waxa yiri:

> *"Wasiiraddu waxa ay garansiin doontaa dumar badan in ay ka qayb qaataan hannaanka."  Nuuro Maxamed Axmed (U-heellane Arrimaha Dhallinyarada, Galdogob)*

### 3.4.3 Faa'idada Dadku ka Filayo Dimuqraaddiyadda

Maaddaama dawladdu ballanqaadday in ay dib u soo celineyso hannaanka dimuqraaddiyadda, rajada dadku kor ayey u kacday. Dadka reer Puntland waa ay ku daaleen siyaasadda qabiilka ee tuhunka badan, waxa ayna doorashooyinka guud u arkaan in ay yihiin hab looga gudbi karo takoorka siyaasadeed, gaar ahaan dumarka, dhallinyarada iyo beelaha la hayb-sooco. Kooxahan waxa ay dimuqraaddiyadda u arkaan sida keliya ee kor loogu qaadi karo ka-qayb-galka siyaasadda, saameynna loogu yeelan karo talada lagu hagayo dalka (decision-making processes). Daneeyeyaasha lagu wareystey daraasadda waxa ay hoosta ka xarriiqeen dumarka, dhallinyarada iyo beelaha la hayb-sooco in ay ka faa'idi doonaan dimuqraaddiyadda

In kasta oo weli loo baahan yahay isbeddel siyaasadeed iyo mid hay'adeed (institutional and political reform) ka hor inta muwaaddiniintu si toosan u dhaliilikaraan dawladda, ayaga oo u maraya axsaab siyaasadeed, kana caban kara aragtina ka dhiiban kara danta guud ee ummadda, haddana qaar ka mid ah dadkii ka qayb-galey daraasadda waxa ay ku faraxsanaayeen xorriyadda ay heli lahaayeen marka dimuqraaddiyad la helo. Inta ay socdaan doorashooyinku, waa suurto-gal in ay is-waafaqi waayaan rajada sidaa u badan iyo xaqiiqada dhabta ah, khilaafkaas oo khal-khal gelin kara nabadda iyo xasilloonida Puntland.

In kasta oo rajada dadku badan tahay, haddana geeddi-socodkii dimuqraaddiyadda weli lama billaabin, taas oo aan waafaqsaneyn ballan-qaadkii dawladda. Wasaaradda Dastuurka, Arrimaha Federaalka iyo Dimuqraaddiyeyntu waxa ay xoogga saartey sidii ay u degi lahayd (establishment) wasaarad ahaan, halka ay ahayd in ay dhexda u xirato fulinta tallaabooyin dib loogu bilaabayo geeddi-socodka dimuqraaddiyadda.

### 3.4.4 Wakhti Ku Filan (Sufficient time)

Dadkii la waraystay waxa ay hubeen wakhti yaraantu in ay ka mid ahayd arrimaha ugu horreeya ee dhiciska ka dhigay doorashooyinkii ugu dambeeyey ee la isku dayey in ay qabsoomaan. Sida ka muuqata natiijo ka soo baxday ra'yi ururin ay PDRC fulisay Maarso 2014, 91% dadka la wareystey waxa ay sheegeen in ay ku fiican tahay maamulka hadda talada hayaa in uu dib u billaabo hannaanka dimuqraaddiyadda lixda bilood ee ugu horreeya.

> *"Wakhtigu waa mid ku habboon dib-u bilaabidda hannaanka dimuqraaddiyadda, waa haddii hannaanku dhakhso u billowdo oo aan dib-u-dhac ku iman." - Ciid Maxamed Maxamuud (Arday Bosaso)*

Wakhti iyo diyaar-garow dheer ayaa loo baahan yahay si loo fuliyo diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha, soohdimeynta xuduudaha, barashada madaniga iyo tan cod-bixiyaha, iyo dhisidda axsaab siyaasadeed. Intaa waxa dheer, waxa loo baahan yahay in la diyaariyo shuruucda saldhigga u ah doorashooyinka, heshiisna la kala saxiixdo. Dadkii ka qayb-galey daraasadda waa ay ka hadleen arrimahan, waxa ayna u arkeen, in kasta oo ay fulintoodu adag tahay, haddana in ay udub-dhexaad u yihiin hor-u-socodsiinta dimuqraaddiyadda.

Muddadii ay socotey daraasadda, dhammaadkii 2014, ka-qayb-galeyaashu waxa ay ku war-baxsheen in maamulka hadda talada haya uu haysto wakhti ku filan in uu dib u bilaabo geeddi-socodka, isla markaana wax ka qabto arrimaha muhiimka ah, sida magacaabidda guddi doorasho, la-tacaalidda caqabadaha hortaagan geeddi-socodka dimuqraaddiyadda, iyo qeexidda dowrarka iyo mas'uuliyadaha kaga aaddan dawladda, bulshada rayidka, iyo ururrada siyaasadeed dhanka soo celinta geeddi-socodka dimuqraaddiyadda. Hase yeeshee, dib u bilaabidda geeddi-socodka dimuqraaddiyaddu waa uu ka gaabiyay sidii la filayey.

## 3.5 Meelaha Laga Xoojin Karo Dimuqraaddiyadda

Ka dib qabashadii daraasaddii labaad ee barnaamijka Tiirarka Nabadda, PDRC waxa ay qabatay Shirka Daneeyeyaasha Puntland 3-5 Febraayo 2015, si ay u soo bandhigto natiijadii ka soo baxday daraasaddii la sameeyey dhammaadkii 2014-kii. Shirka waxaa ka soo qayb-galay 150 qof oo ka kala socday hay'adaha dawladda, bulshada rayidka ah, NGO-yada maxalliga iyo kuwa caalamiga ah.

Ka qayb-galayaasha shirku waxa ay si fir-fircoon uga doodeen caqabadaha hor-taagan hannaanka dimuqraaddiyadda Puntland, waxa ayna isku raaceen caqabadaha jira iyo sida ay u kala waaweyn yihiin. Sida ay u arkeen ka-qayb-galeyaasha shirku, kuwan soo socda waa caqabdaha ugu waaweyn ee hor-istaagi kara geeddi-socodka dimuqraaddiyadda Puntland.

1. Kala qaybsanaan bulsho iyo mid siyaasadeed oo soo kala dhex-gashay beelaha Puntland
2. Wacyiga iyo fahanka dadku ka qabo dimuqraaddiyadda iyo hannaanka doorashooyinka oo hooseeya
3. Soohdimaha degmooyinka iyo gobollada Puntland oo aan qeexneyn
4. Jiritaan la'aan aqoonsiga cod-bixiyeyaasha iyo qaabab loo diiwaan-gesho
5. Haysashada hubka iyo khatar amni
6. La'aanta maxkamad dastuuri ah

Si loo yareeyo caqabadahan, waxaa loo baahan doonaa wakhti iyo waxqabad la taaban karo ka hor inta muddadu aysan ka dhammaan maamulka hadda jira sannadka 2019-ka. Si kastaba ha ahatee, cilmibaarayaasha Tiirka Dimuqraaddiyadda ee hay'adda Horumarinta Cilmi-baarista Puntland (PDRC), ayada oo baadi-goob ugu jirta fursadaha wax looga qaban karo caqabadihii lagu asteeyey Shirkii Daneeyeyaasha Puntland (PSM), waxa ay wada-tashiyo dheeraad ah la yeelatay mas'uuliyiinta dawladda iyo daneeyeyaal kale. Danta laga lahaa hawshan waxa ay ahayd in la wajaho caqabadaha lagu asteeyey shirka iyo in laga baaraan-dego siyaabaha kale ee Tiirka Dimuqraaddiyaddu u xoojin karo qorshaha u deggan dawladda iyo daneeyeyaasha kale.

Qeybta soo socota ee warbixintan waxa ay ku

saabsan tahay natiijadii ka soo baxday wadatashiyada iyo meelaha la filayo in uu wax ka qabto Tiirka Dimuqraaddiyadda iyo kooxaha kale ee iskaashigu ka dhexeeyo. Xulashada kama dambeysta ah ee meelaha laga shaqeynayo waxaa go'aamin doona "Guddiga Hoggaaminta Dimuqraaddiyadda", asaga oo la kaashanaya PDRC. Guddigu waxa uu ka koobnaan doonaa shakhsiyaad lagu og yahay in ay khibrad leeyihiin, waxna-ku-biirin karaan Shaxda isbeddelka (change matrixs), saameynna ku yeelan kara bulshada. Xulashada guddiga hagidda ee meelaha tiirku xooga saari doono (Entry Points) waxa saldhig u noqon doona kala mudnaansiintii caqabadaha ee shirka daneeyeyaasha Puntland iyo lafa-gurka PDRC (analysis), halkaa oo khibradeedu wax weyn ku biirin karto.

### 3.5.1 Dib-u-Xoojinta Midnimada Beelaha

Dhawrkii sano ee ugu dambeeyey, Puntland waxa ay wajahday isbeddello siyaasadeed iyo kuwo bulsho oo adag. Waxa habacsani gashay isku-xirnaantii bulsho, ka dib markii uu sameysmay dhaq-dhaqaaq lid ku ah dawladda oo isu taagay dhul-goosi (anti-government secessionist movement), sida maamulka la magac baxay Khatumo, iyo ayada oo ay hoos u dhacday kaalintii ay ku jireen odayaasha dhaqanka. Dhammaan arrimahan waxaa loo aanaynayaa colaadaha soo noq-noqda ee ka dhasha khayraadka, awoodda oo aan wax laga siin beelaha ku nool degaannada daafaha xiga iyo muranno siyaasadeed oo ka dhashay doorashadii 2013-kii iyo doorashadii xigtey ee loogu tartamayey xilka madaxwayne ee 2014-kii.

Marka loo eego aragtida ka qayb-galeyaasha daraasadda Tiirka Dimuqraaddiyadda, si Puntland ay u yeelato jewi lagu taabba-gelin karo dimuqraaddiyad, waa in marka hore la sameeyo dib-u-heshiisiin siyaasadeed iyo mid bulsho, oo ay ku jiraan siyaasiyiinta, odayaasha dhaqanka iyo kooxaha kaleba. Dib-u-heshiisiintaasi waxa ay yaren doontaa kala qaybsanaanta bulsho iyo tan siyaasadeed ee hadda jira, taas oo u gogolxaari doonta dimuqraaddiyadda.

Madaxwaynaha Puntland Cabdiweli Maxamed Cali Gaas waxa uu ku celceliyey, ballan adagna ku qaaday, in uu fulin doono dib-u-heshiisiin bulsho iyo mid siyaasadeed oo gaarsiisan heer Puntland, si uu u xoojiyo midnimada dadka reer Puntland, isla markaana wajaho waxyaabaha ay siyaasiyiinta iyo odayaasha dhaqanku ka cabanayaan, si uu dhidibbada ugu taago geeddi-socod dimuqraaddiyadeed oo laga wada qayb-galo. Waxa socda u diyaar garowga "Shirweynaha Wadatashiga Puntland", hormuudna u yahay Madaxwayne Cabdiweli Maxamed Cali Gaas. Shirweynahan waxa fududeynaya guddiyo farsamo oo ay dawladdu magacawday, isugana jira guddiga kormeerka, guddiga hoggaaminta iyo guddiga xoghaynta. In ka badan 250 ka-qaybgaleyaal, oo ka kala socda degaanno iyo gobollo kala duwan ee Puntland, ayaa la filayaa in ay kulan ku yeeshaan shirweynahan, ka dib 17 sano aasaaskii Puntland, si ay u yeeshaan wada tashi. Su'aalaha hoos ku qoran ayaa la filayaa in shirweynuhu ka hadlo:

- Maxaa iska beddelay ujeeddooyinkii iyo mabaadii'dii lagu dhisay Puntland 1998-ddii?
- Odayaashu weli ma leeyihiin saameyntii iyo awooddii ay lahaayeen xilligii Puntland la aasaasay?
- Haddii shirweynuhu soo saaro talooyin, maxaa dammaanad ah in talooyinkaas ay noqdaan kuwo la meel-mariyo?
- Maxay yihiin fursadaha jira in shirweynuhu talo-bixin ka sameeyo dib-u-soo celinta geeddi-socodka dimuqraaddiyadda Puntland?

### 3.5.2 Dar-dar Gelinta Barashada Madaniga iyo Cod-bixiyaha

Marka loo eego ra'yi arurin ay PDRC sameysay Maarso 2014, taas oo ay ka qeyb-galeen dad gaaraya 1,525 oo ku nool Puntland, wacyiga

dadka iyo fahankooda hannaanka doorasho oo hooseeya ayaa noqdey caqabadda labaad ee khatarta ku ah hannaanka dimuqraaddiyadda ee soo socda. Dadka Puntland intooda badan ma laha khibrad doorasho, in badanna ma fahansana xaquuqaha iyo waajibaadka asaasiga ah, gaar ahaan dadka ku nool degaannada miyiga ee durugsan, halkaas oo aysan xogtu gaarin. Si kastaba ha ahaatee, barashada madaniga iyo tan cod-bixiyeyaasha ayaa waxaa la aaminsan yahay in ay yihiin habka ugu wanaagsan ee kor loogu qaadi karo ka-qaybgalka siyaasadda iyo codeynta.

Doorashooyinkii 2013-dii, wax badan ayaa laga qabtay barista shacabka xuquuqdooda madaniga ah iyo waajibaadkooda iyo hannaanka doorashooyinka. Hase yeeshee, barashada codeeyeyaasha iyo xogsiintu waxa ay u badnaayeen magaalooyinka waaweyn. Gaarista degaannada durugsan oo liidatey iyo wada-shaqaynta iyo xiriirinta bulshada rayidka oo debacsanayd ayaa hoos u dhigay kaalintii ay ku lahaayeen kor u qaadista wacyiga dadka iyo guud ahaan hannaanka doorashooyinka.

In kasta oo ay arrintu sidaa ahayd, haddana Wasaaradda Dastuurka, Arrimaha Federaalka iyo Dimuqraaddiyadda (MoCFAD) waxa ay higsaneysaa gaarista 21 degmo oo Puntland daafaheeda ah inta lagu jiro 2015-ka, si loo hubiyo in fariimaha madaniga ahi meel walba gaaraan. Sida ay ku war bixiyeen mas'uuliyiinta wasaaradda, dadaalkooda waxa inta badan caqabad ku noqda tabar yari dhaqaale. Hase yeeshee, beesha caalamku in badan ayey daneyneysaa in ay gacan ka geysato barashada madaniga iyo tan cod-bixiyeyaasha.

PDRC waxa ay khibrad iyo aqoon u leedahay fulinta barnaamijyada barashada madaniga iyo tan cod-bixiyeyaasha, arrimahaas oo ay wax weyn ka tari karto. Tiirka dimuqraaddiyadda ee PDRC, iyo qaybta maqal-muuqaalka guur-guura ee PDRC (Mobile Audio-Visual Unit), waxa ay kaalin weyn ka qaadan doonaan waxbarashada madaniga iyo tan cod-bixiyeyaasha ka dib marka loo dhiso guddiga doorashooyinka ku meel gaarka ah (TPEC). Tiirka dimuqraaddiyaddu waxa kale oo uu doonayaa in uu dejiyo habab wanaagsan oo qaybaha ku hawlan geeddi-socodku ku yeeshaan xiriirin iyo iskaashi wanaagsan. Marka laga hadlo waxbarashada madaniga iyo tan cod-bixiyeyaasha, su'aalaha soo socda ayaa u baahan in jawaab loo helo:

1. Wacyigelintii bulshada horey loogu sameeyey, intee in le'eg baa ay kor u qaadday heerka aqoonta madaniga iyo tan cod-bixiyeyaasha?
2. Geeddi-socodka dimuqraaddiyaddu waa hawl u baahan dhaqaale badan oo Puntland ayan keligeed fulin karin. Ma jiraan ku hawlaneyaal kale oo daneynaya in ay ka qayb-qaataan fulinta hannaanka dimuqraaddiyadda, sida gaarsiinta ololaha waxbarashada madaniga iyo tan cod-bixiyeyaasha degaannada durugsan ee Puntland?
3. Muxuu yahay dowrka ay ururrada bulshada rayidku ku leeyihiin hawshan?
4. Muxuu yahay habka ugu wanaagsan ee wada-shaqayn iyo xiriirin sidii hore ka fiican u yeelan karaan ku-hawlaneyaasha hannaanka dimuqraaddiyadda?

### 3.5.3 Soohdimeynta Degmooyinka Puntland

Kororka degmooyinka iyo gobollada Puntland ee 10kii sano ee ugu dambeeyey waxa uu abuuray caqabado meelo badan taabanaya sida: amniga, maamul-baahinta iyo geeddi-socodka dimuqraaddiyadda. Wakhtiga hadda ah ee la qoray warbixintan 2015-ka, 9-ka gobol ee Puntland waxa ka jira 43 degmo, kuwaas oo intooda badan aan lahayn xuduuddo qeexan. Dhab ahaan, jiritaan la'aanta xudduudo qeexan ayaa dhibaato ku noqotay hannaankii doorashooyinka ee 2013-kii, halkaas oo 37 degmo noqon lahaayeen goobo cod-bixin, sidaa darteedna kuraas ku yeelan lahaayeen baarlamaanka.

In kasta oo Wasaaradda Arrimaha Guduhu ku hawlan tahay dhisidda guddi u hawl-gala soohdimeynta degmooyinka, haddana waxyeellada caqabadani weli waa taagan tahay. Ma badna rajada laga qabo in dhawaan la sameeyo xudduudaha degmooyinka dalka oo dhan, sababta oo ah waxa yar dhaqaalaha dawladda, waxaa iyana yar aqoonta iyo wacyiga loo baahan yahay in lagu fuliyo hawshaas ballaaran. Dawladdu qorshaheeda mustqabalka waa in ay ku dartaa qaab la isku waafaqsan yahay oo loo asteeyo goobaha cod-bixinta ee degmooyinka, si doorashooyinku uga hir-galaan heer degmo.

Marka laga hadlo xadeynta degmooyinka, su'aalahan ayaa u baahan in loo helo jawaabo:

1. Maxay yihiin caqabadaha is-hortaagi kara dib-u-bilaabidda geedi-socodka dimuqraaddiyadda, haddii aysan gobollada iyo degmooyinka Puntland lahayn xudduudo?
2. Sidee bey dawladda Puntland u koobi kartaa tirada degmooyinka ay doorashooyinku ka dhacayaan?

### 3.5.4 Aqoonsiga iyo Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha

17-kii sano ee ay jirtey Puntland, weli ma sameyn tirakoob, mana diiwaan-gelin muwaaddiniinteeda gaarey da'da cod-bixinta. Jiritaan la'aanta habab lagu aqoonsado muwaaddiniinta iyo diiwaan-gelin la'aanta cod-bixiyeyaasha ayaa inta badan ahaa arrimo dhaliyey muran sababay kala fogaansho siyaasadeed, taas oo sababtey in qaar ka mid ah ururrada siyaasadeed ee jirey 2013-kii ay ka biyo-diidaan hannaanka doorashada.

Waxa ay tuhun ka qabeen in ay dhici karto in doorashada la kala badsan karo, ayna iman karto in maamulkii markaa jirey uu faragelin ku sameyn karo natiijada doorashada. Tuhunka kale ee jirey, illaa haddana jira, waxa uu ahaa in Puntland ay martigelisay tiro aad u badan oo bara-kacayaal ah (IDPs) iyo kuwo ka soo haajirey koofurta Soomaaliya iyo Itoobiya, kuwaas oo ururrada siyaasadeed qaarkood u adeegsan karaan in ay ku badsadaan tirada codka. Marka la eego caalamka, diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha waxa la aaminsan yahay in ay lagama maarmaan u tahay ilaalinta sharciga doorashooyinka. Waxa ay fududeysaa aqoonsiga cod-bixiyaha xaqa u leh in uu codeeyo, ilaalinta in qofna uusan codeyn hal mar in ka badan.

Marka la eego qorshaha u deggan Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxa ay mar dhow billaabi doontaa diiwaan-gelinta shacabka, siinna doontaa waraaqo aqoonsi. Go'aanka ah in la qaado olole diiwaan-gelin cod-bixiye waxa ay ku xiran tahay guddiga doorashooyinka ee la dhisi doono, waa marka uu ansixiyo baarlamaanku. Waxa loo arkaa ururrada siyaasadeed ee iman doona in ay cod ku yeelan doonaan in la sameeyo diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha iyo in kale. Tiirka dimuqraaddiyaddu waxa uu gacan siin doonaa guddiga doorashooyinka, si xal loogu helo arrimaha muhiimadda ballaaran u leh doorashooyinka.

Shaki kuma jiro, diiwaan-gelin la'aanta cod-bixiyeyaashu in ay ka mid ahayd caqabadihii ugu waaweynaa ee turun-turreeyey geeddi-socodka dimuqraaddiyadda 2013-kii. Si looga hortago in uu khaladkaas mar labaad dhaco, Puntland waa in ay diiwaan-gelisaa cod-bixiyeyaasha ka hor doorasho kale inta aanay dhicin.

Marka laga hadlo diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha, su'aalaha soo socda ayaa u baahan in laga fekero:

1. Iyada oo maskaxda lagu hayo in diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaashu tahay hawl u baahan dhaqaale badan, dawladda Puntland ma awooddaa in ay fuliso (diiwaan-gelinta cod-bixiyaasha)?
2. Sidee loo hubin karaa in nidaamka diiwaan-gelintu noqdo mid la hubo oo lagu kalsoon yahay?
3. Diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha ma laga

hormarinayaa diiwaan-gelinta muwaaddiniinta (civic registration)?

### 3.5.5 Sugidda Amniga

Caalamka oo idil, guusha doorashada waxa lagu cabbiraa calaamado lagu kalsoon yahay oo ay ka mid tahay in ay nabad iyo xasillooni ku dhacday. Waxa muhiim ah in la sugo amniga muddada doorashadu socoto, si dadku uga wada qayb-galo, una oggolaado hannaanka doorashada. Kacdoonka lidka ku ah doorashada ee soo if-baxay markii ay soo dhawaadeen doorashooyinkii 2013-kii, ayaa sababay in la joojiyo doorashada. Hay'adaha amni ee Puntland waa kuwo tabar daran, halka xaaladaha amni ee jiraa yihiin kuwo si fudud isu bed-beddela. Bulshooyinka ku nool Puntland si culus ayey u hubeysan yihiin, isla markaana tabashooyinka ka soo jeeda waxqabadka dawladda oo aan dalka wada gaarin ayaa waxa ay sii liidaan amniga ka jira gobollada xiga daafaha.

Si kastaba ha ahaatee, khatarta ugu weyn waxa ay ka imaneysaa Al-shabaab iyo dadka dareensan in laga saaray siyaasadda, una nugul in la maskax-beddelo. Siyaasiyiinta iyo odayaasha aan lagu darin talada waxa dhici karta in ay carqaladeeyaan hannaanka doorashada, kana faa'ideystaan nusqaantaas si ay bulshada raacsan uga hor keenaan hannaanka.

Arrinta kale ee khatar ku keeni karta hor-u-socodka hannaanka dimuqraaddiyadda waxa ay tahay degmooyinka iyo goobaha codeyntu ka dhaceyso oo aan si wanaagsan u qeexnayn, taas oo dhalin karta isku-dhac bulsho. Waxa loo arkaa in ay aad u liidato awoodda sugidda amniga beelaha oo idil muddada doorashadu socoto.
Inta aan dib loo bilaabin geeddi-socodka dimuqraaddiyadda, dawladda Puntland waa in ay dejisaa qorshe cad oo lagu xoojinayo nabadda iyo amniga, kaas oo aan sababi doonin in dib-u-dhac dambe ku dhaco doorashada.

Marka laga hadlo amniga doorashada, su'aalaha soo socda ayaa loo baahan yahay in maskaxda lagu hayo:

- Dawladda Puntland wax ma ka qaban kartaa hubka ku jirta gacanta shacabka?
- Suurto-gal ma tahay in ay Puntland dejiso, isla markaana fuliso, qorshe amni sugid led xilliga doorashada?
- Puntland ma leedahay ciidan booliis oo ku filan amniga gobollada, degmooyinka iyo goobaha doorashooyinku ka dhacayaan?

### 3.5.6 Dhismaha Maxkamad Dstuuri ah

Dastuurka Puntland waxa uu waajibinayaa sameynta maxkamad dastuuri ah taas oo mas'uuliyadaheedu ay ka mid yihiin ilaalinta xorriyada dadka iyo xuquuqda qofka, sida ku qeexan dastuurka. Sida ay ku war-bixiyeen guddoomiye-ku-xigeennada baarlamaanka Puntland, Madaxwayne Cabdiweli Maxamed Cali Gaas waxa uu ku dhawaaqay qorshe dib-u-habeyn loogu sameynayo garsoorka, qorshahaas oo dib-u-eegid loogu sameyn doono qodobbo aan is-waafaqsaneyn oo ka mid ah dastuurka u deggan dalka. Sida ay xubnahaasi ku war-bixiyeen, dhismaha maxkamadda dastuurigu waa mid ka mid ah qorshahan dib-u-habeynta.

Sidaa oo kale, madaxda Wasaaradda Dastuurka, Arrimaha Federaalka iyo Dimuqraaddiyadda ee lala kulmay muddadii ay socotey daraasaddu waxa ay sheegeen in ay iska kaashadeen Wasaaradda Caddaaladda, dejinta shuruuc qeexaya qaabka iyo awoodaha Maxkamadda Dastuuriga ah, taas oo la soo hor-dhigi doono kal-fadhiga baarlamaanka Juun 2015-ka.

Dastuurka hadda jira si cad uma qeexayo maxkamadda qaabbilsan xallinta khilaafka ka dhasha doorashada. Waxa uu aqoonsan yahay oo keliya in Maxkamadda Sare ay tahay maxkamadda ugu sarreysa dalka, isla markaana waxa uu siinayaa awoodo ay ka mid yihiin ku dhawaaqidda

natiijada doorashada. Dal-daloolladaa dartood, madaxda dawladda qaarkeed hoos ayey u dhigaan muhiimadda maxkamadani ay u leedahay hannaanka doorasho. Si kastaba ha ahaatee, dhismaha maxkamad dastuuri ah waxa loo arkaa in ay tahay mas'uuliyad saaran dawladda, iyo weliba mid ka mid ah mabaadii'da muhiimka ah ee Tiirka Dimuqraaddiyeynta.

Su'aalaha soo socda waxa ay la xiriiraan Maxkamadda Dastuuriga:

- Sidee dhidibbada loogu taagi karaa maxkamad dastuuri ah oo waajibaadkeedu jileyaasha oo dhan wada taageersan yihiin?
- Ma la qeexi doona awoodaha maxkamadda dastuuriga dhanka murannada ka dhasha doorashada?
- Waa maxay dowrka maxkamadda dastuuriga dhanka doorashooyinka?

| **Waax** | **Tirada Ka-qaybgaleyaasha** | % |
|---|---|---|
| Ganacsatada | 12 | 9.24 |
| Xildhibaannada Dawladaha Hoose | 8 | 6.15 |
| Odayaal/Culimada Diinta | 16 | 12.3 |
| Saxaafadda | 1 | 0.8 |
| Xirfadley | 22 | 16.9 |
| Dumar | 16 | 12.3 |
| Dhallinyaro | 18 | 13.85 |
| Ururro Bulsho | 4 | 3.07 |
| Dadka la hayb sooco | 10 | 7.7 |
| Maamullada Degmooyinka | 8 | 6.15 |
| Qurbajoogta | 2 | 1.54 |
| Indheergarad/Siyaasiyiin | 13 | 10 |
| **Wadar** | **130** | **100** |

*Shaxda 4: Ka-qaybgalayaasha oo Koox-koox ah*

# 4 Tiirka Maamul-Baahinta

## 4.1 Hordhac

Nidaamka maamul-baahinta Puntland waxa uu socdey in ka badan 10 sano, waxa uuna hiigsanayaa "...dhismaha dawlad heer degaan si loo hirgeliyo maamul-wanaag iyo adeegyada aasaasiga ah oo lagu meel-mariyo qaab leh ka-wada-qaybgal, la xisaabtan, hufnaan, iyo in si habboon looga faa'ideysto kheyraadka kooban ee jira heer degmo illaa heer dawlad dhexe" (Siyaasadda Maamul-baahinta Puntland). Maamulka baahsan, in kasta oo uu curdan yahay, waxa uu beddelayaa xukunkii urursanaa (centralized rule) ee sabab u noqday in ay dunto dawladdii dhexe, illaa iyo haddana siyaasaddu caga-dhigan weydo. Ka dib Soomaaliya markii ay qaadatay xorriyadda 1960-kii, dalku waxa uu galay dimuqraaddiyad, taas oo muddo yar dabadeed uu beddelay xukun kali-talis ah oo jirey illaa dagaalladii sokeeyey 1991-dii. Sidaa darteed, Soomaalidu khibrad badan uma laha lahaanshaha la wadaago (public ownership) iyo dadku in ay ka qayb-galaan dawladnimada.

Sanadihii ugu dambeeyey, waxa lagu guuleystay dhismaha hab-dawladeed federaal ah oo ka kooban dawlado hoose oo maamulka lagu baahshey. Xukunka oo la geersiiyo heer degmo waxa ay qayb muhiim ah ka tahay maamul-baahinta - diiradda waa in la saaraa awood-siinta maamulka in uu ku jiheyn karo jileyaasha degaanka fulinta mashaariicda bulshada.

Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga, waxa ay hoggaanka u qabatay dhismaha goleyaasha degaanka iyo fulinta shuruucda iyo siyaasadaha ay ka mid yihiin Sharciga Goleyaasha Degaanka iyo siyaasadda maamul-baahinta rasmiga ah. Hase yeeshee, hawl badan baa ka dhiman awoodda dawladaha hoose ay ku gudan karaan waajibaadkooda kaga aaddan maamul-baahinta. Waxa loo baahan yahay in dawladdu kordhiso xoojinta awoodda waxqabad ee dawladaha hoose, isla markaana kor u qaaddo ka-qaybgalka dadweynaha.

Maamul-baahintu waxa ay qayb muhiim ah ka tahay nabadda iyo dawlad-dhisidda (statebuilding) ee Puntland, sababaha soo socda dartood:

- Dawladnimada ayey u soo dhaweysaa dadka, waxa ayna kor u qaaddaa ka-qaybgalka talada ee dadka. Sidaa daraadeed, waxa lagama maarmaan ah in la xaqiijiyo in dadku wax kala socdo nidaamka iyo arrimaha ka socda degaankooda, si waxqabadku u noqdo mid ka turjumaya baahida dadka.
- Maamul-baahintu waxa ay kor u qaaddaa dimuqraaddiyadda iyo in dadku ka wada qayb-galo arrimaha degaanka, waxa ayna u wanaagsan tahay horumarinta reer miyiga, maaddaama go'aannada ay gaarayaan dad xog-ogaal u ah caqabadaha hor-taagan reer

miyiga iyo qaababka wax looga qaban karo.

- Waxa ay dhalisaa horumar, ayada oo wanaajineysa fursadaha dadku u leeyahay in ay wax kaga beddelaan arrimaha muhiimadda u leh degaanka, si wax looga qabto baahida ugu muhiimsan ee bulshada.
- Bulshada oo go'aanka laga qayb-gesha waxa ay xoojin kartaa dowrka dumarka, dhallinyarada iyo kooxaha kale ee la faquuqo, kuwaas oo codkoodu ka maqan yahay siyaasadda.
- PDRC oo kaashaneysa hay'adda ay bah-wadaagta yihiin ee Interpace waxa ay tageertaa dhismaha nabadda iyo dawladnimada Puntland, ayada oo xoojineysa lahaanshaha iyo ka-qaybgalka dadweynaha ee heer degaan. Tan iyo 2008-dii, Tiirka Maamul-baahintu waxa uu ahaa qayb ka mid ah barnaamijka Tiirarka Nabadda.
- Daraasaddii la sameeyey 2010-kii ee wejiga koowaad ee Barnaamijka Tiirarka Nabadda, caqaabadaha ugu waaweyn ee hor-taagan maamul-baahinta Puntland waxa la ogaaday in ay ka mid yihiin:
- Qaabka loo xusho golaha degaanka oo ah mid aan habbooneyn, isla markaana aan dimuqraaddi ahayn;
- Ka-qaybgalka dadka oo yar;
- Awood yari hay'adeed (Institutional limitations) - muranno ka dhex dhasha dawladaha hoose, jiritaan la'aan la-xisaabtan, hufnaan la'aan dhanka maamulka dakhliga iyo tafsiilaadka dawladaha hoose oo kooban;
- Xiriirka u dhexeeya dawladaha hoose iyo dawladda dhexe oo liita.

Si loogu kuur-galo heerka maamul-baahineed ee Puntland, PDRC waxa ay sameysay daraasad lagu astaynayo caqabadaha ugu waaweyn, fursadaha iyo  meelaha u baahan in xooga la saaro mustaqbalka ayada oo lagu tageerayo bahaahinta maamulka. Bishii Maajo ilaa Juunyo 2014-kii, waxa la qabtay kulamo wada-tashi oo si qoto-dheer loogu lafa-guray caqabadaha hor-taagan baahinta maamulka, kuwaas oo ay ka qayb-galeen khubaro iyo wakiillo ka socdey dhamaan gobollada Puntland. Waxa kale oo daba-socday daraasad baahsan oo lagu maray 11 degmo oo ka mid 43-da degmo ee Puntland bilihii Sebteembar ilaa iyo Nofeembar ee sannadkii 2014-kii. Xulashada degmooyinka waxa lagu saleeyey darajooyinkooda A, B, C, iyo isu-dheelli-tir juqraafi iyo mid goboleed. Muddadii ay daraasaddu socotey, waxa la wareystay dad tiradoodu gaareyso 51 qof, iyo kulamo gaar ah oo lala yeeshay kooxo dhan 13, kana kooban 90 qof.

## 4.2 Guulihii Laga Gaaray Maamul-Baahinta

In xukunka laga soo daa-dejiyo dawladda dhexe, lana gaarsiiyo dawladaha hoose, ayada oo loo sii marayo dhismaha goleyaal degaan, waxa ay ku qeexan tahay axdigii Puntland 1998-ddii, iyo shuruucda iyo siyaasadaha kale ee ka jira dalka, sida Xeerarka u deggan Goleyaasha Degaanka iyo Siyaasadda Maamul-baahinta ee dhawaan ka hir-gashay Puntland. In kasta oo guulahaas la gaaray, marka lagu daro dhismaha goleyaal degmo, haddana weli caqabado ayaa hor-taagan hannaanka. Dhamaan degmooyinku, darajo kasta ha lahaadeen, waxa soo food-saaray caqabado isku mid ah. Waa yar tahay awoodda ay leeyihiin degmooyinka derajadoodu tahay B iyo C in ay wax ka qabtaan caqabadahan marka loo bar-bar dhigo degmooyinka ku jira darajada A. Dawladda Puntland waxa ay u idmatay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga, in ay hormuud ka noqoto nidaamka maamul-baahinta iyo dawlaha hoose ee Puntland. Mudnaanta maamul-baahinta (2014-2016) ee maamulka hadda jira, waxa ka mid ah dawladnimada, amniga, caddaaladda, kobcinta dhaqaalaha (economic foundations),

sida wanaajinta habka ururinta dakhliga iyo maareynta maaliyadda dawladda. Marka la eego qoraalka mudnaansiinta dawladda muddada u dhaxaysa (2014-2016), mudnaanta maamul-baahintu waa (...in la xoojiyo maamullada degmooyinka iyo in la baahiyo adeegyada bulsho iyada oo la dhiiri-gelinayo mabaadii'da maamul-wanaagga, dadkana awood loo siinayo in ay si joogto ah ula socdaan go'aannada heer degaan."

Marka qiimeyn lagu sameynayo horumarka maamul-baahinta Puntland, iyo qorshaha habka ugu wanaagsan ee loo dar-dar gelin karo hannaankan, waxa muhiim ah in la fahmo sababta uu weli si wanaagsan ugu hirgeli la' yahay, iyo sababta dawladaha hoose si wax-ku-ool ah loogu daa-dejin la' yahay dhamaan awoodaha maaliyadeed, kuwa maamul iyo kuwa siyaasadeedba.

Guulihii ugu waaweynaa ee laga gaarey maamul-baahinta, iyo weliba guul-darrooyinkii la xiriirey, sannadihii la soo dhaafey waa kuwan hoos ku qoran:

- Xeerka Goleyaasha Degaanka Lam. 7 waxa ansixiyey Baarlamaanka, waxana saxiixay Madaxweynaha Puntland 23 Sebteembar 2003-dii. Xeerkani waxa uu dhaqan-gelinayaa shuruucda dastuuriga ah iyo kuwa saldhigga u ah dawladaha hoose ee Puntland. Labada caqabadood ee ugu waaweyn ee soo wajahay xeerkan waa hir-gelintiisa iyo fahanka dadka iyo goleyaasha degaanku ka qabaan sharcigan oo yar. Waxa kale oo loo baahan yahay in la is-waafajiyo xeerarka lagu dhaqmo ee ku saabsan dawladaha hoose iyo baahinta adeegyada si loo buuxiyo dal-dalollada jira, waxna looga qabto caqabadaha.
- Hannaanka dhismaha goleyaasha degaanka waxa uu billawday laba sano ka dib markii Xeerka Goleyaasha Degaanka la ansixiyey. Xilligaas, Puntland waxa ay lahayd 37 degmo. Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxa ay dhistay 25 gole degaan, halka 12 degmo kalena ay lahaayen guddiyo fulineed oo keliya (executive committees). Sanadkii 2010-kii, 25-kii gole degaan ee la dhisay waxa shaqadooda ku guulaystey hal degmo oo keliya, halka 24-kii kale la kala diray ama jiritaan beeleen.
- Haatan, Puntland waxa ay leedahay 43 degmo oo 23 ka mid ah ay leeyihiin goleyaal degaan, halka 20-ka kalena ay leeyihiin guddiyo fulineed oo ay Wasaaradda Arrimaha Guduhu toos u magacawday. Guddiga fulintu waxa uu ka kooban yahay duqa magaalada, ku-xigeenka duqa iyo xog-hayaha.
- In kasta oo ayan dadku ku qanacsaneyn doorashooyinkii goleyaasha degaanka ee la joojiyey sanadkii 2013-kii, haddana waxa laga bartay sida iyo waxa loo baahan yahay marka la damco in dib loo qabto doorasho heer degaan. Dawladda cusub ee uu hogaanka u hayo Madaxweyne Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas waxa ay ballan-qaaddey in ay dar-dar gelin doonto geeddi-socodka dimuqraaddiyadda Puntland, iyo weliba qabashada doorashooyinka goleyaasha degaanka.
- Xafiiska hormuudka maamul-baahinta waxaa la aasaasey sanadkii 2013-kii, waxa uuna toos u hoos yimaadaa xafiiska madaxweyne-ku-xigeenka Puntland. Xafiiskan waxa uu xiriiriyaa hawlaha ay wadaan guddiga isku dhafka ah ee heer wasaaradeed ee dawladaha hoose (Inter-Ministerial Committee of Local Government), waxa uuna kaalin fir-fircoon ka qaataa taageerada la siinayo maamul-baahinta Puntland.
- Siyaasadda Maamul-baahinta Puntland waxa la ansixiyey 10-kii Luuliyo 2014, waxana lagu baahinayaa daneeyeyaasha ka hor inta aan la billaabin hirgelintiisa.
- Qaar ka mid ah wasaaradaha, oo taageero ka helaya mashruuca Qaramada Midoobey ee Horumarinta degmooyinka (UN Joint Programme on Local Governance - JPLG) ayaa degmooyinka darajada A iyo B si tijaabo ah u gaarsiiyey qaybo ka mid ah adeegyada aasaasiga ah, sida caafimaadka, waxbara-

shada, deegaanka iyo biyaha. Maaddaama ay hooseyso awoodda waxqabad ee dawladaha hoose, bixinta adeegyada iyo mas'uuliyadaha dawladda hoose intooda badan waxa gacanta ku haya dawladda dhexe ee Puntland, ayada oo taageero ka heleysa waaxda gaarka loo leeyahay (private sector), NGO-yada iyo beesha caalamka.

## 4.3 Caqabadaha Hor-Taagan Maamul-Baahinta Puntland

Degmooyinka Puntland intooda badan weli ma laha awood dhaqaale iyo xoog shaqaale ku filan si ay u gutaan waajibaad fara badan. Dhanka kale, dawladda Puntland weli ma laha awooddii ay ku dar-dar gelin lahayd hannaanka. Hannaanka maamul-baahinta waxa gacan ka geysta hay'adaha horumarinta, sida baarnamijka JPLG, gaar ahaan degmooyinka derajadoodu tahay A iyo B ee dawlada Puntland, taas oo xoojisa awoodda waxqabad ee degmooyinkaas. Hase yeeshee, taageerada JPLG ee ku kooban degmooyinka gaarka ah waxa ay abuurtey in uu dhasho farqi u dhexeeya degmooyinka hela tageeradaas iyo kuwa aan helin, farqigaas oo u baahan in la buuxsho si loo yareeyo waxyeelladiisa, isla markaana loo wanaajiyo adeeg-bixinta dhamaan degmooyinka Puntland.

Caqabadaha hoos ku xusan ayaa u baahan in la wajaho si dawladaha hoose ay u gutaan waajibaadkooda, taas oo qayb ka ah hannaanka geeddi-socodka maamul-baahinta.

### 4.3.1 Jiritaan La'aan Awood Hay'adeed (maamul, dhaqaale iyo xoog shaqaale)

Caqabadaha aasaasiga ah ee lagu arkay hay'adaha dawladaha hoose waxa ka mid ah jiritaan la'aan awood maamul iyo dhaqaale, dhameystir la'aan waaxaha dawladda hoose, ayaga oo aan lahayn waxyaabihii ay sharciga u lahaayeen, xafiisyo ay ku shaqeeyaan iyo agab shaqo, ama shaqaale khibrad u leh shaqada.

Waxa loo baahan yahay in dib-u-habeyn lagu sameeyo waaxyaha dawladaha hoose si hawlahoodu u noqdaan kuwo wax-ku-ool ah, in la dejiyo habraaca sharciga ah ee heer degmo, iyo in la horumariyo mas'uuliyadaha dawladaha hoose, dhan maamul iyo dhan maaliyadeedba. Taageero farsamo oo isugu jirta talooyin, tababbarro, kormeer iyo mataaneyn (apprenticeship) waxa ay kor u qaadi doontaa wax-ku-oolnimada dawladaha hoose, isla markaana xoojin doontaa awoodda dawladaha hoose ay ku gudan karaan hawlaha ay u hayaan bulshada.

*Awoodda Maamul* – Puntland waxa ay mas'uuliyadaha adeeg-bixinta, qorsheynta iyo qoondeynta dakhliga u daadejisey dawladaha hoose ee doortay duqa degmada iyo golaha degaanka. In kasta oo la daadejiyey qaybo ka mid awoodaha, haddana awoodda ay ku hanan karaan mas'uuliyadahan weli waa yar tahay heer degmo.

In kasta oo ay jiraan caqabaha hay'adeed ee kor ku xusan, haddana degmooyinka uu tageero barnaamijka JPLG waxa ay yeesheen awood ay ku hantaan mas'uuliyadaha sharciga ah ee saaran, balse waxa jira dareen ah in wasaaradaha qaarkood ee heer dawlad dhexe aysan doonayn in ay mas'uuliyadaha ku wareejiyaan degmooyinka.

> *"Waxad arkeysaa adeegyadii la rabey in maamulka degmadu bixiyo oo mararka qaarkood dawladda dhexe bixineyso. Inta badan degmooyinka, gaar ahaan kuwa taageerada ka hela JPLG, waxa shaqeynaya shuruucdii, guddiyadii golaha degaanka, qaabkii iyo qorshihii degmada dhamaan. Waxa ay ila tahay in awoodda degmadu*

*ku xiran tahay darajadeeda (category) iyo kabaayasha ay leedahay (infrastructure), laakin waxan aaminsanahay degmooyinka ku jira derajooyinka A iyo B in ay leeyihiin awood ay ku gutaan waajibaadkooda"- Cawil Maxamuud, La-Taliye, Degamada Qardho*

*Awoodda Dhaqaale* – Degmooyinka intooda badan looma qoondeyn dhaqaale ay ku daboolaan adeegyada aasaasiga ah, ama ku hantaan hawl-wadeenno khibrad leh. Dhaqaalaha loogu talo-galey in dawladda dhexe ku kabto degmooyinka ma aha mid wax-ku-ool ah, waxa uuna ka kooban yahay dhaqaale bileed loogu talo-galey horumarinta iyo amniga afarta magaalo ee waaweyn - Boosaaso, Gaalkacyo, Qardho iyo Garoowe. In kasta oo dhaqaalahaasi wax u qaban karo dawladaha hoose, haddana degmooyinka yar-yar inta badan ma helaan. Maaddaama ay yar tahay awoodda ay ku dhalin karaan dhaqaale, degmooyinkan waxa soo wajahaha caqabado adag marka ay isku dayaan in ay gutaan mas'uuliyadahooda ama marka ay ka jawaabayaan xaalado deg-deg ah. Kuma filna canshuuraha dadban iyo dakhliga ay ururiyaan, waayo dadku sida badan waa ka soo hor jeedaa bixinta canshuurta marba haddii aysan heleyn adeegyada ay filayeen. Siyaasadda maamul-baahinta ee dhawaan ka hir-gashay Puntland waxa ay qeexeysaa "Baahinta dhaqaaluhu waxa uu saldhig u noqonayaa qoondeynta dhaqaalaha la siiyo dawladaha hoose, waxa uuna ku saabsan yahay xiriirka maaliyadeed ee u dhexeeya dawladda dhexe iyo dawladaha hoose." – Siyaasadda Maamul-baahinta, baalka 23.

Waxa cad in xiriirka maaliyadeed ee u dhexeeya dawladda dhexe iyo dawladaha heer degmo uu u baahan yahay in la hormariyo iyo dawladaha hoose in ay hormariyaan isku-tashigooda iyo awooddooda dakhli ururin. Arrintaas waxa ay keeni kartaa in dadku aqoonsado dawladaha hoose, sidaa darteedna oggolaado in uu canshuurta baxsho.

*Awoodda Shaqaale (Human Resource Capacity)* – Qodabbada 19aad ilaa iyo 27aad ee Xeerka Goleyaasha Degaanka iyo qodobbada 125aad illaa 127aad ee dastuurka Puntland ayaa qeexaya dowrarka iyo waajibaadka dawladaha hoose iyo goleyaasha degaanka. Maaddaama ay guud ahaan yar tahay fahanka dadku ka qabo shuruucda saldhigga u ah doorashada goleyaasha degaanka, hannaanka waxa inta badan saameyn ku yeesha awood qaybsiga ku dhisan qabiilka, kaas oo ka hor-imanaya habka xulashada ee uu qeexayo xeerka goleyaasha degaanka. Xubnaha goleyaasha degaanka iyo shaqaalaha dawladaha hoose waxa ay u baahan yihiin in kor loo qaado aqoontooda si ay u gutaan waajibaadkooda iyo mas'uuliyadahooda si waafaqsan sharciga.

Caqabadda kale waxa ay tahay odayaasha dhaqanka ee wakiilka ka ah beelaha oo aan xubnaha ku xulin aqoon iyo waayo-aragnimo ay u leeyihiin dawladaha hoose, balse ku xusha sida ay qabiilka ugu xiran yihiin iyo xiriir qofeed (personal connections). Sidaa darteed, waxa suurto-gal ah in goleyaasha degaanka ay ku jiraan xubno heer jamacadeed ah, xubno dhammeystay waxbarashada dugsiga hoose oo keliya, iyo xubno aan waxba qori karin. Waxa adag in iskaashi wada-shaqeyn dhex-maro xubno sidaa u kala duwan dhan aqoon iyo mid khibrad-ba.

*"Marka aan shaqaaleyno dad leh tayo iyo aqoon, waxan fili karnaa shaqo wanaagsan, balse hadda fiiri shaqaalaheena" Axmed Deeq, Suxufi, Dhahar.*

Dawladaha hoose oo aan heli karin shaqaale leh aqoon waa mid ka mid caqabadaha ugu waaweyn ee hor-taagan in ay maamul-baahin wax-ku-ool ahi ka fusho Puntland. Tababbarro lagu xoojinayo awoodda wax qabad ee goleyaasha degaanka ee jira iyo tababbarro la siiyo goleyaasha degaanka cusub, iyo tababbarrada xildhibaannada oo la joogteeyo, waxa ay muhiimad ballaaran u leeyihiin tabba-gelinta siyaasadda maamul-baahinta Puntland.

*"Caqabadda jirta waa iyada oo golaha degaanku uusan awood u lahayn in uu qaato go'aan. Tusaale ahaan, aniga haddii goluhu ii garowsado in aan shaqada u qalmin ama aan degmada hoggaamin karin, waa in goluhu awood u leeyahay in uu i beddeli karo, asaga oo aan waxba ka cabsaneyn" Yacquub Maxamed, Guddoomiye K/Xigeen, Gaalkacyo.*

### 4.3.2 Ka-qaybgalka Dadka oo Liita (Low citizen participation)

*"Anaga duqeyda degmooyinka, waa in aan mas'uuliyadaha qaybtood la wadaagnaa xubnaha kale ee maamulka, sida xog-hayaha, waaxyaha kale ee golaha degaanka, guddiyada xaafadaha iyo wixii la mid ah, lakiin haddii aan u shaqeyno sida dawladda dhexe oo kale, suurto-gal noqon meyso in Puntland gaarto maamul-wanaag. Qorshaha u deggan golaha degaanka ee magaalada Gaalkacyo dhanka ka-qaybgalka dadka waa iyada oo dadku qeexo hawsha la qabanayo, maamulkuna hirgesho" - Yacquub Maxamed, Ku-Xigeenka Duqa Magaalada Gaalkacyo*

Awoodsiinta iyo lahaanshaha dadweynuhu waxa ay fure u yihiin maamul-baahinta iyo dawladaha hoose. Maamulka oo la baahsho waxa ay keentaa isu-dhawaanshaha dawladda iyo dadka, iyada oo awoodaha loo daa-dejinayo dawladaha hoose, taas oo keeni karta in ay xal u helaan caqabadaha soo wajaha dadweynaha. Marka la eego gobollada iyo degmooyinka Puntland intooda badan ee daraasaddan laga sameeyey, bulshadu cod badan kuma laha go'aannada dawladdu ku dhaqaaqdo, taas oo hoos u dhigta wax-ku-oolnimada iyo sharciyadda dawladaha hoose. Waxa lagama maarmaan ah in dadka laga qayb-gesho talada, si loo xoojiyo dawladaha hoose. Arrintan waxa ay dhalin kartaa hay'ado dimuqraaddi ah iyo horumar.

Si loo cabbiro ka-qaybgalka muwaadinka, daraasaddu waxa ay ka-qayb-galeyaasha su'aashay "Ma ka qayb-gashaa go'aannada golaha degaanka ee degmadaada? Sidee? Haddi ay "Maya" tahay, waa maxay sababta?" Inta badan dadku waxa ay ku jawaabeen in ka-qaybgalku yahay qaab dadban (informal ways) - tusaale ahaan marka ay jiraan xaalado deg-deg ah, dadka saameynta leh, sida odayaasha, ganacsatada, iyo guddiyada xaafadaha, ayaa ka qayb-gala kulamada. In kasta oo ka-qaybgal dadweyne oo buuxa uusan jirin, haddana degmooyinka leh goleyaasha degaanku waxa ay ku guuleysteen in ay magaalooyinka u qaybiyaan xaafado, guddiyo xafaadeedna ka dhisaan magaalooyinka iyo miyiga.

Xiriir dhex mara bulshada rayidka iyo dawladaha hoose waxa uu fure muhiim ah u yahay cadaadinta dawladda in ay gacan siiso hannaanka maamul-baahinta. Ururrada bulshada rayidka ahi waxa ay dowr muhiim ah ka qaataan bulshada dhexdeeda, waxa ayna ka qayb-qaataan horumarka ka socda Puntland. Balse weli dawladaha hoose iyo bulshada rayidku si wanaagsan isuma fahansana marka laga hadlo dowrarka, mas'uuliyadaha iyo qaababka ay isu kaabi karaan.

*"Si ay u hir-gasho maamul baahintu, waxa loo baahan yahay in dadka la wacyi-gasho oo la fahansiiyo waxa maamul yahay. Waxa kale oo loo baahan yahay in mas'uuliyiinta degaanka la siiyo agabka ay u baahan yihiin si ay u hawl-galaan. Haddii la dhiso dawlad aan lahayn boliis, agab, ayna yar tahay awooddeeda waxqabad, ayna jirin maxkamad iyo ciidan asluub wax ka qabta dembiileyaasha, dawladda dhexena aysan gacan siin, u maleyn maayo in ay dhalan karto dawladnimo. Waa dariiqa keliya ee loo mari karo maamul-baahin" - Xasan Faarax, Duqa Degmada Galdogob*

Ayada oo diiradda la saarayo sida loo waanaajin karo ka qayb-galka talada ee dadka, daraasaddu

waxa ay ogaatay arrimaha soo socda:

1. Xulidda ku dhisan habka qabiilka ee xildhibaanada golaha degaanku waxa uu hoos u dhigaa ka-qaybgalka dadweynaha iyo is-la-xisaabtanka

   *"Qof xafiis dawladeed lagu keenay qaab qabiil ma sameyn karo caddaalad sababta oo ah waxa uu daacad u yahay qabiilkii uu meesha ku yimid" - Xaawo Yuusuf, U-heellane Xuquuqda Dumarka, Gaalkacyo*

2. Koobnaan goobaha caamka ah ee dadweynuhu wadaagaan ayaa hoos u dhigtay ka qayb-galka dadka talada. Goobahaas waxa ay muhiim u yihiin dhiiri-gelinta wada-shaqeynta dadweynaha iyo goleyaasha degaanka iyo xoojinta in dadku cod ku yeesho talada. Mabda'a ka-qaybgalka dadweynaha ee dawladaha hoose waxa tilmaamaya Siyaasadda maamul-baahinta Puntland: "in la hubiyo in goleyaasha xaafaduhu ka qayb-galaan mudnaan-siinta iyo qorsheynta horumarinta degaankooda, isla markaana loo gudbiyo golaha (degaanka) si uu ugu daro qorshaha degmada, dejiyana qorsheyaal, uguna gudbiyo bushada fagaare loo dhan yahay."

3. Siyaasadda ku dhisan qabiilku waxa ay sababtaa in raggu dumarka kaga bato siyaasadda. In kasta oo ay kor u kacday tirada dhallinyarada ee dawladaha hoose, haddana haweenka iyo dadka la hayb-sooco si wanaagsan ugama muuqdaan siyaasadda dalka. Dumarka, dhallinyarada iyo beelaha la hayb-sooco ee Soomaaliya guud ahaan ma laha fursado ku filan oo ay uga qayb-geli karaan hay'adaha qaranka. Ka qayb-galkooda siyaasadeed waxa hor-taagan caqabado dhaqan iyo kuwo hay'adeed, kuwaas oo hoos u dhiga fursadaha ay kaga qayb-geli karaan siyaasadda heer degaan, heer dawladeed iyo mid qaran ee Puntland. Wax ka qabashada dheelli-tir la'aantaas waxa ay laga maarmaan u tahay dawladnimada heer degmo

   *"Illaa laga helayo doorashooyin dimuqraaddi ah, haweenka iyo dadka la hayb-soocaba ma heli karaan xuquuqdooda siyaasadeed". – Xaawo Yuusuf, U-heellane Xuquuqda Dumarka, Gaalkacyo.*

4. Dawladdii dhexe ee Soomaaliya iyo dagaalladii sokeeye ee ka dambeeyey dartood, waxa jirta in dadku fahan darro ka qabo mabaa'diida dimuqraaddiyadda and maamul-baahinta. Haddaba, dadweynuhu waxa uu u baahan yahay olole ballaaran oo sare loogu qaadayo wacyigelinta aqoonta madaniga ah.

   *"Intii la billaabi lahaa nidaam cusub oo siyaasadeed, dadku waa in uu helo olole wacyi-gelin ballaaran. Waxaan maqalnay in siyaasadda maamul-baahinta la ansixiyey, balse waxa noo muuqata in uu maqan yahay fahanka dadka" - Maxamed Mahad, Madaxa Jaamacadda Bosaso*

### 4.3.3 Dhaqaale Yari (Limited Financial Resources)

*"Labo qaawani isma qaado"*

Marka laga reebo guddoomidda qoondeynta dhaqaale ee dawladda dhexe (dhaqaalaha lagu kabo), dawladaha hoose waxa loo idmaday in ay aruuriyaan dakhliga degmooyinka ka soo gala ilaha dhaqaalaha, sida canshuurta (canshuurta hantida ma-guurtada ah, macaashka, canshuurta dakhliga qofka, iwm) iyo dakhliyada kale sida tabarruca dadweynaha, tabarruca jaaliyadaha dibedda iyo tageerada caalamka.

Ujeeddada maamul-baahinta waa in fulinta hawlaha iyo dhaqaalaha lagu wareejiyo dawladaha hoose. Hase yeeshee, marka la eego Puntland, waxa yar dakhliga soo gala, kuna kooban oo keliya dekedda Boosaaso iyo garoonka Gaalkacyo, kuwaas oo aan dabooli karin kharashka aasaasiga ah ee maamulka. Marka la eego dawladaha hoose, weli waxa hor-taagan caqabado

la xiriira dakhli dhalin. Sidaa darteed, waxa loo baahan yahay dib-u-habeyn miisaaniyadeed, si kor loogu qaado awoodda dakhli dhalin heer degaan iyo heer dawlad dhexe.

Maamulka hadda talada haya waxa uu xoogga saaray dakhliga iyo wax ka beddelidda maamulka dhaqaalaha dawladda, sida ku qoran mudnaanaha 2014-2016:

> *"Puntland waxa muhiimad weyn u leh awoodda lagu dhalin karo laguna maareyn karo dakhliga, isla markaana lagu bixin karo adeeg. Sidaa darteed, dawladdu waxa ay hormuud u noqoneysaa dejinta qorshe si caddaalad ah lagu bixinayo adeegyada, laguna maareynayo dakhliga, sida dhaqan-gelinta qaab dhaqaalaha lagu maareeyo si hufan" (Mudnaanta Puntland, 2014 – 2016).*

Dawladda waxa ka go'an asteynta caqabadaha hor-taagan dawladaha hoose dhanka dakhli ururinta. Daraasaddu waxa ay dadka su'aaleysay sida canshuur ururinta kor loogu qaadi karo dhaqaalaha dawladaha hoose. Meelaha hoos ku qoran ayaa la caddeeyey in lagu wanaajin karo dakhli dhalinta:

### 4.3.4 Ka Faa'ideysiga Kheyraadka Dabiiciga

"Waxaan nahay dad sabool ah oo ku nool dal qani ah, waxaan u baahan nahay dhaqaale iyo dad aqoon leh oo gacan naga siiya sidii aan uga faa'ideysan lahayn kheyraadkeena dabiiciga ah." – Madaxweyne Cabdiweli Gaas

Degmooyinka Puntland intooda badan waxa ay hodan ku yihiin kheyraadka dabiiciga ah. Noloshu inta badan waxa ay ku tiirsan tahay xoolo-dhaqashada iyo kalluumeysiga. Dhaqaale badan ayaa laga soo saari karaa kalluumeysiga, hase yeeshee wakhtiga hadda ah ma badna, sababta oo ah waxa yar tabarta degmooyinka ku yaal xeebta Puntland. Degmada Boosaaso oo keliya ayaa leh deked ganacsi, taas oo ah isha ugu weyn ee dhaqaaluhu ka soo galo Puntland. Horumarinta waaxda kalluumeysiga Puntland waxa ay in badan kor u qaadi kartaa dakhliga soo xerooda. In kasta oo burcad-badeeddii ku yaraatey Puntland, sida horeyba loo xusay, kalluumeysiga sharci darrada ah ayaa caqabad weyn ku ah Puntland.

> *"Baryo ma timaaddeen, calaacalahana ma dhiganeen haddaan khayraadkeenna ka faa'iidaysano. Xeebihii waa la cidleeyey, dadkii waxa ay soo raaceen xoogaaga nolosha ah oo laamiga yaal. Xoolaheenna nool iyo baddeena haddaan intifaacsano, adduunka kale asagaa wax noo soo doonan lahaa. Laakiin hadda, adduunkii waa nagu daalay, anagana gacmihii wey na daaleen". Yaasiin Cabdisamed, Oday Daqmeed, Galkacyo*

Daraasaddu waxa kale oo ay daah-furtay kheyraadka kale ee dabiiciga ah ee Puntland leedahay, xoolaha nool iyo beeraha, in horumarkoodu yar yahay. Haddii la sameeyo dadaallo kor loogu qaadayo ka faa'ideysiga kheyraadkaas, waxa ay muhiimad weyn u noqon lahayd abuurista dakhli ee Puntland, ha ahaato dawlad dhexe ama mid hoose.

### 4.3.5 Awoodda Dakhli Dhalin (Revenue generation capacities)

Dakhli ururintu waxa ay u baahan tahay shaqaale iyo kaabayaal dhaqaale. Xilligan, inta badan dawladaha hoose ee Puntland waxa haysta caqabado ay ka mid tahay tabar yari maamul, awoodna uma laha in ay ururiyaan dakhli. Caqabadaha hay'adeed ka sokow, tuhun aamin-darro ayaa ku kala dhex jira dadweynaha iyo dawladaha hoose.

> *"Dakhliga waxaa lugu ururiyaa awoodda dawladda…waxana caqabad noqon karta haddii canshuur-bixiyeyaasha aan loo soo*

*bandhigin miisaniyadda dawladda hoose. Waxa muhiim ah in dakhliga lagu dabbaqo la-xisaabtan iyo hufnaan, balse waa in ay jirtaa awood dawladeed oo wax ka qaban karta qofkii diida canshuurta" – Xasan Faarax, Duqa Degmada Galdogob*

Inta badan degmooyinka, goleyaasha degaanku ma laha agabkii iyo aqoontii ay ku fulin lahaayeen waajibaadkooda - waxa ayna dhibbaneyaal u yihiin kalsooni darrada dadka, taas oo sababta in dadku canshuurta bixin waayo, siina kala fogeysa dawladda hoose iyo shacabka hoos yimaada. Waxa jira hab lagu xoojin karo awoodda dawladaha hoose ay ku qaadi karaan canshuurta, kuna bixin karaan adeegga, laguna hagaajin karo xiriirka u dhexeeya dawladaha hoose iyo dadweynaha

*"Canshuurtu waa wax qofka jeebkiisa ku jira, waxa ay u baahan tahay caqli, siyaasad iyo xoog. Ganaaxa qofka diida canshuurta, qofka qashinka ku shuba waddada, iyo canshuuraha kale waxa ay noqon karaan ilo dakhli badan. Si dakhli loo dhaliyo, waxa loo baahan yahay awood, ee dadka oo timaha loo salaaxo lacag looga qaadi maayo; dadku waa in ay sharciga ka cabsadaan." Maxamed Siciid Ciise, Duqa Magaalada Gardo.*

### 4.3.6 Hufnaan iyo La-xisaabtan (Transparency and accountability)

La-xisaabtan la'aanta dawladaha hoose waa mid ka mid ah arrimaha saameynta ku yeeshay in dadku bixin waayo canshuurta. Daraasaddu waxa ay dadka su'aashay, "Sidee baan u wanaajin karnaa la-xisaabtanka dadka ee goleyaasha degaanka?" Dadka intooda badan waxa ay tilmaameen in xalku yahay dadka oo xogta la siiyo, taas oo wanaajin karta xiriirka u dhexeeya goleyaasha degaanka iyo dadka, xoojineysana kalsoonida iyo la-xisaabtanka dawladaha hoose. Waxa loo baahan yahay in kor loo qaado fahanka dadku ka qabo xuquuqdooda iyo waajibaadkooda, iyo weliba mas'uuliyadaha dawladaha hoose ka saaran bulshada.

Hufnaan miisaaniyadda dawladaha hoose waxa ay wanaajineysaa aaminidda (trust), waxa ayna astaan u tahay habboonida ay dawladda hoose u maamuleyso dakhliga iyo dhaqaalaha, waxa ayna kor u qaadeysaa fursadaha dadku kaga qayb-geli karo talada heer degaan.

### 4.3.7 Bixinta Adeegga (Public Service Delivery)

Marka dadku bixiyaan canshuuraha iyo khidmadaha kale, waxa ay filayaan dawladdu in ay siiso adeeg. Muwaadinka canshuurta baxsha waxa uu filayaa adeeg u dhigma canshuurta uu bixiyey, sida nadaafadda waddooyinka, taageero abuuris ganacsi, daryeel caafimaad, waxbarasho iyo biyo nadiif ah. Adeegyadaas intooda badan hadda waxa baxsha hay'adaha gaarka loo leeyahay (private sector), ama ururrada aan dawliga ahayn ee Puntland. Sidaa daraadeed, dadku kuma qanacsana in ay canshuur baxshaan. Adeegyada waaweyn ee dawladdu gacanta ku hayso waxa ka mid ah nadaafadda, amniga iyo maareynta dhulka ee degmooyinka qaarkood. Dad badan ayaa ku war-bixiyey, haddii dawladahooda hoose ay bixin lahaayeen adeegyo badan, in ay canshuur bixintoodu kordhi lahayd.
"Dawladdu waa in ay marka hore qaaddo tallaabo ay dadka ku hanuunineyso, isla markaana u soo bandhigto waxqabadkeeda. Waa in ay booqato dugsiyada; in ay waxbarasho siiso dadka saboolka ah, in ay waddooyinka dhisto, markaa ka dib, shacabka waxa ka imanaya yididdiilo ah in ay dhaqaalihii bixiyaan, dawladuna taa way ku xukumi kartaa waana lugu raaci karaa meel walba oo la joogo-ba. Taasi waxa ay kor u qaadi kartaa horumarka bulshada iyo la shaqeynta dawladda" Xaawo Yuusuf, U-heelanne Xuquuqda Haweenka, Galkacyo

### 4.3.8 Kororka Tirada Degmooyinka: Natiijada Ka Dhalatay

Markii Puntland la aasaasay, waxa ay lahayd 21 degmo iyo shan gobol. Wakhtiga hadda ah, tirada degmooyinku waa 43, gobolladuna waa 9. Kororkan ku dhacay degmooyinka waxa uu saameyn weyn ku yeeshay bulshooyinka, horumarka degmada, iyo dhaqaalaha.

> *"Meeshan waxa loo aqoonsadey gobol, ayada oo xitaa degmo noqon. Meeshu ma laha xabsi lagu xiro dembiileyaasha, Puntland-se waxa ay u aqoonsatey degmo. Haddana waxa la leeyahay gole degaan dhista oo duq magaalo doorta...maxaan sameyn karnaa?"*
> *- Yaasiin Jaamac, Ganacsade, Dhahar*

Soohdimaha degmooyinka cusub ee Puntland si wanaagsan looma qeexin. Degmooyinka cusub intooda badan waxa lagu dhisay wax-qaybsi qabiil, dawladduna waa hir-gelisay si ay taageero uga hesho beelaha kala duwan. Loollanka ka dhashay baaxadda dhulka ay degmooyinku ku fadhiyaan (jurisdiction) waxa uu sababay in khilaaf ka dhex oogmo degmooyin deris ah. Illaa iyo hadda, dawladdu awood uma helin in ay wax ka qabato arrintan, in kasta oo ay isku dayday in ay xadeyso tirada degmooyinka iyada oo dejisey shuruudo saldhig u ah degaanka loo aqoonsan karo degmo.

> "Doorashooyinka dimuqraaddiga ah ee la filayo in ay ka dhacaan Puntland dartood, beeluhu waxa ay loollan ugu jiraan in ay sameystaan degaanno u gaar ah. Haddii ayan sidaa yeelin, waxa ay aamminsan yihiin in aysan ka muuqan doonin siyaasadda" – Bile Qabowsade, Siyaasi, Bosaso

Inta ay dhiirri-gelin lahaayeen kororka degaannada lagu dhisay habka qabiilka, dawladda Puntland iyo daneeyeyaasha kale waxa habboon in ay diiradda saaraan sidii loo horumarin lahaa degmooyinka jira, si loo taageero hannaanka dimuqraaddiyadda heer degaan.

Daraasaddu waxa ay daah-furtey in ay muhiim tahay in dawladdu dejiso shuruudo cad oo saldhig u noqda sameynta degmo, isla markaana in degmooyinka la kala saaro ayada oo loo eegayo xaaladahooda siyaasadeed, bulsho iyo dhaqaale. Tusaale ahaan, degmada Iskushuban ee ka tirsan gobolka Bari waxa ay ka mid ahayd degmooyinka ugu waaweyn ee Soomaaliya. Wakhtiga hadda ah, Iskushuban waxa ay u qaybsantay shan degmo (Baargaal, Gumbax, Ufeyn, Carmo, Rako iyo Iskushuban). Degmooyinkan midkoodna ma laha soohdin qeexan, taas oo caqabad ku noqotey shaqada maamulladooda, isla markaana kor u qaadday khatarta ah in beelaha deriska ahi colaad ku dhex-mari karto arrinta xuduudaha degmooyinka.

### 4.3.9 Xiriirka u Dhexeeya Dawladda Dhexe iyo Dawladaha Hoose

In kasta oo dawladda hadda jirta ay billawday in ay booqato degaannada durugsan, haddana dad badan oo ku nool degaannada daafaha ayaa dhaliilsan dawladda dhexe in aysan taageero siin dawladaha hoose ee gobollada xiga daafaha. Guud ahaan, fahanka dadka ee dowrka dawladda dhexe iyo dawladaha hoose waa uu hooseeyaa. Sidaa oo kale, awoodda goleyaasha degaanka ay wakiil uga noqon karaan, kuna dhisi karaan, bulshada waa uu hooseeyaa. Taageerada ay dawladda dhexe siiso degmooyinka waxa uu lagama maarmaan u yahay si loo qeexo dowrka dawladda dhexe iyo kan dawladda hoose, iyo si dawladaha hoose awood loogu siiyo gudashada waajibaadkooda.

Tusaale ahaan, waxa looga baahan yahay Wasaaradda Arrimaha Guduhu in ay gacan ka geysato qorsheynta iyo qoondeynta miisaaniyadda degmadda, dejinta iyo fulinta shuruucda dawladda hoose iyo guud ahaan horumarka degmadda. Waxa kale oo laga filayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha jiheyn, taageerid iyo bixin

tababbarro kor loogu soo qaadayo aqoonta hawl-wadeennada dawladaha hoose. Hase yeeshee, dawladda dhexe ma laha awood ku filan oo ay ku bixiso dhamaan taageerada looga baahan yahay. Tusaale ahaan, muddadii ay socotay daraasaddu, PDRC waxa ay la kulantay gole degaan la dhisay afar bilood ka hor daraasadda, golahaas oo aan weli helin xog muhiim ah sida Sharciga Dawladaha Hoose iyo Siyaasadda Maamul-baahinta Puntland.

> *"Maxay intey noo dhiseen, haddana nooga tageen? Goleyaashu waxa ay Wasaaradda Arrimaha Gudaha ka filayeen dhaqaalihii dawladda dhexe ku kabi lahayd, tababbarro, aqoon-is-weydaarsiyo sare loogu qaadayo awooddooda, iwm" - Xasan Faraax, Xildhiban Gole degaan Badhan*

Dadaalada aan isku duba-dhacsaneyn ee loogu jiro maamul-baahinta ayaa noqday caqabad weyn oo saameyn ku leh xiriirka u dhexeeya dawladda dhexe iyo dawladaha hoose. Waa in si wanaagsan la isugu duba-ridaa (coordination) dadaalada ay wadaan daneeyeyaasha kala duwan oo ay ka mid yihiin dawladda dhexe, hay'adaha caalamiga iyo kuwa aan dawliga ahayn si maamul-baahintu u noqoto mid waarta, isla markaana wax-ku-ool ah.
Maamullada degmooyinku wax badan kalama socdaan shirarka ka dhaca Puntland ee looga hadlayo hawlaha gar-gaarka. Sida laga soo xigtey daneeyeyaasha, hay'adaha caalamiga iyo kuwa maxaligu waxa ay kala kaashadaan wasaaradaha ku shaqada leh oo keliya. Degmooyinka in lala tashado waa ay yar tahay, in kasta oo ay yihiin cidda og baahida dhabta ah ee degmooyinkooda iyo tuulooyinka. Ka qayb-galeyaasha daraasaddu waxa ay ku taliyeen isku-xirka in laga bilaabo dawladda hoose, maamulka gobollada illaa heer dawladda dhexe.

Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxa ay mas'uul ka tahay is-waafajinta hannaanka maamul-baahinta iyo dhaqan-gelinta siyaasadda maamul-baahinta heer degmo illaa heer qaran, ayada oo la kaashaneysa Madaxweyne-Ku-Xigeenka (oo hormuud u ah maamul-baahinta). Si kastaba ha ahaatee, isku-xirnaanta debacsan ee labadan qaybood ayaa sabab u noqday dib-u-dhac ku yimaada fulinta mashaariicda, dadaallo aan mideysnayn, dhaqaalaha oo aan si siman loo qoondayn, iyo in la waayo qorshe fog oo fulineed (strategy) iyo lahaansho dadweyne (ownership).

## 4.4 Fursadaha Hannaanka Maamul-baahinta Puntland

Muddadii ay socotey daraasadda wejigii labaad ee Tiirarka Nabadda, waxa muuqatey in horumar la sameeyey. Ka-qayb-galeyaashu waxa ay tilmaameen in ay jiraan fursado aasaas wanaagsan u noqon kara in horey loogu dhaqaaqo taabba-gelinta maamul-baahinta:

*Fahanka Dadka oo Kor u Kacay:* Fahanka dadku ka qabo maamul-baahinta kor ayey u kacday intii ka dambeysay dhismihii Puntland 1998. Wejigii koowaad ee daraasadda, xulashada ku dhisan qabiilka ee golaha degaanka ayaa ka mid ahayd caqabadaha ugu waaweyn ee markaa jirey. Hase yeeshee, daraasadda wejigeedii ugu dambeeyey, arrintaa isbeddel weyn ayaa ka muuqday, gaar ahaan marka laga hadlo lahaanshaha dadka ee hannaanka (ownership of the process). Hase yeeshee, ka qayb-galeyaashu weli waxa ay ka cabanayeen qoondeynta yar ee dhaqaalaha iyo bixinta adeegga.

*Dadaalka Dheeraadka ah ee Dawladdu ku Dar-dar gelineyso Dimuqraaddiyeynta iyo Maamul-baahinta:* Maamulka hadda jira waxa uu ballan-qaaday in uu dib-u-habayn ka samaynayo, dar-dar gelinayana hannaanka maamul-baahinta. Ballan-qa-

adkan waxa caddeyn u ah magacaabidda Madaxweyne-Ku-Xigeenka in uu hormuud u noqdo maamul-baahinta. Horumarinta dimuqraaddiyadda iyo maamul-baahintu waxa ay muhiimad ballaaran u leedahay helitaanka dawlado hoose oo lagu soo doortay hab dimuqraaddi ah.

*Meel-marinta Siyaasadda iyo Shuruucda:* Marka laga soo tago meel marinta Xeerarka iyo Siyaasadaha muhiimka u ah maamul-baahinta sida Xeerka Goleyaasha Degaanka iyo Siyaasadda maamul-baahinta Puntland, waxa jirta baahi tilmaameysa in xoogga la saaro hirgelin iyo is-waafajin. Qayb ka mid ah hirgelinta ayaa ah in sare loo qaado wacyiga daneeyeyaasha, gaar ahaan si dadka looga faa'ideeyo hirgelinta baahinta xukunka.

*Koror Aqoonta Dadka:* Waxa kor u kacay tirada shaqaalaha aqoonta leh ee ka hawl-gala dawladaha hoose, waayo waxa batay ardada ka soo qalin jebisa jaamacadaha, ayada oo qayb ka mid ah barnaamijka jaamacaduhu yahay waxbarashada madaniga (civic education). Dadaalladan waxa la gaarsiin karaa dalka oo idil ayada oo la adeegsanayo saxaafadda.

> *"Xusuuso wakhti dadka wax akhriyaa ama wax qoraa ay aad u yaraayeen, maanta waxaa la helayaa kumanaan dhallinyaro ah oo aqoon kala timid caalamka. Waa in aan dalka uga faa'ideynaa xooggaas raasumaalka ah. Waa rajada ugu weyn ee aan leenahay." – Bile Qabowsade, Siyaasi, Boosaaso*

*Aasaaska Ururka Dawladaha Hoose ee Puntland (ALGAPL)* – ALGAPL waxa la dhisay 2012, waxana dib-u-cusbooneysiin lagu sameeyey 2013. ALGAPL waxa uu u suurto-geshaa in dawladaha hoose ay falgal yeesheen, isku-xir ka yeeshaan hawlahooda, isla markaana yeeshaan hal cod. In kasta oo xubnaha ALGAPL ka kooban yihiin degmooyinka uu ka hawl-galo mashruuca JPLG oo keliya, haddana waxa la filayaa in xubinnimadu ku baahdo degmooyinka kale.

## 4.5 Meelaha Laga Xoojin Karo Dimuqraaddiyadda

4 Febraayo 2015, Tiirka Maamul-baahinta ee PDRC daraasaddii uu sameeyey waxa uu soo hor-dhigay shirweynihii labaad ee Daneeyeyaasha Puntland, si looga doodo, loo ansixiyo, loona kala mudnaan siiyo natiijada ka soo baxday daraasadda. Caqabadaha hoos ku qoran ayey ka-qayb-galeyaashii shirweynuhu u aqoonsadeen in ay yihiin kuwa ugu mudan ama ugu horreeya ee hor-taagan taabba-gelinta hannaanka maamul-baahinta Puntland:

- Awoodda Hay'adaha Dawladaha hoose oo liidata (Maamul, dhaqaale iyo hawl-wadeen)
- Ka qayb qaadashada dadweynaha oo hooseysa
- Dhaqaale yaraan
- Kororka Degmooyinka iyo jiritaan la'aan soohdimo
- Xiriirka Dawladaha hoose iyo dawladda dhexe oo dabacsan

Shirweynihii Daneeyeyaasha Puntland ka dib, PDRC waxa ay la-tashiyo la sameysey hay'daha dawladda ee ka shaqeeya maamul-baahinta, si mudnaan loogu sameeyo caqabadahan. Danta laga lahaa hawshan waxa ay ahayd in gacan dheeraad ah la siiyo hannaanka maamul-baahinta Puntland. Natiijadii ka soo baxday waa tan hoos ku taal, waxa ayna ka soo jeeddaa nuxurkii lagu asteeyey daraasadda.

### 4.5.1 Xoojinta Awoodda Waxqabad ee Dawladaha Hoose

Marka laga soo tago cagabaha dhinacyada

badan ee haysta dawladaha hoose ee Puntland, waxa socda dadaallo badan oo lagu xoojinayo awoodda dawladaha hoose ay ku gudan karaan waajibaadkooda. Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxa ay waddaa dadaal ay ku xoojineyso dawladaha hoose (iyo weliba shaqaalaha dawladaha hoose). Waxa hadda socda qorshe maamul-baahin dhaqaale iyo mid siyaasadda dhaqaalaha ee dawladaha hoose (municipal finance policy). Waxa kale oo wada-tashi ka socdaa in la abuuro machad lagu tababbaro dawladaha hoose, la isku waafajiyo siyaasadaha iyo shuruucda, isla markaana la jaan-qaada mashaariicda JPLG ee magaalooyinka Burtinle, Galdogob iyo Qandala, taas oo 10 ka dhigaysa tirada degmooyinka ka faa'ida mashruuca JPLG. Sida ay sheegeen saraakiil, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, oo kaashaneysa xafiiska Madaxweyne Ku-Xigeenka oo ah xafiiska hormuudka u ah maamul-baahinta, waxa ay si wada jir ah u wada sameynayaan wacyigelin baahsan oo lagu faafinayo siyaasadda maamul-baahinta, si ay u suuto-gasho in la taabba-gesho qorshaha dib-u-habeynta maamul-baahinta. Marka la eego qorshaha, Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo wasaaradaha kale ee ay khuseyso waxa ay xoojin doonaan miisaaniyadda horumarinta dawladaha hoose si loogu suurto-galiyo degmooyinka JPLG in ay adeegyo aasaasi ah oo hufan siiyaan degmooyinkooda. Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxa ay hirgelineysaa qorshe kor loogu soo qaadayo awoodda waxqabad ee dawlaha hoose si loo buuxiyo dal-daloollada ku jira dawladaha hoose, ayada oo diiradda la saarayo degmooyinka leh goleyaal degaan.

PDRC waxa ay goleyaasha degaanka iyo shaqaalaha dawladaha hoose ee Puntland siisay tababbarro kor loogu qaadayo aqoontooda dhanka dawlad wanaagga, ka qayb-galka dadka, iyo barashada shuruucda iyo xeerarka. Sannadkii 2014-kii oo keliya, PDRC waxa ay tababbar siisay toddoba goleyaal degaan oo cusub, welina waxa u qorsheysan in ay tababbarro noocaas oo kale ah siiso degmooyin kale. Su'aasha u baahan jawaabtu waxa ay tahay sidee loo taabba-gelin karaa siyaasadda maamul-baahinta si loo gaaro himilada Puntland ay leedahay ee ah hab-dawladeed wax-ku-ool ah oo ku dhisan maamul baahsan? Intaa waxa dheer, sidee bey dawladdu, ayada oo kaashaneysa ururrada bulshada rayidka ah sida PDRC, gacan u siin kartaa dadaalka kor loogu qaadayo awoodda waxqabad ee goleyaasha degaanka, isku-xir (coordination) intee le'eg baase loo baahan yahay?

### 4.5.2 Xoojinta Ka-qaybgalaka Arrimaha Degaanka

Waxa dadaal loogu jiraa in la kordhiyo ka-qaybgalka dadka arrimaha muhiimka ah ee degaanka. Marka la eego qorshaha deggan, Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxa ay qaban doontaa hawlo ay dadku ka qayb-galaan, iyo wada-tashiyo lagu qaban doono magaalooyinka Burtinle, Galdogob iyo Qandala, waxa ayna qaadi doontaa olole ay ku taabba-gelineyso siyaasadda maamul-baahinta ee dhawaan la ansixiyey. Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxa u qorsheysan in ay xoojiso ka qayb-galka dadka ee habka go'aan gaarista degaanka iyo horumarinta ayada oo taabba-gelineysa habraaca u deggan hawl-gelinta dadka iyo qaabab kale, si loo hubiyo in dadku ka qayb-galo qorsheynta, dejinta miisaaniyadda, iyo ka-baaraan-degidda mudnaanaha heer degaan. Ayada oo kaashaneysa UNICEF, wasaaraddu waxa ay billawday qaab lagu cabbirayo sida dadku u arkaan iyo sida ay ugu qanacsan yihiin waxqabadka iyo adeegga dawladaha hoose ee Puntland. Habkan cabbiraadda waxa lagu tijaabin doonaa qaar ka mid ah degmooyinka ka faa'ida mashruuca JPLG.

PDRC, ayada oo adeegsaneysa tiirka maamul-baahinta iyo qaybta maqal-muuqaalka ee guur-guura (Mobile Audio Visual Unit), waxa ay gacan ka geysataa xoojinta ka-qaybgalka dadka ayada oo u mareysa kulamo ballaaran, doodo, iyo filimo loogu talo-galey in lagu xoojiyo xiriirka u dhexeeya bulshada iyo golaha

degaanka. Degmooyinkaas intooda badan kama hawl-galo mashruuca JPLG, dadaalkaas oo miraha maamul-baahinta gaarsiiyey degmooyinkaas, ayaga oo aan inta badan helin mashaariic kor loogu qaadayo awooddooda waxqabad.

Arrinta u baahan in laga baaraan-dego, ee la xiriirta wanaajinta ka qaybgalka dadka, waxa ay tahay "maxaa la yeelayaa si dumarka, dhallinyarada iyo beelaha la hayb-sooco si fir-fircoon uga qayb-galaan hababka go'aan gaarista heer dawlad hoose?"

### 4.5.3 Wax ka qabashada Kororka Degmooyinka

2013-kii dawladdu waxa ay samaysay daraasad lagu ogaanayo xaaladda degmooyinka, dadka ku nool iyo awoodda dakhli dhalin ee degmooyinka Puntland. In kasta oo uu dadku dareen weyn ka qabo kororka degmooyinka, haddana wax badan lagama qaban arrintan. Lama dhaqan gelin natiijadii ka soo baxday daraasadda iyo weliba qorshaha u deggan maamul-baahinta (kaas oo qeexaya in ugu dambeyn Maarso 2014 la dhiso guddi u hawl-gala soohdimeynta), sababta oo ah khibrad iyo dhaqaale la'aan jirtey. Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxa ay dhawaan u gudbisay codsi hay'adda Somalia Stability Fund (SSF), si ay dawladda Puntland uga taageerto soohdimeynta degmooyinka. Hase yeeshee, ayada oo uu soo if-baxay guddiga federaalka ah ee doorashooyinka iyo soohdimaha (federal electoral and boundary commission) ee Muqdisho (kaas oo Puntland qaaddacday), waxa ay u badan tahay in beesha caalamku taageeri doonto qorshahan. Haddaba, si xal loogu helo caqabadaha la xiriira soohdimaha degmooyinka, waa in la is-weydiiyaa su'aalahan hoos ku xusan:

- Shuruuc iyo xeerar noocee ah bay dawladdu ugu baahan tahay magacaabidda degmo ama gobol cusub?
- Dawladdu weli fursad ma u leedahay in ay dib-u-eegis ku sameyso shuruudaha lagu xushay degmooyinka hadda jira, ayada oo loola jeedo in wax laga qabto cawaaqib-xumada ka dhalatay soohdimaha degmooyinka ee lagu muransan yahay iyo tirada degmooyinka ee faraha ka baxday?

### 4.5.4 Xoointa Awoodda Dakhli-Ururin ee Dawladaha Hoose

Wasaaradda Arrimaha Gudaha, oo kaashaneysa hay'adda qaramada midoobay u qaabilsan horumarinta dhaqaalaha (United Nations Capital Development Fund - UNCDF) waxa ay dhawaan billawday hindise abaabul dhaqaale dawlad hoose oo lagu taageerayo labo degmo oo ka mid ah degmooyinka Puntland, ujeeddaduna tahay xoojinta awoodda maamul iyo tan dhaqaale abuuris ee degmooyinkaas. Wasaaradda iyo mashruuca horumarinta degmooyinka (JPLG) waxa ay sidaa oo kale soo gaba-gabeeyeen masaynta siyaasadda maaliyadda degmooyinka si kor loogu qaado maareynta maaliyada guud ee heer degmo.

Sameynta aaladda casrigaa ee sahaminta dhulka (GIS), aaladda biil bixinta (BIS) iyo hirgelinta hannaanka caddeymaha ganacsiyada (license) ee degmooyinka Puntland waxa ay fursad u yihiin dhaqaale abuurista degmooyinka. Sidaa oo kale, Wasaaradda Maaliyadda waxa ay dib u dar-dar gelisay nidaamka lacageed ee lagu kabayo dawladaha hoose si ay u caawiso degmooyinka shaqadoodu hoosayso, una maalgeliso baahiyaha dadka degmooyinka qaarkood ee aan dhaqaale ahaan isku filnayn. Su'aalaha soo socda ayaa ah qaar ka mid ah kuwa ugu muhiimsan si loo wajaho ilaha kooban ee dhaqaalaha degmooyinka:

- Qaab-dhismeed dakhli noocee ah baa loo baahan yahay si loo xoojiyo awoodda dhaqaale abuuris ee degmooyinka, loona hubiyo ka faa'ideysiga ilaha dakhli ee dawladda hoose, ayada oo laga faa'ideysanayo kabka dowladda dhexe?

- Sidee baa hawlaha dakhli (ururinta) loo hagaanjin karaa heer degaan, mid dawladda dhexe iyo tan federaalka?

### 4.5.5 Xoojinta Xiriirka Hay'adaha Dawladda

Ujeeddada ka dambeysay aasaasidda Guddiga Maamul-baahinta ee wasaaradaha isku dhafka ah ee 2009-kii iyo magacaabidda xafiiska madaxweyne-ku-xigeenka 2012-kii si uu hormuud ugu noqdo hannaanka maamul-baahintu waxa ay ahayd dib-u-habeynta, iyo xoojinta iskaashiga, wada-shaqeynta iyo xog-is-weydaarsiga dawladda dhexe iyo dawladdaha hoose. Sidaa oo kale, dhismaha Ururka Dawladaha Hoose ee Puntland waxa uu qayb wayn ka yahay adkeynta xiriirka, wada-shaqeynta iyo wax is-weydaarsiga dawladdaha hoose, si uu ugu qareemo, una kormeero dowrka iyo xaaladaha dawladdaha hoose.

Intaa waxa dheer, Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxa ay dabagal ku sameyn doontaa natiijadii ka soo baxday shirkii maamul-baahinta ee dhawaan la qabtay, kaas oo ay ka soo qayb-galeen guddoomiyeyaasha gobollada, duqeyda degmooyinka, iyo xog-hayeyaasha dawladaha hoose, waxa uuna dhici doonaa sannadkiiba hal mar si loo hubiyo in shirkaasi uu xoojiyo iskaashiga, iyo is-weydaarsiga aqoonta iyo khibradda. Su'aalaha soo socda waa qaar ka mid ah kuwa ugu muhiimsan si xal loogu helo caqabadaha xiriirka dawladaha hoose iyo dawladda dhexe:

- Marka laga yimaado dadaalada socda ee ay wadaan daneeyeyaasha kala duwan ee ku aaddan wada-shaqeynta dawladdaha hoose iyo dawladda dhexe, ma jiraan qaabab kale oo la isugu xiri karo si loo helo iskaashi wax-ku-ool ah?

| **Waax** | **Wadar Ka-qayb-galeyaal** | % |
|---|---|---|
| Ganacsato | 18 | 12.76 |
| Xubno Goleyaal Degaan | 22 | 15.6 |
| Odayaal | 12 | 8.5 |
| Duqeyda Magaalooyin | 11 | 8 |
| Saxaafadda | 3 | 2.12 |
| Xirfadley | 8 | 5.6 |
| Guddiyada Tuulooyinka | 7 | 5 |
| Dumar | 17 | 12 |
| Dhallinyaro | 12 | 8.5 |
| NGO | 1 | 0.7 |
| Dadka La Hayb-Sooco | 3 | 2.12 |
| Mas'uuliyiinta Degmada | 15 | 10.6 |
| Indheer-garad | 12 | 8.5 |
| **Total** | **141** | **100** |

*Shaxda 5: Ka-qaybgalayaasha oo Koox-koox ah*

# 5 Gunnaanad

Hawlaha Xarunta Horumarinta Cilmi-baarista Puntland (PDRC) ay qabato ee la xiriira mawduucyada Barnaamijka Tiirarka Nabadda waxaa lagaga warbixiyey tabaradii la siiyey goleyaasha degaanka, dadaallada dib-u-heshiisiineed ee bulsho iyo kulamo loogu qabtay dadweynaha iyo golayaashooda, waxaana loo furay madal-wadahal iyo awood-siinta lagama maarmaanka u ah. Si kastaba ha ahaatee, ka dib dhamaystirkii astaynta iyo ansixintii waijgii koowaad ee barnaamijka tiirarka nabadda, sida lagu soo sharraxay qoraalka qaybtiisa hore; Hay'adda PDRC waxa ay gudo-geli doonta wajiga fulinta si wax looga qabato caqabadaha gaar-gaarka ah ee la soo astayey.

Xarunta Horumarinta Cilmibaarista Puntland, PDRC, waxay soo bandhigi doontaa taalooyinkii daneeyayaasha kuwaas oo isugu jira caqabadiihii ay arkeen iyo xalkii ay soo jeediyeen si mawduuca cilmibaarista loogu badalo waxqabad ama hawlgal. Si taas loo suurto-geloyo waxaa laga maarmaan ah in la abuuro guddi-hawleed ka kooban shaqsiyaad saameyn/karti leh, kuwaas oo leh khibraad gaar ah oo la xiriirta saddexda tiir. Guddigaasi ka kooban dad go'aan-qaadasho leh, Is-beddel-doon ah, khibrad u leh majaalkaas, ayaa hoggaamin doona fulinta barnaamijka iyaga oo xaqiijin doona helista xal la tiigsado.

Hawsha Astaynta iyo Anisixintii cilmibaarista oo ku xigtay ee lagu sameeyey Shirkii Daneeyayaasha Puntland ayaa tilmaamaysa in ay jiraan caqabado adag oo hortaagan nabadda iyo xasilloonida Puntland. Dhibaatooyinkaasi waa kuwa kala duwan dhanka dabeecaadda, heerka ay gaarsiisan yihiin iyo saamayntooda, una baahan in taxaddar dheeraad ah loo yeesho markii la rabo in xal-waara laga gaaro. Marka laga eego dhanka Amniga iyo Sareynta/Taabbagelinta Sharciga, ka qaybgalayaashii Shirkii Daneeyayaasha Puntland waxa ay soo bandhigeen jiritaanka awood darro gaamurtay oo haysata hay'adaha amniga iyo garsoorka, xuduudo aan soohdimaysnayn, iyo kuwo lagu muran-san yahay, xiriirka booliska iyo bulshada oo aan wanaagsanayn, xag-jirnimo, kaluumaysi sharci darro ah iyo isku dhacyada qabiil ee ku salaysan khayraadka dabiiciga ah arrimahaas oo ah kuwa ugu daran-daran ee u baahan in ay fiiro gaar u yeeshaan dowlada iyo beesha caalamkuba. Si kastaba ha ahaatee, intii lugu jiray wajigi astaynta waxaa jirtay saadaal-wanaagsan taas oo ka tarjumaysa hannaanka dib-u-habaynta hay'adaha aminiga iyo garsoorka oo ay dawladda Puntland daadihinayso, ka go'naanshaha beesha caalamka ee taageeridda dadaaladaas, kororka feejignaanta dadweynaha iyo nacaybka argagaxisada/xagjirnimada iyo burcad-badeedda loo qabo, iyo kororka nacaybka loo qabo haysashada hubka. Intaas waxaa dheer, kaalinta muhiimka ah ee ku leeyihiin odayaal dhaqameedyada, Culumaa'udiinka la dagaalanka burcad badeedda iyo argagaxisinimada iyo ilaalinta nabadda waxaana suurtagal ah in arrinkaas laga

jiba keeno.

Daraasaddaan ayaa lagu soo ogaaday in ay inta badan ee ka-qayb-galeyaashu ay amniga iyo sarreynta sharciga u arkeen in ay tahay qaybta ugu muhiimsan ee keeni karta xasilooni iyo horumar. Ka-qayb-galeyaashu intii lugu gudajiray wajigii astaynta waxa ay si joogto ah carrabka ugu adkaynayeen baahida loo qabo helidda deegaan ammaan ah oo saldhig u noqan kara horumarka dhaqan, dhaqaale iyo siyaasadeedba. Sidaas daraadeed, hagaajinta amniga iyo xasilloonida iyo hubinta sugnaanta sarreynta sharciga ayaa guud ahaan muhiim u ah dimoqraadiyadda iyo baahinta xukunka.

Daraasadii Astaynta caqabaduhu waxay kaloo daaha ka qaaday tiro caqabado ah oo isasaamaynaya isla markaasna hortaagan isbaddelka siyaasadda Puntland heer degaan iyo mid maamul goboleedba. Awoodda hay'adaha oo liidata iyo sii socoshada siyaasadda ku salaysan qabiilkuba waxay caqabad ku noqdeen dadaaladda baahinta xukunka iyo in Puntland si buuxda looga hirgeliyo nidaam maamul oo dimoqraadi ah oo dhamaystiran. Intaas waxaa dheer hooseynta wacyiga dadweynaha, fahanka diqomraadiyadda iyo nidaamyada doorashooyinka, soohdimeyn la'aanta xuduudo qeexan oo u dhexeeya degmooyinka iyo gobbolada Puntland, la'aanta diwaangelinta iyo aqoonsiga cod-bixiyayaasha, iyo sidoo kale maxakamadii dastuuriga ahayd oo iyana meesha ka maqan ayaa waxay yihiin caqabado dheeraad ah oo hortaagan in si buuxda loo gaaro geedi-socod dimoqraadi ah. Weliba, horumarkan gaabiska ah ayaa sii dardargalinaya rabitaanka dadweynaha ee ay ku doonayaan in horey loo dhaqaajiyo geedi-socodka dimoqraadiyada. Ugu danbeyntii, Maamulkaan cusub ayaa muujiyey taageeridiisa ku aadan dib-u-bilaabista hannaanka dimuqraadiyadda, una bilaabi doona waqtiga u dhakhsaha badan, walina waxa jira waqti ku filan oo horumar looga samayn karo arrinkaas, inta uusan dhamman waqtida uu Madaxweyne Gaas talada hayo. Casharadii laga bartey joojintii doorashooyinkii goleyaasha degaanka 2013 kii, waa in lagu hirgeliyo dadaalada dimuqraadiyada ee mustaqbalka.

Caqabadaha ugu waaweyn ee haysta baahinta maamulka waxaa ka mid ah: awoodda ha'adaha dawlada oo liidata (awoodda maamul, dhaqaale iyo shaqaalaha dowlaha hoose); ka-qaybgalka dadweynaha oo hoosaysa, dhaqaalaha oo xadiddan; kororka tirada degmooyinka iyo soohdimeyn la'aantooda iyo isku xirnaanta maamul dhexe iyo kan degmo oo aan heerkii la rabay gaarsiisnayn. Isla-mar ahaantaasna, waxaa jira isbaddel badan oo muujinaya koboca dhismaha hay'adeed iyo dhismaha awoodda maamul dawladeed oo baahsan. Sida dimoqraayidda si lamid ah, heer gobol waxaa horumarka ugu muhiimsan ka mid ah ee abid laga gaaray dhanka lahanshaha dadweynaha iyo kalsoonida ay shacabku ku qabaan hannaanka baahinta xukunka. Waxaa kaloo ka mid ah horumarka la gaarey yagleelidda xafiiska uu hormuudka ka yahay Madaxweyne Ku- xigeenka ee hagaya hannaanka maamul-baahinta, meelmarinta iyo anisixinta shuruucda maamul-baahinta iyo kororka dadka aqoonta leh ee u tartamaya jagooyina dowladaha hoose.

Waxaa si cad u muuuqata in ay jiraan daddaalo loo dhan yahay oo heer kastaba leh si looga gudbo caqabado badan oo wali hortaagan horumarka ammaan iyo dib-u-heshiisiinta bulshada, baahinta xukunka iyo dimoqraadiyadda Puntland, iyo sidoo kale in la asaaso isbaddel wanaagsan oo la taaban karo. Si looga guul gaaro arrinkaas. waxaa muhiim ah in ay wadashaqeeyaan dadweynaha, bulshada rayidka ah, dawladda heer walba iyo beesha caalamkuba. Inkasta oo hawl badani harsan tahay, Daraasadda PDRC waxay daboolka ka feydey in ay jiraan horumar iyo daddaalo ka socda Puntland (kuwaas oo isugu jira kuwo heer dawlad dhexe ah iyo sidoo kale heer degaan) oo muujinaya ka guul gaarista ujeedooyinkaas iyo meel-marinta is-baddeladaas.

# 6 Raadraaca

"2013 Budget." Ministry of Finance Report. January 2013.

"Joint communiqué." Puntland and Federal Government of Somalia. April 2015.

Lynge, Karina. 2009. "High Presence of and Easy Access to Small Arms." Community Safety and Small Arms in Somaliland: Analysis and Recommendations. Somaliland: Danish Demining Group. (Q2099).

Karp, Aaron. 2007. "Completing the Count: Civilian firearms." Small Arms Survey 2007: Guns and the City. Cambridge: Cambridge University Press. (Q5).

Puntland Development and Research Center (PDRC). "Participatory Poll on Prospects of Democratization in Puntland." Garowe, 10 September 2014.

Puntland Development and Research Center (PDRC). "Puntland Note: Mapping the Foundations of Peace Challenges to Security and Rule of Law, Democratisation Process and Devolution of Power to Local Authorities." Pillars of Peace: Somalia Program, in collaboration with Interpeace, 27 May 2014.

Puntland Development and Research Center (PDRC). "The Puntland Experience: A Bottom-up Approach to Peace and State Building." The Search for Peace: Somalia Program, in collaboration with Interpeace, 26 July 2011.

World Bank, in collaboration with PDRC. "Conflict in Somalia: Drivers and Dynamics." January, 2005.

PDRC
PUNTLAND DEVELOPMENT
RESEARCH CENTER

interpeace

In partnership
with the United Nations

*Puntland Development Research Center*
+252 5 844480 / 907 794161 (Garowe)
+252 5 844480 / 907 794161 (Galkayo)
pdrcsomalia@gmail.com
www.pdrcsomalia.org

*Interpeace*
*Eastern and Central Africa*
+254 (20) 265 52 28
eca@interpeace.org
www.interpeace.org



ISBN 978-9966-1665-7-9

Daabacaaddan waxa lagu suurtogeliyey deeqda wax-ku-oolka ah ee

Ministry of Foreign Affairs of Denmark
DANIDA International Development Cooperation

European Union
Somalia

Federal Foreign Office

Norwegian Ministry of Foreign Affairs

Sweden

Schweizerische Eidgenossenschaft
Confédération suisse
Confederazione Svizzera
Confederaziun svizra
Swiss Confederation

UKaid
from the British people